**SHARCI LR. 22** TAARIIKH: 09/08/2016

**OGGOLAANSHAHA ANSIXINTA SHARCIGA IIBKA IYO QANDARAASYADA QARANKA**

MADAXWEYNAHA J.F.S,

**Markuu Arkay:** Qodobka 87aad, Xarafka ' C ' ee Dastuurka KMG.

**Markuu Arkay :** Qodobka 90aad, Xarafka ' F ' ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Ref: 1299/3/1/9/15 ee 12/12/2015 kuna saabsan Ansixinta Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka

**Markuu Tixgeliyay:** Baahida loo qabo in Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed ay yeelato Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka

WUXUU SOO SAARAY ANSIXINTA SHARCIGAN:

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliyeed Saxiixo sharcigan, Madaxwaynuhu waxa uu oggolaaday Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.

**Qodobka 2aad.**

Sharcigan waxa uu dhaqangelayaa maalinta uu Madaxwaynuhu Saxiixo waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 09/08/2016

**Madaxweynaha J.F.S**
**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**

Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

**Federal Republic of Somalia**
**House of the People**
**Office of the Speaker**

**Ref:** 1299/3/1/9/15:الرقم

**Mogadishu,** 12th December 2015 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

---

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

---

Og: Wasaaradda Maaliyadda.
Muqdisho.

---

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

---

Og: Hanti-Dhowrka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

---

Og: Guddiga Miisaaniyadda, Maaliyadda, Qorsheynta iyo La-xisaabtanka
Hay'adaha Dowladda - L/H. Golaha Shacabka

---

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/. Golaha Shacabka.

---

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda
L/H. Golaha Shacabka

---

Ujeeddo: Ansixinta Sharciga iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.

M.ne Madaxweyne;

Waxaan kuugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Sharciga iibka iyo Qandaraasyada Qaranka oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka Kalfadhiga 7aad ee fadhigiisii 19aad 12kii Diseembar 2015 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jumhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

Tell: +252 612224442/ +252 615577472
E-mail. speaker@sfp.so
Website: www.sfp.so

- Xildhibaannad Oggolaadeen: 143 (Boqol Afartan iyo Saddex Xildhibaan).
- Xildhibaannada diidey: 3 (Saddex Xildhibaan).
- Xildhibaannada ka aamustay 1 (Hal Xildhibaan).

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda si waafaqsan Qodobbada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka JFS.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

# ANSIXINTA SHARCIGA IIBKA IYO QANDARAASYADA QARANKA

| Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS | | | |
|---|---|---|---|
| Tirada Xubnaha Codeysay 147: | Ogol (143) | Diidmo (3) | ka aamustay (1) |
| Saxiix: M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari" | | Taariikh: 12th December 2015 | |

| Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiix: M.ne Jeylaani Nuur Iikar | Taariikh: 12th December 2015 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiix: M.ne Mahad Cabdalla Cawad | Taariikh: 12th December 2015 |

Mahdi
Ha la badiyo
3/11/2015

House of the People of the Federal Republic of Somalia
Committee on , Finance, Planning and Financial Oversight of Public Institutions

جمهورية الصومالي الفدرالية
مجلس الشعب
لجنة الشئون ، المالية، التخطيط، ومحاسبة هيئات الدولة

Golaha Shacabka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Guddiga, Maaliyadda, Qorshaynta iyo La-Xisaabtanka Hay'adaha Dowladda

---

2 /11/2015

**Ref:GMQ/BFS/10/138/2015**

**Ku: Guddoonka Baarlamaanka** **= Muqdisho=**

**Ujeeddo: Soo gudbin Nuqulka Hendise Sharciyeedka Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka**

**Mudane Guddoomiye,**

Guddiga Maaliyadda iyo Qorsheynta ee Baarlmaanka J.F.S wuxuu si xushmad leh kuugu gudbinayaa nuqulka hendise sharciyeedka Iibka iyo Qandarasyada qaranka oo loo diyaariyey akhrinta 2aad ee Golaha Shacabka, si ay u soo dersaan.

**Mahadsanid**

**Xil. Saman Maxamed Sh. Daahir**

**Guddoomiyaha Guddiga**

GUDDIGA MAALIYADDA & QORSHEYNTA
FINANCE & PLANNING COMMITTEE
OF THE SOMALI FEDERAL PARLIAMENT
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

BARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA GUDDOOMIYAHA
GELID / RECEIVED
TAR: 02/11/2015
TIX: 761
SIXIIX: Ismaaciil

Jamhuuriyadda Soomaaliya
Xukuumadda Federaaliga ee Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال
الحكومة الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

*The Federal Government of the Somali Republic*
Office of the Prime Minister

**Ref: XRW/GB/00.932/05/14** **Taariikh: 22/05/2014**

**Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka** **=Muqdisho=**

**Ujeeddo:- Soo Gudbin Hindise-Sharciyeedka "Dib-u-eegista Iibka Qaranka"**

**Mudane Guddoomiye;**

Iyadoo laga ambaqaadayo go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.28.05.14 ee 22/05/2014**, kuna saabsanaa ansixinta hindise-sharciyeedka dib-u-eegista sharciga Iibka Qaranka, oo uu Golaha Wasiirradu cod buuxa ku ansixiyey.

Sidaa darteed, Mudane Guddoomiye, waxaan halkan idinkugu soo gudbinaynaa Xeerka dib-u-eegista sharciga Iibka Qaranka, si aad uga gudataan waajibaadkiina Dastuuriga ah.

Haddaba, waxaan idinka codsanaynaa in aad fududeysaan ansixinta Hindise-sharciyeedkan maadaama baahi weyn loo qabo dhaqan-gelintiisa.

**Naga guddooma salaan diirran.**

Dr. Cabdiweli Sheekh Axmed Maxamed
**Raiisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FED. SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
SOO GELID
NO: 1202
TR: 22/6/14
SAXIIX:

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة المالية
مكتب الوزير

The Federal Republic of Somali
Ministry of Finance
Office of the Minister

**Ref: MOF /OM/234/2014** **May 10, 2014**

**Ku: Ra'isul Wasaaraha Dowladda Fedraalka Somaliya** **=Mogadisho**

**Ujeeddo: So Gudbin Dib u HabayntaHindise- Sharciyeeedka Iibka Qaranka**

## Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda:

- . Markuu arkay Qodobka 97 aad ee Dastuurka ku-Meelgaarka ah.
- .Markuu arkay Qodobka 99 aad ee Dastuuka ku- Meelgaarka ah.
- .Markuu arkay Qodobka 102aad, Farqadiissa 1aad eeDastuurka Ku-Meelgaarka ah
- Markii uu arkay Sharciga No.29,1 October 1980 ee ku saabsanaa midaynta Rugta Ganacsiga iyo Guddiga Iibka Qaranka.
- Markii uu tixgaliyey In lagama maarmaan tahay in la kalasaaro Guddiga Iibka Qaranka Iyo Rugta Ganacsiga.
- Markii uu tixgaliyey baahida loo qabo in sharciga No.29,1 October 1980 dib loo qaabeey iyadoo laga guurayo nidaamkii wada lahaanshaha wadareed Loona guurayo nidaamka suuqa xorta ah.

Mudane Ra'isul Wasaare, waxaan kaa codsanayaa in hindise- Sharciyeedka dib u habaynta xeerka No.29, 1 October 1980 oo ku saabsan dib u habaynta Guddiga Iibka Qaranka aad noo ogolaato in aad noogu gudbiso Golaha Wsaiirada si loo ansixiyo

**Mahadsanid**

**Hussein AbdiHalane**
**WasiirkaMaaliyadda**

**Ministry of Finance-Villa Somalia**
**Mogadishu, Somalia**
**Email:**hhalane@mof.gov.so; hhalane55@gmail.com
**Tel: +252-1-941064; +252-61-7088808**

XEER SHARCI Lambar 29 ee 1 Oktoobar 1980.

Mideynta Rugta Ganacsiga iyo Guddiga Iibka Qaranka.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 19 ee 10ka Abriile 1978, kuna saabsan dhismaha Guddiga Iibka Qaranka iyo beddelaaddii ka dambeysay;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 38 ee 30ka Luulyo 1970 oo ku saabsan dhismaha Rugta Ganacsiga;

MARKUU TIXGELIYEY: Xawliga ay ku socdaan hawlaha Qaranku, lana dareemay in ay lagama maarmaan tahay in la dejiyo hab fududeynaya dalabka badeecadda iyo qalabka Hay'adaha Qaranku u baahan yihiin;

MARKUU ARKAY: In fududeyntaasu ay ku iman karto mideynta hawlaha Guddiga Iibka Qaranka iyo Rugta Ganacsiga oo ka wada mas'uul ahaa suuq raadinta, hubinta sicirka, kormeerka qalabka iyo badeecadaha Hay'adaha Qaranku ay iibsadaan;

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida culus ee degdegga ah ee loo qabo in lagu dhaqaaqo dib u habeyntaas, lana soo saaro Xeer-sharci si hawlaha Maamulka Guud ee Dalka ayan u hakan;

MARKUU DHEGEYSTAY: Soojeedinta Wasiirka Ganacsiga iyo Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka-sharci ee soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la mideeyey Rugta Ganacsiga iyo Guddiga

.90

Iibka Qaranka oo lagu dhisay Sharci lambar 19 ee 10ka Abriile 1978, waxayna qaadanayaan magaca Wakaaladda Rugta Ganacsiga.

Qodobka 2aad

Wakaaladda Rugta Ganacsigu waxay qandaraasyada iyo Iibka Qaranka ku yeelaneysaa awoodihii Guddiga Iibka Qaranka ee ku xusnaa Sharciga lambar 19 ee 10ka Abriile 1978 iyo Sharciga lambar 2 ee 14ka Jennaayo 1979, waxayna ku maamuleysaa hababka Sharciyadaas ku tilmaaman.

Qodobka 3aad

Wakaaladda Rugta Ganacsigu waxay la wareegeysaa xilalkii iyo ballanqaadyadii Guddiga Iibka Qaranku uu galay, waxayna yeelaneysa xuquuqdii Guddiga hore ugu bislaaday iyo kuwa dib ka bislaanaya.

Qodobka 4aad

Wasiirka Wasaaradda Ganacsigu wuxuu Wakaaladda Rugta Ganacsiga ku yeelanayaa awood hoggaamin, toosin, kormeer iyo ilaalin guud oo buuxda.

Qodobka 5aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraraadiga Soomaaliya, isagoo dhegeystay soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo la tashiga Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, wuxuu soo saarayaa Xeer nidaaminaya qandaraasyada iyo iibka Qaranka.

Qodobka 6aad

Waxaa la burriyey Sharci iyo Xeer kasta oo aan la socon karin Xeerkan sharci.

Qod. 69aad ee Dastuurka.

Muqdisho, 1 Oktoobar 1980.

MADAXWEYNAHA JDS

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

# Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

## SHARCIGA IIBKA IYO QANDARAASYADA QARANKA

Sharci Lr: _________ ee ____________
Sharciga iibka iyo Qandaraasyada Qaranka

# QAYBTA KOOWAAD:
# ARAAR

## Hordhac:

Sharcigani wuxuu beddelayaa dhammaan shuruucdii hore ee Qandaraaska iyo Iibka ee la xiriira Habraaca Maaliyadda iyo Xisaabaadka ee ku soo baxay sharci dawladeedka tirsigiisu yahay 02 soona baxay Desember 29, 1961 iyo xeerarka tirsigoodu kala yahay 317, iyo 318 soona baxay 17kii iyo 18kii December 1962 sidey isugu xigaan.

## Qodobka 1:
## Cinwaan Gaaban

Sharcigan waxaa lagu magacaabayaa Sharciga Iibka iyo Qandaraaska Qaranka

## Qodobka 2:
## Ujeedada Sharciga

Ujeeddada sharcigan waa dhismaha qaab-dhismeedka hay'adaha maamulaya Qandaraaska iyo Iibka oo bixiya habraaca Qandaraaska Iibka ee badeecadaha, hawlaha, adeegyada iyo shuruudaha kale ee heshiis; Maamulka heshiisyada bixinta; Meeleynta haraadiga aan waxtarka lahayn, duugoobay, ama kaydka dheeriga ah iyo qalabka hay'adaha guud.
Sharcigan waxaa loola jeedaa in:

a. La Kordhiyo dhaqaalaha iyo wax-ku-oolnimada Qandaraaska iyo Iibka, iyo in lagu helo qiimaha ugu wanaagsan ee lacageed.

b. La dhiirrigeliyo daahfurnaanta iyo tartanka iyadoo la siinaya fursado ka qeybgal qandaraas iyo xog loo siman yahay;

c. La dhiirrigeliyo daacadnimo, xaqsoor, aqoonta sare, iyo la xisaabtan si loo kordhiyo kalsoonida guud ee ay ku qabaan Nidaamka Qandaraska.

d. La Fududeeyo dhiirrigelinta warshadaha Dalka iyo horumarinta dhaqaalaha.

## Qodobka 3:
## Qeexid.

Sharcigaan, haddaan si kale loo macneyn, waxaa loola jeedaa sidan:

1. **Sarkaalka Xisaabaha:** waxaa loola jeedaa qofka loo magacaabo Sarkaalka Madaxa u ah Fullinta ee Hay'adda Iibinta;
2. **Maamulka**: waxaa loola jeedaa maamulka Hay'adda Qandaraaska Iibka Hantida guud ee lagu dhisay Qodobka 35 ee Sharcigan.

3. **Dalab:** waxaa loola jeedaa qiimo-sheegta ama soo jeedin uu soo gudbiyay tartame, oo ka jawaabaya dalabka Hay'adda Iibinta.
4. **Tartame**, waxaa loola jeedaa ka-qaybgale kasta ama ka qaybgale suuragal ah ee habraaca Qandaraaska Iibka;
5. **Dammaanad Dalab:** waxaa loola jeedaa damaanad Banki ama qaab kale oo dammaanad uu la soo gudbiyay tartame dalab qandaraas si uu u xaqiijiyo waajibyada tartame dalab oo ka qayb galaya habraaca tartanka dalabka, oo uu ka mid yahay waajibka saxiixa qandaraaska iibka haddii qiimo-sheegta tartamaha qandaraaska la aqbalo si waafaqsan sharuudaha u dhigan Sharcigan iyo dokumintiyada ka qaybgalka qandaraaska.
6. **Dokumintiga Ka qaybgalka**: waxaa loola jeedaa dokumintiga dalabka ka qaybgalka qandaraaska, soo jeedinta, ama qimo-sheegta iyo dokumentiyada kale ee ay soo saartay Hay'adda Iibinta oo ay tartamayaashu qandaraaska ku saleynayaan ka qaygalkooda.
7. **Guddi:** waxaa loolajeedaa Guddiga Maamulka Qandaraaska Iibka Hantida Guud ee lagu dhisay Qaybta III ee sharcigan.
8. **Guddiga Sahanka:** waxaa loola jeedaa guddi ka kooban wakiillo ka socda waaxyaha Hay'adaha Iibinta.
9. **Qaraabada soke:** waxaa loola jeedaa oo ka mid ah waalidka, xaaska, caruurta, xididka iyo adeer, abti iyo eeddo, habaryar, ina-adeer iyo ina-abti.
10. **Bixin qandaraas**: waxaa loola jeedaa dammaanadda hanti guud uu Maamulka heshiis kula gelayo hay'ad aan dowli ahayn waqti go'an ayna ku qaadaneyso khidmad ama xushmad, ama tixgelin kale oo waafaqsan shurrudaha heshiiska qandaraska, si ay u qabato, u maareyso, u adeegsato ama ay u horumariso.
11. **Dal**: waxaa loola jeedaa Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
12. **La Taliye:** waxaa loola jeedaa ciddii bixisa xirfad aqoooneed, oo uu ku jiro adeeg la-talin.
13. **Heshiis**: waxaa loola jeedaa heshiis qoran oo dhexmaray Hay'adda Iibinta iyo bixiye, qandaraasle ama lataliye ka imaaneysa dhanka habraacyada qandaraaska iibka.
14. **Qandaraasle**: waa qof ama qof qaanuuneed oo heshiis la galay hay'adda Iibintaasi uu ku fuliyo hawlaha nooc kasta ah.
15. **Murashax Qandaraas**: waxaa loola jeedaa qof soo gudbiyey arji ka qaybgal qiimeyn hordhac ah ama u soojeedin daneyn Hay'adda Iibinta.
16. **Meeleyn**: waxaa loola jeedaa iibin ama tuuris wax aan adeegsi lahayn, dug ah ama keenis dheeri ah iyo qalab oo ay Hay'adda iibsigu leedahay sida ku cad sharcigan.
17. **Badeecad**: waxaa loola jeedaa walax nooc kasta ah oo tilmaaman, oo ay ka mid yihiin badeecooyin iyo alaab ceyriin ah; badeeco farsameysan, qalab, wax adag ama dareerto ah ama qaab gaas ah;
18. **Xukuumad:** waxaa loola jeedaa Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya
19. **Wasiir:** waxa loola jeedaa wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

20. **Damaanadda Waxqabadka**: waxaa loola jeedaa damaanad Banki ama nooc kasta oo damiin ah uu keeno bixiyaha, heshiis galaha ama la-taliyaha si ay u xaqiijiyaan waajibkooda sida waafaqsan shuruudaha dokumentiga tartanka qandaaraaska;
21. **Qandaraaska Iibka:** waxaa loola jeedaa ku helitaanka nooc kasta oo ah heshiis badeecooyin, hawlaha, adeegyo aqooneed ama adeegyo kale oo lagu hantiyo alaab iyo shuruud loo arko iney ku jirto heshiisyada bixinta iyo meeleynta;
22. **Hay'ad guud**: waxaa loola jeedaa hay'ad la siiyay miisaaniyad loo qoondeeyey iyo mas'uuliyad qorsheyn iyo adeegsi maalgelintaa, waxayna mataleysaa: Wasaaradaha Xukuumadda Dhexe, waaxyahooda iyo hay'adahooda, awoodaha, hay'adaha kale, hay'adaha qaanuuniga ah, hay'adaha dowladda, hay'adaha gaarka ah ee adeegsada hani dowladeed;
23. **Guddiga Qandaraaska Iibka:** waxaa loola jeedaa koox ka tirsan Hay'adda Iibinta oo ka kooban saraakiil ka mid ah hay'adda, oo xilalkooda lagu xusay Qaybta III ee Sharcigan.
24. **Qorshaha Qandaraaska Iibka:** waxaa loola jeedaa hawlaha la qorsheeyay ee sanad maaliyadeedka (ama jadwal taarikheedka sanadka, wax kasta oo la qabanaayo), oo ka kooban heshiisyada la soo jeediyay ee iibka, ama ay diyaariyeen Hay'adaha Iibinta.
25. **Hay'adda Iibinta**: waxaa loola jeedaa hay'ad guud oo sameyneysa qandaraaska iibka ee Sharcigaan lagu dhaqaayo.
26. **Waaxda Qandaraaska Iibka:** waxaa loola jeedaa waaxda qaab ahaan laga dhex dhisay Hay'adda Iibinta si ay u fuliso hawlaha qandaraaska iibka ee hay'adaas si waafaqsan hawlaha liiska lagu sheegay.
27. **Maalgelinta Guud**: waxaa loola jeedaa khayraadka lacageed ee miisaaniyadda dowladda, ama gargaarka, amaahda, iyo deeymaha hoos yimaada heshiiska lala galo deeq bixiyayaasha shisheeye, ama khayraadka dheeriga ah ee miisaaniyadda hay'adaha iibinta, ee loo isticmaalo in lagu fuliyo qandaraaska iibka guud.
28. **Sarkaal Guud**: waxaa loola jeedaa qof haysta ama ku sime ka ah xafiiska Adeegga Guud oo mushaari ah, waxaana ka mid ah saraakiisha heerka dawlada hoose.
29. **Madaxweyne** waxaa loola jeedaa Madaxweynaha Jamhuriyadda Federaalka Soomaliya.
30. **Guddiga Dib u Egista** waxaa loola jeeda Guddiga Madaxabannaan ee Dib u Eegista ee lugu dhisay Qodobka 49 ee sharcigan.
31. **Xeernidaamiye** waxaa loola jeeda Xeernidaamiye uu soo saaray Wasiirka si loo gaaro ujeedooyinka loona fuliyo qodobada Sharcigan.
32. **Adeegyo:** waxaa loola jeeda waxqabad kasta ee dabeecad xirfad aqooneed ku dhisan oo aan lagu cabiri Karin wax soo saar jir ahaaneed.
33. **Adeeg Bixiye:** waxa loola jeedaa qof ama qof qaanuuneed oo heshiis kula jira Hay'adda Iibinta ee bixinta badeecadaha.
34. **Adeeg farsamo:** waxaa loola jeedaa adeeg farsamo kasta oo lagu cabiri karo wax soo saar jir ahaaneed.

35. **Hawlaha:** waxaa loola jeedaa dhammaan hawlaha la xiriira dhismaha, rakibidda qalabka ama alaabaha, iyo adeegyada la xiriira dhismaha.

## Qodobka 4:
## Dabbaqaadda Sharcigan

1. Xeerkan waxaa lagu dabaqayaa dhammaan qandaraaska iibka badeecadaha, hawlaha, iyo adeegyada, meeleynta waxyaabaha aan adeegsi lahayn ama duug ah, keenis dheeri ah iyo qalabka; iyo dhammaan heshiisyada ay bixiyaan haya'daha guud ee Xukuumadda Federaalka.
2. Qandaraaska iibka guud waxaa lagu baahinayaa hay'adaha iibinta waxaana ka mid ah qandaraas kasta oo si buuxda ama qeyb looga maalgelinayo hantida guud.
3. Sharcigan waxaa lagu dabqayaa hay'adaha dowladda ee hoos ku qoran
   a. Wasaaradaha dowladda dhexe, waaxyahooda, iyo hay'adahooda
   b. Guddiyada Qaranka
   c. Hay'adaha Guud
   d. Shirkadaha, ay si guud ahaaneed ama qeyb ahaan leedahay Dowladda ayna ku jiraan dhammaan shirkadaha ay dowladda ku leedahay saami badan; iyo.
   e. Hay'ad kasta oo si gaar ah loo leeyahay, oo loo xilsaaray masuuliyad ah inay fuliyaan hawlaha iyagoo isticmaalaya hantida guud;
4. Waa xaqiiq sugan in kuwan soo socda aan lagu dabaqayn Sharcigaan iibka qandaraasyada.
   a. Adeegyada uu haayo qofka ugu horayn ug(u) shaqeeya Hay'adda Iibinta shaqaale ahaan;
   b. Ka soo iibinta badeecadaha, hawlaha adeegyada ka yimaada Hay'ad Iibin kale;
   c. Soo iibinta hanti ma guurto ah, shirkado ganacsi, keydka, saamiyada, iyo sida hantida kale ee ganacsi ama qalabyo.

## Qodobka 5:
## Waxa aan Khusayn

Sharcigan sinnaba laguma dabaqayo arrimaha soo socda:

1. Haddii Sharcigaan qodobo ka mid ah ay ka hor imaanayaan sharciga Iibka ee Hay'ad caalami, sida Q.M. iyo laamaheeda, Urur kale oo Caalami ah ama Urur Goboleed ay Soomaaliya xubin ka tahay ama deeqbixiye Caalami ah oo waddanka waxtar u leh oo ay Xukuumadda Heshiis la gashay, waxaa mudnaanta la siinayaa sharciga Iibka ee Hay'adda caalamiga
2. Haddii Sharcigaan qodobo ka mid ah ay ka hor imaanayaan Sharciga Iibka Deeqbixiye madax bannaan ama Caalami ama Goboleed aan ka mid ahyn kuwa lagu sheegay Faq.1aad ee qodobkan waxaa mudanaanta la siinayaa Sharciga Dalka

3. Qan daraaska Iibka qalabka ee xoogga dalka ama amniga qaranka waxaa lagu dhaqaya qoddobada soo socda:
   i) Marka Wasiirka mas'uulka ka ah Difaaca ama madaxa hay'ad kasta oo ammaanka qaranka ah ay go'aamiso in qandaraas iib kasta ee la xiriira difaaca qaranka ama ammaanka qaranka u baahan yahay codsi habraacyo gaar ah, habraacyada lagu dejiyay Sharcigan waxaa bedeli kara Maamulka ay khuseyso, laakin isbeddelkaas waa in loo maamulaa si adag oo la xiriira tixgelinnada difaaca iyo ammaanka.
   ii) Ujeedada qodobka 5(3)(i), qandaraaska iibka ee waxyaabaha baahida guud loo qabo sida dharka ciidanka, waraaqadaha xafiisyada, qalab xafiiseed iyo gaadiidka caadiga ah ee xoogga dalka ama ha'y'adaha amniga looma tirinaayo iney ku lug leeyihiin difaaca iyo amniga qaranka.
   iii) `Maamulka oo la tashanaaya Hay'adda Iibinta ee u xilsaaran difaaca iyo amniga Guud waxay u sameyn kartaa habraac guud ama mid gaar ah oo la xiriira Iibka ciidamada iyo amniga Guud.

**Qodobka 6:**

**Ka-reebid**

1. Badeecadaha, adeeg bixiyayaasha, qandaraasleyda, la taliyayaasha ka soo jeeda dal uu reebayo sharcigan haddii:
   a. Sharciga Jamhuuriyadda Federalka Somaliya ama xeernidaamin rasmi ah uu reebayo xiriirro ganacsi ee dal gaar ah., ama
   b. Uu jiro qaraar ka soo baxay Golaha Amniga Qaramada Midoobay ee ku xusan Cutubka VIIaad ee Axdiga Qaramada Midoobay oo reebaya in wax xiriir ah lala yeesho dal gaar ah

**Qodobka 7:**

**Dan iska-horjeeda**

1. La taliyaha waa inuu u bixiyaa la talinta si xirfadnimo, daacadnimo iyo dhexdhexaad ah isagoo aan wax tixgelin siineyn shaqo mustaqbal, iyo bixinta la talineed oo looga hortago iska hor imaad ku yimaadda, danaha gaarka u ah shirkadiisa iyo hawlaha kale ee loo idmaday.
2. la taliyaha looma dhiiban karo, hawl kasta oo ka horimaaneysa xilalkiisii hore ama kuwa taagan. Hay'adda Qandaraaska Iibinta kama dhigan karto la taliye haddii ay jiraan xaaladaha soo socda:
   a. Lataliyaasha iyo cid kasta oo xiriir la leh looma dhiiban karo hawl kasta oo ka horimaneysa hawl kale ee loo xilsaartay la taliyayaasha.
   b. la taliyayaasha (oo ay ku jiraan shaqaalahooda, iyo la taliyayaal-hoosaadyo) oo xiriir ganacsi ama qoys la leh xubin shaqaale ee Hay'adda Qandaraaska Iibinta, kuwaasoo si toos ah iyo si dadbanba ugu lug lahaa diyaarinta Shuruudaha Heshiiska, ama habraaca xulashada ama kormeerka heshiiskaas looma qaadan karo heshiiskaas.

## Qodobka 8:
## Ka Qayb Qaadashada Haweenka ee Iibka iyo Qandaraaska

Hirgalinta sharcigan iyo u hoggansanaanta Dastuurka Soomaaliyeed, oo dhiirigelinaaya daryeelka iyo ka qaybgalka haweenka, Wasiirka ayaa ku go'aaminaaya xeernidaamiyaha, boqolkiiba inta ugu yar ee haweenka ah ee ka mid noqoneysa Guddiga Maamulka Qandaraaska Iibka Hantida Guud iyo Guddiga Madaxabannaan ee Dib u Eegista Qandaraaska iyo Iibka.

## Qodobka 9:
## Mas'uuliyadda Qandaraaska Iibka ee Daryeelka Degaanka iyo bulshada

Iyadoo la hirgelinayo Sharcigaan, hay'adaha qandaraaska iibinta waa inay hubiyaan in xirmooyinka iyo bixinta heshiiska qandaraaska aysan ku jirin badeecadaha iyo hawlo kasta ay maamulada qaranka ee mas'uulka ka ah caafimaadka iyo degaanka ku dhawaaqaan iney waxyeeleynayaan dadka iyo degaanka.

## Qodobka 10:
## U adeegsiga elektroonikada Qandaraaska Iibka

Maamulka ayaa u oggolaan kara Hay'adaha Iibinta inay u adeegsadaan isgarsiin elektroonik ah baahinta ugu yeerista dalabka tartanka, soo gudbinta dokumeentiyada iyo dalabyada qandaraaska haddii:

a. Lagu heli karo Amaan ku filan isgaarsiintaas, iyo
b. Tartamayaasha ay si fudud uga heli karaan dukumentiyada qandaraaska iibka iyo ineysan jirin xannibaad.

## Qodobka 11:
## Mashaariic Wadaag

Tartamayaashu waxey xor u yihiin iney iskood uga qaybgalaan dalabka qandaraaska si madaxbannaan ama si mashaariic wadaag ula galaan shirkado kasta ee dalka ama shisheeye.

## Qodobka 12:
## Xirfadnimada Hawlaha Qandaraaska Iibka

Qandaraaska Iibka ee la xiriira hawlaha waa in ay fuliyaan dadka loo tababaray aqoonna u leh qandaraaska iibka, si waafaqsan tilmaamaha iyo sharuudaha lagu helaayo sida uu u dejiyay Maamulka.

## Qodobka 13:
## Iska horimaadka Sharciyada kale iyo Xeer Nidaamshayaasha

1. Qoddobada sharcigan ayaa mudnaan leh haddii uu jiro iska horimaad ka dhexeeyo Sharcigan iyo:
    a. Sharci kasta oo kale;

b. Xeernidaamyo ka dhashay Sharcigan ama sharci kale; iyo

c. Wareegto kasta ee uu soo saaray Maamulka ama maamul kale.

## Qodobka
## 14: Luuqadda

Dokumentiyada Qandaraasyada caalamiga ah waa inay ku qornaadaan luqadda ingiriiska iyo Carabi kuwa gudahana waa inay ku qornaadaan af-Somali

## Qodobka 15:
## Xeernidaamiyaasha Qandaraaska Iibka, Tusmooyin iyo Qoraallo

1. Wasiirka wuxuu talada Maamulka ku soo saarayaa Xeernidaamiyayaal lagu faafiyo Faafinta Rasmiga, si loo xaqiijiyo ujeedooyinka iyo fulinta hagaagsan ee qodobada Sharcigan ee la xiriira dhammaan qodobada Sharciga lana sugo sida ku xusan Xeernidaamiyasha.
2. Maamulka ayaa si taxadir leh u soo saaraaya macaamiisha sida ku xusan Sharcigan shuruuda dokumeentiyada ka qaybgalka dalabka iyo soo jeedinta, qaabab ka mid ah Qorshayaasha Qandaraaska Iibka, tusmooyin iyo qoraallo dhaqangeliya Sharcigan. Xeernidaamiyayaal kasta, tusmooyin, qoraallo ama dukumentiyada la xiriira ee ka horimanaya ama qodobo kasta ee aan la socon Karin Sharcigan waxay noqonayaan wax kama jiraan.

## Qodobka 16:
## Khiyaano iyo Musuqmaasuq

1. Dhammaan dhinacyada waa inay ilaaliyaan heerarka ugu sarreeya ee anshaxa inta lagu gudo jiro habraaca qandaraaska iibka, iyo fulinta heshiiska. Waxaa loola jeedaa wax kasta oo musuqmaasuq, dhagar, fududeyn, qasbid, khiyaano ama falal ishortaag ay sameeyaan saraakiisha guud, tartamayaasha, adeeg bixiyayaasha, qandaraasleyda, iyo kuwa ka hoos shaqeeya, la taliyayaasha oo soo saaranaya faa'iido sharci darro ah.

2. Si waafaqsan siyaasaddaan iyo ujeedooyinka qodobadaan, shuruudaha ku xusan Qodobka 3aad waxaa loo qeexayaa sidan soo socota:
    a. Laaluush waa balan qaadid, bixin, qaadasho, ku qalqaalin, si toos ama dadban, wax kasta ee qiimo leh oo si qaldan u saameyneysa falalka qof kale;
    b. Khiyaano fal, ama fal la'aan kasta, oo ay ku jirto isaga been sheega, si uu qalad u geliyo ama isku daya inuu marin habaabiyo dhinac, si uu u helo dhaqaale ama faa'ido kale ama ka leexdo waajib;
    c. Fududeyn waa heshiis dhexmaraya laba dhinac ama ka badan oo loogu talagalay in lagu gaaro ujeeddo aan habboonayn, oo ay ku jiraan saamayn aan habbooneyn ee falalka dhinaca kale.

   d. Qasbid waa wax u dhimmid, ama waxyeeleyn ama hanjabaad keeneysa daciifin ama dhibateyn toos ah ama dadban, dhinac ama hanti kasta ee dhinaca si saamayn aan habboneyn loogu yeesho falalka dhinac kale.
   e. *Ishortaag* waa in si ula kac ah loo baabi'iyo, loo been abuuro, wax looga beddelo, ama loo qariyo caddeyn baaris ama war been ah loo sheego baarayaasha, (Warbixinnada Xafiiska Hantidhowrka Guud), si fal ahaaneed loo xannibo baaritaan tuhunno laaluush, dhagar, khayaano, fududeyn cadaadin, ama/iyo hanjabaad, ciriirin, ama cabsi gelin lagu sameeyo dhinac kasta si looga joojiyo inuu faafiyo wuxuu ka og yahay dhacdooyinka wax ku oolka u ah baritaanka, ama falalka loola jeedo in lagu xannibo gudashada kormeerka iyo xuquuqda hanti dhowrka.
3. Hay'adda Iibinta waxay diideysaa soo jeedinta ku saabsan abaalmarinta haddii ay xaqiiqsato tartamaha lagu taliyay in la abaalmariyo uu si toos ah ama u maro wakiil, uu sameeyo laaluush, dhagar, khayaano, fududeyn cadaadin ama falal ishortaag si uu ugu tartamo qandaraaskaas.
4. Hay'adda Iibinta waxay u gudbineysa Maamulka magaca shirkad ama qof ay ku talineyso in laga saaro si waafaqsan Qodobka 30aad, haddii la xaqiijiyo in shirkad ama qof si toos ah ama u maro wakiil, oo uu ka sameeyo laaluush, dhagar, khayaano, fududeyn cadaadin ama falal ishortaag ee habraacyada qandaraaska iibka.
5. Sida ujeedada qodobkan qabo, dokumintiga ka qaybgalka, soo jeedinta iyo heshiisyada qardaraasku waxaa:
   a. Ka mid ah qodob ku qasbaya tartamayaasha, adeeg bixiyayaasha, qandaraasleyda, la taliyayaasha iney u oggolaadaan saraakiisha Hay'adda Iibiinta ama saraakiisha kale ee Dowladda ay khuseyso baaraan koontooyinka bangiyadooda, diiwaannadooda iyo dukumentiyada kale ee la xiriira soo gudbinta dalabka iyo waxqabadka heshiiskooda iyo inay baaraan hanti dhawrka loo qoondeeyey; iyo
   b. Tartamayaasha waa iney bixiyaan ballanqaad ay ku dhowrayaan in si saxa loogu tartamo loona fuliyo heshiiska, shuruucda lidka ku ah khiyaanada laaluushka sida ku xusan Farqadda Qodobka (2) ee cadeynaya in "tartamaha uu u tartamo una fuliyo heshiiska, tartamaha waa inuu si xooggan u ilaaliyo sharciyada lidka ku ah khiyaanada, laaluushka ee ka dhaqangalay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya.

## QAYBTA LABAAD:
## XEERARKAKA GUUD EE HABSOCODKA IIBKA
### Qodobka 17:
### Xirfadda Tartamayaasha

1. Adeeg bixiyayaasha, qandaraasleyda, ama la taliyayaasha waxaa loo oggol yahay iney uga qeyb galaan habraacyada qandaraaska iibka xad la'aan ama xanibaad salka ku haysa jinsiyad, marka laga reebo xaaladaha sharci ahaan tartamaha aan laga aqbaleyn si waafaqsan Qodobka 6aad ama kuwa la xayiray ee ku xusan Qodobka 32aad

2. Si heshiiska qandaraaska loogu abaalmariyo ama haddii ay socdaan habraacyada hordhaca ee lagu soo baxaayo si looga qaybgalo habraacyada qandaraaska iibka, tartamaha si uu ugu soo baxo waa inuu la yimaadaa shuruuda ay u dejisay Hay'adda Iibinta. Shuruuddaa waxaa ka mid ah:
    a. Shuruudaha xirfadda aqooneed iyo adeega farsamo waxay la xiriiraan waxqabad awoodeed, waayo aragnimo, ilaha maaliyadeed, qalabka waxqabad, iyo waxqabadyada leh awood bixineysa waxa loo dhiibay.
    b. Awood sharciyeed oo lagu galo heshiiska loogu talogalay qandaraaska iibka;
    c. Tartamaha unan ahayn musallaf, maamul ahaan kontorolan, galin xaalad musalifid ama, in aanay jirin dacwad ku socota oo la xiriirta arrimahan: iyo
    d. Hay'adda Iibinta waa laga reebay la galitaanka heshiiska tartamaha leh astaamaha ku qeexan Qodobada 6aad ama 9aad ee Sharcigan.
3. Shuruud kastoo lagu sheegay si waafaqsan Qodobkan waa in lagu dhigaa dokumentiyada shuruuda hordhaca ah, iyo dokumenti kasta oo looga qaybgalaayo tartanka qandaraaska waxayna tartamayaasha u codsanayaan si siman oo aan lahayn takoorid. Shuruudahaas lagu xusay dokumentiyadaas oo keliya waa in lagu codsadaa.
4. Shirkadaha si Guud loo leeyahay iyo shirkadaha waaweyn ee dowladda waxay xaq u yeelanayaan oo kaliya sharciyan inay ka qayb galaan habraacyada qandaraaska iibka, haddii ay caddeyn karaan iney sharci iyo maaliyad ahaan madaxbannaan yihiin, kuna hawlgalaan si waafaqsan sharciga ganacsiga, oo aanay ku xirneyn laamaha ka midka ah hay'adaha Xukuumadda, waana iney soo buuxinyaan shuruudaha ka qaybgalka qandaraaska u degsan sida tartamayaasha kale.

## Qodobka 18:
## U qalmid la'aan ka timaada macluumaad aan sax ahayn

Hay'adda Iibinta wey ka reebi kartaa tartame xilli kasta haddii ay ogaato xogta tartamuhu soo gudbiyey ee ku saabsan shuruudaha aan maadi ahaan sax aheyn.

## Qodobka 19:
## Xulasho-hordhac ah

1. Habraacyada xulashada hordhaca ah waa in la isticmaalaa ka hor ku casumidda dalabka qandaraaska oo looga gol leeyahay in lagu aqonsado adeeg bixiyayaasha iyo qandaraasleyda u qalma qandaraaska iibka xaaladahaan soo socda.
    a. Hawlaha ballaaran ama adag ee diyaarinta kharashka dalabka qandaraaska uu yahay mid sareeya; iyo
    b. Qiimo sare ama heshiisyada adag ama qaybo agabyo ah oo la isugu wada geeyay heshiis ballaran
2. Casumaadda xulidda hordhaca ah waa in lagu faafiya ugu yaraan mid ka mid ah wargeysyada qaranka ee si baahsan u gaara dalka, haddii ay suragal tahayna lagu faafiyaa Faafinta Rasmiga ah iyo faafinta qandaraaska iibka ama bogagga

internetka, iyo xaaladda u jiro tartan qandaraas iib oo caalami ah, la xusho warbaahin caalami ah si waafaqsan tilmaamaha Maamulka.

3. Marka la qabto habraacyada xulashada hordhaca ah, Hay'adda Iibinta ayaa siineysa dokumentiyada xulashada hordhaca ah dhammaan tartamayaasha ka soo jawaabaaya casumaadda xulista hordhaca ah. Documentiyada hordhaca xulista ayaa la siinayaa tartamayaasha oo leh macluumaadka looga baahan yahay si ay u soo diyaariyaan una soo gudbiyaan codsiyada loogu talogalay xulista hordhaca ah..
4. Tartamayaasha waa in loo oggolaadaa muddo ku filan oo ay ku iibsadaan, isku diyaariyaan, kuna soo gudbiyaan dokumentiyada xulista hordhaca. Muddada loo oggolanaayo waa iney ka yaraan muddada loo oggol yahay tartamayaasha iney ku soo gudbiyaan dalabyada qandaraaska ee waafaqsan Ka Qaybbgalka Tartanka Qandaraaska Qaranka iyo Ka Qaybgalka Tartanka Qandaraaska Caalamiga ah intaba. Muddada xulista hordhaca ah waa inuu ku dhex qeexaa Wasiirka Xeernidaamiyaha.
5. Marka la qabto habraacyada xulista hordhaca ah, Hay'adda Iibintu ayaa si dhakhsi ah ula socodsiineysa codsade kasta natiijooyinka qiimeynta xulashada
6. Dhammaan codsadayaasha soo buuxiya shuruuda ugu yar ee xulista hordhaca ah waa in lagu casumaa soo gudbinta dalabka.
7. Marka aan la qaban habraacyada xulista hordhaca ah, oo ay Hay'adda Iibinta xulis kama dambeys ah ku xaqiijineyso shuruudaha tartamaha loo xushay abaalmarinta waa in ay adeegsataa shuruudaha lagu sheegay dokumentiyada dalabka qandaraaska.
8. Dukumentiyada xulista hordhaca ah waa la iibin karaa si loo daboolo kharashaadka, laakiin qiimaha waa in lagu xisaabtama iney daboosho oo kaliya kharashaadka la xiriira daabacaadda, koobiga, iyo baahinta waana inaan lagu darin wax faa'iido ah.
9. Qimaha dukumentiyada lagu gadaayo waa in loo go'aamiyaa sida lagu sheegay Xeernidaamiyaha.

## Qodobka 20:
## Caddeynta iyo Wax Ka Beddelidda Dokumintiyada Ka Qaybgalka iyo Xulista Hordhaca ah ee Tartanka Qandaraaska

1. Hay'adda Iibinta ayaa sida ugu horeysa oo suurogal ah kaga jawaabeysa codsi kasta ee ka yimaada tartamayaasha/codsadayaasha ee loogu caddeynaayo dokumentiyada ka qaybgalka qandaraaska, ama dokumentiyada xulista hordhaca ah, codsiga sidaas ah waxaa loo gudbinayaa Hay'adda Iibinta muddada lagu gudo jiro ee lagu qeexay dokumentiyada ka qaybgalka ama xulista hordhaca ah.
2. Dalabka Tartamayaasha/codsadayaasha ay u soo weydistaan caddeyn, iyo sidoo kale wax beddelid kasta ama caddeymo kasta ee dokumentiyada ka qaybgalka ama xulista hordhaca ah waa in lagu gaarsiiyaa dhammaan tartamayaasha/codsadayaasha ee ka qaybgalaaya habraacyada qandaraaska iibka iyadoo aan laga daahin qoraal ahaanna loogu gudbiyo, sababtuna waa si loogu

oggolaado tartamayaasha/codsadayaasha fursad ay ku oggaadaan caddeymahaas ama beddelaadyada si ay ugu xisaabtamaan diyaarinta soo gudbinadooda.

3. Hay'adda Iibinta waxay awoodaa, markey lagama maarmaan noqoto si loo oggaado caddeymo ama beddelaadyo la qaadaayo si loogu xisaabtamo, iney kordhiso muddada kama dambeysta ah ee lagu soo gudbinaayo dalabyada ama codsiyada soo xulista hordhaca ah.

## Qodobka 21:
## Tilmaamaha Badeecadaha, Hawlaha, Iyo Adeegyada

1. Ilaa inta ay suuragal tahay, caddeymo kasta, qorshayaasha, sawirada, naqshadaha, iyo shuruudaha ama tilmaamaha badeecadaha, hawlaha, iyo adeegyada waa in lagu saleeyaa:
    a. Astaamaha adeeg farsamo iyo tayo, ee ujeedo ahaan la xiriira; iyo
    b. Waxqabadka badeecadaha, hawlaha, ama adeegyada qandaraaska, laakiin waa in aanay jirin shuruud ama tixraac leh sumad gaar ah, sumad, magac, ruqsad darawalnimo, naqshad, nooc, asal ahaan gaar ah, ama soo saare marka laga reebo haddii aysan jirin hab kale oo ku filan oo si sax u sheegaaya ama la fahmi karo oo tilmaamaya astaamaha badeecadaha, hawlaha, ama adeegyada qandaraaska sida ereyadaas "ama wax u dhigma" ay ku jiraan.
2. Astaamaha tilmaamo kasta oo adeeg farsamo ama tayo ee badeecada, hawlaha, ama adeegyada qandaraaska iyo shuruudaha tijaabinta, bakadeynta, sixitaanka, calaamadeynta, ama shahaado waafajinta; ama calaamadaha iyo erey ku saabsan waxqabadka badeecadaha ama ku abuurto caqabado ka qaybgalka tartamayaasha ku guuleystay qandaraaska, si aan loo baahneyn jirina sabab ay ku xadido tartan, waa inaan lagu darin ama loo adeegsan dokumentiyada ka qaybgalka iyo xulista hordhaca ah ee qandaraaska.
3. Hay'adda Iibinta ayaa, marka la dabbaqi karo, diyaarineysa tilmaamaha shuruudaha qandaraaska iibka si waafaqsan Qodobka 8aad iyo sharciga ilaalinta degaan kasta ee lagu dhaqi karo, sidoo kalena loogu dabbaqi karo heerarka heshiiska caalamiga.

## Qodobka 22:
## Muddada ugu dambeysa ee lagu soo gudbinayo Ka qeybgalka dalabyada iyo codsiyada kale ee Qardaraaska

Hay'adda Iibinta ayaa dejineysa muddada kama dambaysta ah ee lagu soo gudbinaayo dalabyada, codsiga loogu talogalay xulista hordhaca ah iyo mujinta daneynta qandaraaska si loo siiyo muddo ku filan diyaargaroowgooda iyo soo gudbinta looga gol leeyahay in lagu kordhiyo tartanka si waafaqsan muddada ugu yare e lagu xeeriyay Sharcigan iyo Xeernidaamiyha.

**Qodobka 23:**

**Ka noqoshada habraacyada ama diidmada dalabyada Qandaraaska**

1. Hay'adda Iibinta waxay awoodaa iney:
    a. Diido dhammaan dalabyada goor kasta oo ka hor intaan la aqbalin dalabka;
    b. Ka noqoto habraacyada qandaraaska iibka mid ka mid ah xaaladahaan soo socda:
        i. Jiritaanka baahida qandaraaska iibka oo dhamaatay ama isbeddel wax ku ool ah ku dhacay;
        ii. Ma jirto maalgelin ku filan ee loo heli karo qandaraaska iibka;
        iii. Waxaa jira isbedel la taaban karo ee ku dhacay faahfaahinta adeega farsamo ee lagama maarmaanka u ah ka qaybgalida, shuruudaha guud ee heshiiska ama faahfaahino kale, oo lagama maarmaan u ahaa si loo bilaabo habraaca qandaraaska.
        iv. Lama helin dalab(yo) jawaabeed.
        v. Waxaa jira caddeymo musuqmaasuq, khiyaamo, qasbid, ama dhagar tartamayaasha dhexdooda.
        vi. Ka noqoshada loo arkay iney tahay danta amniga qaranka.
        vii. Waxaa caddatay si aan shaki ku jirin in habraaca qandaraaska iibka inaan loo bilaabin si waafaqsan qodobada Sharciga iyo Xeernidaamiyaha.
2. Ka hor intaan la diidin dalabyada oo dhan ama aan laga noqonin wax habraacyo qandaras iib, Waaxda Qandaraaska iibka ayaa sii diyaarineysa codsi qoraal ah ee ansixinta diidmada ama ka noqosho. Codsiga waxaa loo soo gudbinayaa Guddiga Qandaraaska Iibka waxaana si cad loogu tilmaamayaa:
    a. Sababo faahfaahsan oo ku talinaaya diidmada ama ka noqoshada;
    b. Xaaladda habraacyada qandaraaska iibka, oo ay ku jiraan si gaar ah, haddii dalbyada qandaraaska durbaba la furay; iyo
    c. Haddii lagu talinaayo habraacyo qandaraas iib cusub, haddey sidaas tahayna, isbeddelada lagu talinaayo.
3. Sababta loo diiday dhammaan dalabyada, iyo ka noqoshada habraacyada qandaraaska iibka, waa in lagu sheegaa diiwaanka habraacyada qandaraaska iibka, islamarkiina la gaarsiiya tartamayaasha.
4. Hay'adda Iibinta uma raacan wax mas'uuliyad ah tartamaha loogu diiday sababta diidmada ee dhammaan dalabyada ama ka noqoshada habraacyada qandaraaska iibka ee waafaqsan Qodobka 23.1.
5. Haddii go'aanka ka noqoshada habraacyada qandaraaska iibka la gaaro ka hor muddada kama dambaynta ah ee lagu gudbinaayo dalabyada, dalab kasta oo la helo waa in loo celiyaa tartamaha iyadoon la furin.
6. Haddii ay dhacdo ka noqosho ama didmada dhammaan dalabyada qandaraaska si waafaqsan Qodobka 23.1, qandaraaska iibka waa inaan dib loogu dalban isla tilmaamaayashii iyo shuruudahii heshiiska marka laga reebo haddii ka

noqoshada bilowga habraaca loogu talagalay misaaniyad ama jiraan sababo kale oo aan la xiriirin tilmaamayaashaas iyo shuruudaha heshiiska.

7. Haddii ay noqoto in qandaraaska iibka mar kale lagu celiyo, sababaha ka noqoshada bilaabida habraaca waa in la baaraa tilmaamaha adeega farsamo ama shuruudaha heshiiska, ama labadaba ka hor waxaa loo beddelayaa si habboon si loo qanciyo dib uga qaybgalayaasha tartanka qandaraaska.

**Qodobka 24:**

**Ogeysiiska guud ee abaalmarinta heshiiska**

Hay'adaha iibinta ayaa ku faafineysaa, muddo labo todobaad gudahood ee go'aanka abaalmarinta, wargeys kasta oo ku baahsan dalka, haddii ay suurtagal tahayna faafinta qandaraaska iibka, bogagga internetka ama faafinta rasmiga, waxaa lagu ogeysiinayaa oggolaanshaha heshiis kasta oo qiimaha heshiiska ka badan yahay marinka lagu xusay Xeernidaamiyaha, kasoo tilmaamaya qiimaha heshiiska, magaca, iyo cinwaanka tartamaha ku guuleystay.

**Qodobka 25:**

**Iswareysiga tartamayaasha guuldareystay.**

Hay'adda Iibinta codsashada tartame kasta ee guuldareystay, ayay ku wargelineysaa sababaha uu tartamaha dalabka qandaraaska uu ugu guuldareystay.

**Qodobka 26:**

**Habka Lagu Xiriirayo**

1. Marka laga reebo haddii uu si kale u sheego Sharcigan, dokumentiyada, fariimaha, go'aamada, iyo isgaarsiinta kale ee Xeerkan lagu xusay waxay Hay'adda Iibinta u gudbineysaa tartamaha ama tartamaha ayaa u gudbinaaya Hay'adda Iibinta, waxayna noqoneysa qoraal.
2. Maamulka waxuu u oggolaan karaa Hay'adaha Iibinta iney adeegsadaan qaabab kale ee isgaarsiineed, oo ay ku jirto isgaarsiin elekteroonik in lagu baahiyo casumaada dalabka qandaraaska, gudbinta dokumentiyada qandaraaska, soo gudbinta Dalabka qandaraaska, gabogabeynta heshiisyada iyo bxinta kharashaadka, waxaase shardi ah in adeega isgaarsineed kasta oo kale iney:
   a. Ku keydin karaan diwaan nuxurka isgaarsiinta;
   b. Bixinayaan heer habbon ee amni;
   c. Ka xadidayn tartamayaasha helitaanka habraacyada qandaraaska iibka; iyo
   d. Waafaqsan yahay shuruudaha Sharcigan iyo Xeernidaamiyaha, ama sharciyad kasta oo kale ee lagu dhaqi karo.

**Qodobka 27:**

**Qorshaha Qandaraaska Iibka**

1. Dhamaan Hay'adaha qandaraaska Iibka ayaa sameynaya qorshaha qandaraaska Iibka ee sanadlaha, ee looga gol leeyahay si lagu gaaro in qiimaha ugu badan ee kharashka guud iyo waxyaabaa kale ee sharcigan. Qorshaha Qandaraaska Iisiga

wuxuu taageerayaa barnaamijka iyo miisaaniyadda ay ansixisay Hay'adda qandaraaska iibka.

2. Qorshaha qandaraaska Iibka waxaa lagu daabacayaa websaytka quseeya kaddib markii la ansixiyo. Daabacaadda Qorshaha Qandaraaska Iibka kuma jiraan kharashka baakadeynta si aan loo wiiqin tartanka.
3. Guddiga Qandaraaska Iibka wuxuu ogolaanaya qorshaha qandaraaska iibka wuxuuna si joogta ah dusha kala soconayaa hawsha fulinteeda;
4. Qorshaha Qandaraaska iibka waxaa la diyaarinayaa sanad walba iyadoo lagu saleynayo miisaaniyadda sanadka Xukuumadda, iyo la xisaabinayaa miiisaaniyad sanadeedka xukuumadda. In marka ugu horeysa Qorshaha Qandaraaska Iibka ayaa la tixgelinayaa iyo iney ku jiraan dhammaan heshiisyadda socda ee ka haray sannad maaliyadeekii hore. Qorshaha Qandaraaska Iibka waxaa uu tilmaamayaa;
    a. Xirmooyinka heshiisyadda
    b. Qiyaasta kharajka ee xirmo kasta
    c. Habka Qandaraaska iibka la soo jeediyay ee xirmo kasta, iyo
    d. Talaaboyinka fulinta iyo mudada lagu fulinayo
5. Hay'adda qandaraaska iibka uma qaybin karto Qandaraaska qaybo yaryar ama qiimo ka hooseeya kii Qandaraaska Iibka, so looga fogaado codsiga habka qandaraaska iibka ee sharcigani farayo.
6. Hay'adaha Qandaraaska Iibka Waxay si afar biloodle ah dib ugu eegayaan ama ugu cusbooneysiinayaan qorshahooda qandaraaska iibka, waxayna isbedel kasta oo muhiim ku wargelinayaan Guddiga Qandaraaska Iibka, Sarkaalka Xisaabaha, Maamulka, iyo Wasaaradda.

## Qodobka 28:
## Soo hormarinta Qandaraaska Iibka

1. Mararka aan maalgelinta loo qoondeyn sanad gaar ah, laakiin la qiyaasi karo inta la bixin karo mustaqbalka xilliga seddexda bilood ee soo socota, Hay'adda Iibinta Qandaraaska waxa ay si hor dhac ah u wadi kartaa Qandaraas iib si loo hubiyo waqtiga abaalmarinta iyo fulinta heshiiska, laakiin marka arintani mid ka mida timaaddo;
    a. Wax heshiis ah lama sixiixi karo ilaa Sarkaalka Xisaabaha xaqiijiyo jiritaanka miisaaniyad dabooli karta waajibaadka heshiiska keenay. Iyo
    b. Dalabka ama dokumeentika la soo jeediyay waa inay si cad ugu xusnaataa in qandaraaska iibka yahay mid deg deg iyadoo ay ku xiran tahay helitaanka miisaaniyad.
    c. Dokumeentiga tartanka ayaa tilmaamaya inta boqolkiiba Hay'adda Qandaraaska Iibka la ogol yahay iney kordhiso ama dhinto ee loo baahan yahay.

## Qodobka 29:
## Sixitaanka Qiimaha

1. Sixitaan qiimayn lama sameyn karo haddii aan lagu sheegin heshiiska qandaraaska Iibka ilaa ay caddaato in duruufo dhaqaale dartood wax isu bedelaan heshiisyada mudadoodu ka badan 18 bilood ama si cad loogu sheego xeernidaamiyaha ee sharcigan.
2. Haddii heshiiska qandaraaska Iibka ogolyahay in sixtaan lagu sameeyo qiimaha, waa in lagu xusaa:
   a. Xaaladaha, sida kororka ama hoos u dhaca in qiimaha alaabta, shaqada, gaadiidka, iyo tamarta, taas oo sixitaanka qiimaha la oggolaan lahaa;
   b. Qaacidooyinka iyo tusmooyinka tilmaamaya si loo go'aamiyo duruufaha dhaqaale ee la xiriira, tasoo bixinaysa cadddeyn ku filan in qiimaha la saxo iyo si loo ogaado cadadka kordhay ama is-dhimay;
   c. Joogteynta qiima sixidda la fulin karo; iyo
   d. Habraacyada la maray
3. Heshiiska Qandaraaska Iibka ayaa sheegaya, marka codsiga ee qaabka sixidda qiimaha keeni karo isbel qiima ka badan boqolkiiba inta ku xusan qiimihii bilowga asalka, ama qiimeynta ku xusan boqolkiiba dheelitirka heshiiska, Hay'adda qandaraaska iibku wey burin karaa heshiiska.
4. Kala duwanaansha kasta oo qiima ee ka badan boqolkiiba inta lagu xusay xeernidaamiyayaasha ee qiimaha heshiiska asalka waxey hoos imanaysaa si loo ansixiyo GuddigaQandaraaska Iibka ay khuseyso.

## Qodobka 30:
## Ansixinta iyo Wax ka bedelka Heshiisyada

1. Ansixinta abaalmarinta heshiis la soo-jeediyay waxey noqon doonaan si waafaqsan Xeernidaamiyaha.
2. Waxka beddelka heshiiska waa iney ansixiyaan Guddida Qandaraaska Iibka ee u khuseeyo haddii wax ka beddelka heshiisku:
   a. Ay kordhineyso qiimaha heshiiska asalka ahaa ee aheyd inuu ansixiyo Guddida Qandaraaska Iibka gaareysana heerka lagu cayimey xeernidaamiyaha; iyo
   b. Gaarsiinayso qiimaha heshiiska dib loo eegay heer u baahan iney ansixiyaan heshiiska abaalmarinta Guddida Qandaraaska Iibka.

## Qodobka 31:
## Kaydka iyo Warbixinnada ee Qandaraaska Iibka

**1.** Hay'adda Iibinta Qandaraaska ayaa keydineysa dhammaan dhokumentiyada la xiriira heshiis kasta ee qandaraas iib iyo habraacyadeeda si waafaqsan xeerarka lagu dabaqi karo ee ku saabsan diiwaangelinta qoraalada Xukuumadda, laakin ugu yaraan dokumeentiyada waa in la hayaa muddo lix (6) sano ah ee soo raacda taariikhda ugu dambeysa ee dhammaadka heshiiska qandaraaska iibka ama laga soo billaabo taariikhda dhammaan la wado diido tartanka dalabka qandaraaska ama la baabi'iyo habraaca, ama sideey xaaladdu noqotaba.

2. Si loo fuliyo shuruudaha uu dhigayo Qodobka 31(1), Hay'adaha Qandaraaska Iibka waa in ay diyaariyaan oo xafidaan warbixin kooban oo khusaysa geedi socodka qandaraasyada iibka iyo dokumintiyada hoos ku qoran:
    a. Caddeynta shayga qandaraaska iibka;
    b. Qoraal sheegaya in sababta loo doortay habka qandaraaska iibka ka duwan habka tartanka furan ama codsiga soo jeedimaha ee howlaha.
    c. Nuqullada casuumadaha ee dalabka naadada ama soo gudbinta dalabyada.
    d. Tartanka, codsiga soo jeedinta, iyo hordhaca xulista dokumeentiyada waa iney ku jiraan dalab ama qiimeynta shardiga soo jeedinta iyo shuruudaha looga baahan yahay tartamaha.
    e. Liiska tartamayaasha ka qeybgalaya, warbixintooda iyo aqoontooda iyo shuruudaha loo raacay kala saarista.
    f. Qiimaha dalabka ama soo jeedinta
    g. Codsiyada caddeymaha iyo jawaabaha laga soo bixiyay.
    h. Warbixinta sababaha yareynta muddooyinka diyaarinta dalabka.
    i. Warbixinnada qiimaynta dalabyada, soo jeedimaha iyo xulashada hor dhaca.
    j. Warbixin buuxda ee qiimaynta dalabyada, soo jeedimaha, iyo xulashada hor-dhaca.
    k. Warbixin ku saabsan haddii ay jirto dib-u-eegis la sameeyay habraacyada iyo goáanada laga gaaray.
3. Qoraal qeexaya sababaha loo baabi'iyay habraacyada Qandaraaska Iibka iyo/ama loo diiday dhammaan tartanka dalaboyinka ama diidmada dhamaan dalabyada ama soo jeedimaha.
4. Warbixin ku saabsan maareynta heshiiska iyo bixinta lacagaha, oo ay ku lifaaqan yihiin caddeymaha waraaqaha lacag bixinta; iyo
5. Warbixinno kale ee noocaan ee uu waaajibiyo xeernidaamiyayaasha ku soo baxay si waafasan sharcigan.
6. Qaybta diiwaanka ee ku xusan qodobka 2aad xarfahiisa (a), (b), (c), (d), (e), iyo (f) markii la codsado waxaa heli kara cid kasta, waana in loo bandhigo kaddib aqbalaadda naaddada ama soo jeedinta dalabka ama ogaysiinta ku guulaysashada ama qiimasheegta ama kaddib markii uu dhamaado habraacyada qandaraaska iibka markii aaney jirin heshiis qandaraas iib oo la gaaray.
7. Qaybta diiwaanka ee ku xusan qodobka 2aad xarfaha (b), (i), iyo (l) waa kuwo u furan, hadii la codsado, in loo bandhigo, adeeg-bixiyeyaasha, tartameyaasha iyo La taliyeyaasha soo gudbiyay dalabyada, soo jeedimaha, dalbadayaasha ama qiimo-sheegayada; ama codsaday xulashada hordhaca, kaddib aqbalaadda dalabka naaddada, soojeedinta dalabka, ama qiimo sheegidda ama markii uu dhamaado habraacyada qandaraaska iibka markii aaney jirin heshiis qandaraas iib oo la gaaray.
8. Hay'adda Qandaraaska Iibka waa in aysan bixin ama cidna u bandhigin:
    a. Xog, haddii ay bixinta xogtaasi;
        i. Ka hor imanayso shuruucda dalka;

ii. Caqabad ku noqonayso fulinta sharciga;
iii. Aanay danta guud kujirin;
iv. Xad gudub ku noqonayso danta ganacsiga xalaasha ku dhisan ee dhinacyada; ama
v. Tartan la mamnuucay si waafaqsan sharcigan.

b. Warbixin la xiriira baaritaanka, qiimaynta iyo isbarbar dhigga dalabyada, soo jeedimaha, soo bandhigimaha, ama qiimo sheegooyinka ee ka baxsan xogta kooban eek u xusan Qodobka 31 (2) (i).

**9.** Warbixinnada iyo dokumintiyada ay kaydiyaan Hay'adaha Qandaraaska Iibka si waafaqsan Sharcigan waa inay heli karaan markii ay u baahdaan Maamulka, Guddiga La Dagaalanka Laaluushka, iyo Hanti Dhowraha Guud si ay u baadhaan, Guddiga Baarlammanka uga wakiilka uga ah kormeerka fulinta shuruucda qaranka iyo xafiis dawladeed kasta ee lagu aaminay mas'uulidaas marka la codsado.

## Qodobka 32:
## Anshaxa Saraakisha Guud, Tartamayaasha Adeeg-bixiyeyaasha, iyo La-taliyayaasha

Saraakiisha guud ee fulinaysa Qandaraaska Iibka Guud iyo dhammaan tartamayaasha, adeeg-bixiyeyaasha iyo la-taliyeyaasha waa in ay u dhaqmaan si waafaqsan xeerarka dhaqanka ee uu ku xusan  Hannaanka 2aad ee Sharcigan

## Qodobka 33:
## Ka Reebista Qandaraaslayda, la taliyayaasha, iyo adeeg-bixiyayaasha

1. Faahfaahinta habka ka reebista waxa lagu xusayaa Xeernidaamiyayaasha si waafaqsan sharcigan.
   a. Wada tashi lala yeelanayaa Hay'adaha iibinta qandaraaska ay quseyso si loo xaqiijiyo idhamaan xaqiiqooyinka ee arinka;
   b. Waqti macquul ah la gaarsiiyo tartamaha, adeeg-bixiyaha, qandaraaslaha, ama talo bixiyeyaha ay khusayso arinka lasoo jeediyay; iyo
   c. Fursad macquulah in tartamaha, adeeg-bixiyaha, qandaraaslaha, ama talo bixiyeyaha si uu uga jawaabo arinka la soojeediyey;
2. Adeegbiye, Qandaraasle, ama talo bixiye waxa looga reebi karaa ka qaybqaadashada tartanka qandaraaska iibka sababahan soo socda awgood:
   a. Bixinta Xog been ah oo loo isticmaaley habka gudbinta dalabka ama soo jeedinta;
   b. War loo kala qaado tartameyaasha, ama tartame iyo sarkaal dawladeed ku saabsan dejinta ee qaybkasta kasta ee dokumentiyada qandaraaska ka mid ah;
   c. Carqaladeyn lagu faragelinayo ka qaybgalka tartanka ee tartamayaasha;
   d. Dhaqan xumo la xiriirta gudbinta dalabyada oo ka mid ah laaluush, khayaano, iska-horkeenid, cadaadin, hor-istaagid, qiimo-sameyn ama in

laga shaqeeyo si qiimaha dalabka hos loo dhigo, bixinta ama shaacinta xogaha sirta ah, iyo dhaqan xumo kasta oo kale.;

e. Qabasho la'aan waajibaadyada heshiska sida ku xusan heshiiska taasoo noqonaysa sabab ku filan oo lagu sababeeyo ka rebista, sida ku cad (i) hadii fulin laaanta waajibaadyada heshiiska ay keentey sabab ama xaalad ka baxsan awoodda adeegbiye, qandaraasle, ama talo bixiye iyo (ii) hadii adeegbiye, qandaraasle, ama talo bixiye horey loogu digay si waafaqsan habraaca ku xusan Xeernidaamiyayaasha;
f. Xukun xadgudub dembi oo la xiriira qaadasho ama iskuday qaadasho heshiis ama heshiis hoosaad;
g. Bixin la aanta ee waajibaadyada cashuurta kaddib qiimeynta ay guddiga dakhliga Cashuuraha ama cashuurta oo lala baxsado si kastaba ha ahaatee; ama
h. Xukun dambiilenimo oo laxiriira baayac mushtar ama xirfad howlo:

3. Milkiilayaasha shirkadaha go'aanka reebista la saarey, iyo shirkadaha kale ee ay samaystaan kadib go'aanka reebista waxa loo tix galinyaa kuwo ka reeban ilaa iyo inta laga laalayo go'aanka reebista.

## Qodobka 34:
## Farqiga mudnaanta gudaha iyo habka mudnaanta

1. Hay'adda iibinta qandaraaska waxey hoos imanaysaa sida shuruudaha kale iyo qodobada ku xusan xeernidaamiyaasha, ogolaanshaha farqiga mudnaanta doorashada gudaha ee qiimeynta dalabyada hoos imanaya tartan furan yahay sida:
    a. Dalabyada lagu soo bandhigayo badeecadaha lagu sameeyo, lagu farsameeyo ama kasoo baxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya marka la barbar dhigo Dalabyada lagu soo bandhigayo badeecadaha lagu sameeyo, lagu farsameeyo ama kasoo baxda wadamada shisheeye; iyo
    b. Dalabyada ay qandaraasleyda dalka Marka la barbar dhigo dalabyada ay soo bandhigaan qandaraasleyda shisheeye;
2. Shuruudaha la tixgelinayo mudnaanta dalka, iyo habka loo qiimaynayo farqiyada mudnaantaas waxaa lagu caddeynayaa xeernidaamiyaasha.
3. Xaddiga mudnaanta gudaha waxey noqoneysaa boqolkiiba 15 badeecadaha iyo boqolkiiba 10 qandaraasleyda iyo waxaana lagu sheegayaa dokumentiga ka qaybgalka dalabka tartanka.
4. Xaaladaha ay danta horumarinta ee koox bartilmaameed ee bixiyiyaal, bulshada, ama qeybta hoose ee dhaqaalaha, Hay'adda Iibinta Qandaraaska waxey go'aamin kartaa iyadoo xaddidaysa ka qayb galka iyadoo codsaneysa habka mudnaanta ee habraaca qandaraaska iibka. Shuruudaha iyo habraacyada ee habka mudnaanta waxaa lagu caddeynayaa xeernidaamiyaasha.

# QAYBTA SADDEXAAD:
# HAY'ADAHA LOO DHISAY MAARAYNTA IIBKA QANDARAASKA GUUD

## A. MAAMULKA QANDARAASKA IIBKA GUUD

### Qodobka 35:
### Dhismaha Maamulka Qandaraaska Iibka Guud

1. Waxaa lagu dhisayaa sharcigan Hay'addo Guud oo qayb ahaan u madax bannaan loona yaqaan mas'uulna ka ah Maamulka Qandaraaska Iibka Guud, oo uu maareynaayo Guddi Agaasimayaal iyo Xogyahnta Maamulka.
2. Maamulka wuxuu yeelanayaa astaan aqoonsi shirkadeed oo leh isdhaxalid joogta ah weligeed, shaabad ka wada dhexeysa, ku dacwoon karta magaca shirkadda laguna dacweyn karo.
3. Maamulka waa inuu yeeshaa masu'uliyadda kormeerka dhammaan Qandaraaska Iibka Guud si waafaqsan Sharcigan.
4. Maamulka ayaa awood u leh inuu soo iibsado, haysto, maareeyo, ama wareejiyo hanti kasta ee guurto ama ma guurto ah, oo xiriir la leh gudashada hawlihiisa iyo inuu geli karo heshiisyo iyo macaamilaad si toos ah ama si macquul ah ula xiriira hawlihiisa.

### Qodobka 36:
### Ujeedooyinka Maamulka

1. Ujeedada Maamulka waa habsami u socodsiinta habraacyada Qandaraaska Iibka guud iyo xaqiijinta in la gaaray ujeedooyinka Sharcigaan.
2. Marka laga reebo wax ka qabashada Qandaraaska Iibka u gaarka ah sida Hay'adda iibinta iyo sida lagu sheegay Qodobka 36aad, Maamulka sinaba uguma yeelan karo saameyn hawlgal ahaaneed hawsha ay Hay'adaha iibinta qabaneyso ee tallaabooyinka sharciga ah oo ay ka qaadaneyso Qandaraaska Iibka, samaynta go'aanka oggolaanshaha heshiiska, ama xalinta khilaafaadka Qandaraaska Iibka. Khilaaf kasta oo ka dhex dhasha habraaca Qandaraaska Iibka waa in lagu maareeyaa si waafaqsan habraaca khilaafka ee lagu dhigay dokumeentiyada tartanka dalabka qandaraaska.

### Qodobka 37:
### Hawlaha Maamulka

1. Maamulka oo raacaya kuna tiirsan sharciga ayaa fulinaaya hawlahan soo socda:
   a. Faafiyo warbixin la xiriirta Sharcigan;
   b. Kormeerka iyo xaqiijinta u hoggansanaanta Sharcigan;
   c. Dejinta, horumarinta, tayeenta, iyo hirgelinta barnaamijyada dhisidda kartida aqooneed.
   d. Dejinta siyaasadda iyo halbeegyada loogu talagalay iibka, meeleynta, iyo bixinta qandaraaska;

e. Horumarinta iyo soo saarista  Qandaraaska Iibka, meeleynta, iyo bixinta dokumentiyada halbeega u ah qandaraaska;
f. Dib u eegida iyo qiimeynta hawlaha  Qandaraaska Iibka guud, meeleynta, bixinta iyo sida iney sameyso horumarin marka loo baahdo;
g. Soo diyaarinta warbixinta sannadlaha ah ee hawlqabadka guud ee Qandaraaska Iibka guud, meeleynta iyo nidaamka bixinta qandaraaska, oo ay ku jirto astaanta waxqabadyada guud ee  Qandaraaska Iibka, ee loo bandhigayo wasiirka si loo horgeeyo baarlamaanka;
h. Qabashada, ugu yaraan sanad walba, madasha  Qandaraaska Iibka guud oo la isugu wada keenaayo qaybaha guud, qaybaha ganacsiga gaarka ah, xubno ka tirsan shacbiga, iyo maageliyaasha si wax looga qabto arrimaha la xiriira  Qandaraaska Iibka guud.
i. Daabacaan faafin saddexdii biloodba mar oo ku saabsan  Qandaraaska Iibka guud, meeleynta, iyo bixinta qandaraaska, oo ay ku jirto hadba sida loo dabaqi karo, ogeysiisyada  qandaraaska Iibka, ogeysiisyada ku saabsan bixinta qandaraaska, liiska shirkadaha la xayiray, ogeysiisyada casuumaada dalabka, iyo warbixinta ku saabsan abaalmarinta heshiis; iyo liiska cabashooyinka iyo rafcaanada la helay iyo natiijooyinka ka soo baxa;
j. Kala taliso Dowladda arrimaha la xiriira Sharcigaan;
k. Baaraan kana xayiran ka qaybgelinta  qandaraaska iibka guud, meeleynta, iyo bixinta qandaraaska ee tartamayaal kasta oo sameeyay khiyaamo iyo musuqmaasuq waafaqsan Qodobka 15aad ama kuwa si dhab ah u dayacay waajibaadkooda si waafaqsan meeleynta  qandaraaska iibka guud iyo bixinta qandaraaska ama sameeyay wax lid ku ah Sharcigan;
l. Hayaan liiska qeybiyeyaasha, qandaraasleyda, la taliyayaasha, iyo tartamayaasha surogalka ah ee laga xayiray meeleynta iyo bixinta qandaraaska iibka guud loona gaarsiiyay si joogto ah liiska hay'adaha iibkaa qandaraaska;
m. Qabtaan si waafaqsan Qodobbada 164aad iyo 165aad, kormeerka madaxa bannaan, dib u eegista cabashooyinka iyo racfaanada la xiriira habraaca  Qandaraaska Iibka aan ahayn cabashooyinka la xiriira wax iska iibinta qandaraaska ee u gaar ah sida ku xusan Sharcigan iyo Xeernidaamiyayaasha iyo go'aamada la xiriira. Cabashooyinka ka soo ifbaxa  Qandaraaska Iibka oo ay qaabtaan Maamulka waxaa dib u eegaaya guddi awood u leh sida ku xusan Sharcigan.
n. Fasiraada Sharcigaan iyo xeerarka kale ee nidaaminaya habraaca iibka si waafaqsan Sharcigan.
o. Siiyaan adeegyo maamul iyo xoghayn Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib u Eegista Qandaraaska Iibka.
p. Qabtaan hawlaha kale ee soo raaca si loo gaaro ujeedooyinka Sharcigaan.

**Qodobka 38:**

**Xubinimada iyo Magacaabidda Guddiga**

1. Guddiga wuxuu ka kooban yahay sagaal (9) qof ee u magacaabayo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, kaddib markey u soo jeediyaan Golaha Wasiirada, si waafaqsan Qodobka 41 (1) (a).
2. Xubnaha Guddigu waxay ka kooban yihiin;
    a. Guddoomiyaha oo ah qof aqoon u leh Qandaraaska Iibka  guud ah iyo maamulka guud, laakiin waa inuu hayn adeeg guud, lahayna dank a horimaaneysa hawlaha Maamulka.
    b. Afar (4) qof oo looga soo magacaabay hay'adaha guud sida soo socota:
        i. Garyaqaan la soo magacaabo kaddib marka lagala tashado Garyaqaanka guud ee Guud;
        ii. Saddex (3) xubnood oo mid kasta waaya aragnimo u leh Qandaraaska Iibka  guud, ama aqoon u leh arrimaha dowladda iyo habraacayda dhinacyada badan ee hay'adda qandaraaska.
        iii. Afar (4) qof oo laga soo magaacaabayo qaybta ganacsiga gaarka ah oo waayo aragnimana u leh Qandaraaska Iibka  guud iyo maamulka guud.
3. Sida ku cad Qodobka 41 (1)(c) Wasiirku waa inuu hubiyaa magacaabista xubnaha ka imaanaayo qaybta ganacsiga gaarka ah ineey ugu yaraan ku jiraan labo (2) Murashax oo wakiil ka ah danta ururada xirfadlayaasha ah oo xubonahooda si joogta ah ka macaamilaan adeegyada la xiriira qandaraaska iibka. Xeernidaamiyaha ayaa lagu soo saarayaa liiska ururada oo uu Wasiirka ka soo magacaabayo xubnaha.
4. Wasiirka waa inuu hubiyaa magacaabista la sameynayo iney waafaqsan tahay Qodobka 41 (1)(a) (b) Iyo (c) iyo/ama buuxinta jago kasta oo bannaan, waayo aragnimada iyo xirfada Murashaxiinta waa in sida ugu suragalsan si siman loogu qaybiyo si waafaqsan ujeedadda Sharcigaan.

**Qodobka 39:**

**Muddada Xilka**

1. Muddada xiIka ee xubnaha Guddiga ay haynayaan xilka waa afar (4) sano; Guddiga cusub waa in la dhisaa afartii sanaba mar.
    a. Xubin kasta oo Guddiga ka mid ah waxay haynaysaa xilka muddo afar (4) sano waxaana la dooran karaa oo dib loo magacaabayaa hal xilli oo kale oo afar (4) sano ah, iyadoo aan loo eegin in muddada labaad ay tahay tan xigta iyo in kale.
    b. Golaha Wasiiradda waxay xilka ka qaadi karaan xubin ka mid ah Guddiga haddii ay jiraan mid ka mid ah sababaha soo socda:
        i. Uu awoodi waayo inuu fuliyo hawlaha xafiiska, sababtuna ay tahay itaaldarri xagga maskaxda ama jirka ah;
        ii. Anshax xumo cad;

iii. Lagu xukumo faldembiyeed hoos imaanaya xeerka ciqaabta ama faldambiyeed la xiriira qiyaamo ama msuqmaasuq; iyo
iv. Ka maqnaanshaha hal sano guddahiis ee shan (5) kulan oo isku xigta oo kulamada Guddiga ah sabab la'aan uga maqdalab sida ay go'aamiyeen guddiga.

2. Xubin ka mid ah Guddiga way joogsaneysaa xubinimadeeda marka iscasilaada uu qoraal ahaan lagu ogeysiiyo Guddomiyaha Guddiga nuqulna loo gudbiyo Wasiirka.
3. Guddiga waa beddeli karaa Guddomiye Ku Xigeenka, isagoo raacaya habraaca isaga ama iyada lagu doortay.

**Qodobka 40:**

**Kulanarka Guddiga iyo doorashada Guddoomiyaha Ku Xigeenka**

1. Fadhiga koowaad ee u qabsoomo, Guddiga ayaa mid ka mid ah xubnihiisa aan ka ahayn Guddoomiyaha u dooranaya Guddoomiyaha ku xigeenka.
2. Guddiga waxay kulmayaan waqtiyada ay socodsiinayaan hawlaha, iyo si ay ugu kulmaan goob joogta ah ee uu tilmaamo Guddiga waana iney kulmaan uguyaraan bishiiba mar.
3. Haddii ay dhacdo in Guddiga uu awoodi waayo inuu ku kulano goobtii caadi ahaan uu ku kulani jiray, Guddoomiyaha ayaa goob kale oo beddelkeeda ah ku muddeynaaya kulanka, xubnahana ku ogeysiinaaya goobta cusub ugu yaraan (3) maalmood horteed.
4. Guddoomiyaha ayaa guddoominaaya dhammaan kulanarka Guddiga, haddii u maqan yahay Guddoomiyahana, Guddoomiye Ku-Xigeenka ayaa guddoominaaya, haddeey maqan yihiin labadaba, xubnaha ayaa dhexdooda ka dooranaaya mid ka mid ah tiradooda si uu u guddoomiyo.
5. Fadhiga kulanka Guddiga waxaa uu ku qabsoomayaa marka ay ka soo qaybgalaan shan (5) xubnood, Agaasimaha Guud oo ah Xoghayaha Guddiga, looma tirinaayo xubin ahaan marka ay ujeedadda tahay go'aaminta qabsoomida fadhiga kulanka.
6. Xubin kasta waxay yeelaneysaa hal cod, laakiin haddii ay simaan codadka la bixiyay, Guddoomiyaha ayaa awood u yeelanaaya inuu codeeyo, halkuu u codeeyo ayaana la raacayaa.
7. Guddiga kulanarkiisa waxuu u dooran karaa qof kasta inuu u noqdo la taliye, hase yeeshee qofkaas oo kale xaq uma laha inuu ka codeeyo arrimo kasta oo uu go'aan ka gaaraayo Guddiga.
8. Ansaxnimada tallaabada sharci ee uu qaadaayo Guddiga waa inaaney saameeyn ku yeelan maqnaanshaha mid ka mid ah xubnaheeda ama cillada ballanta ama sharuudda aqooneed ee xubin ka mid ah Guddiga.
9. Marka laga reebo haddii si cad loo sii sheego, Guddiga ayaa go'aaminaaya qaabkuu u qabsoomaayo kulanarkooda.

**Qodobka 41:**
**Buuxin Jagooyin Banaan**

1. Marka Guddoomiyaha ama xubin ka mid ah Guddiga uu banneeyo xubinimadiisa, waa in la qaadaa tallaabooyinka soo socda:
    a. Haddii uu yahay Guddomiyaha, xubnaha Guddiga ayaa muddo soddon (30) maalmood guddahood ah baahida jagada bannaan, u dooranaaya mid ka mid ah xubnahooda sida Guddoomiye ilaa qof kale uu Madaxweynaha ka soo magacaabo.
    b. Haddii uu yahay Guddoomiye ku xigeenka, xubnaha ayaa muddo soddon (30) maalmood guddahood ah baahida jagada bannaan, u dooranaaya mid ka mid ah xubnahooda si ay u buuxiyaan jagada bannaan.
    c. In dhammaan xaaladaha kale ee jago bannaaneynta Guddoomiyaha ayaa, muddo soddon (30) maalmood gudahood ah baahida jagada bannaan, warbixin ugu gudbinaaya Wasiirka si loo bilaabo magacaabista xubin cusub oo buuxisa jagada bannaan.
    d. Marka la codsado in la buuxiyo jaggo bannaanaatay ee la aqoonsado iney jagada bannaan tahay, Madaxweynuhu waa inuu magacaabaa bedelkiisa isagoo kala tashanaya Golaha.
    e. Qofka loo magacaabay inuu buuxiyo jagada bannaanaatay ayaa xafiiska haynaaya muddada uu siiyay Qodobka 41 (1) (b, c) iyadoo aan la tixgelineyn waqtiga u sii socday xubinta banneysay ka mid ahaanta xubin ka mid ah Guddiga.

**Qodobka 42:**
**Maamulka Guddiga**

1. Xoghaynta lagu dhisay si waafaqsan Qodobka 44aad ee Sharcigan ayaa siinaaya Guddiga adeegyada maamulka, xoghaynta, iyo taageero kaleba. Xoghaynta waa inuu hoggamiya Agaasimaha Guud oo noqonaaya Sarkaalka Madaxa Fullinta ee Mamulka oo lagu magacaabay si waafaqsan Qodobka 43aad ee Sharcigaan.
2. Xilalka Agaasimaha Guud ayaan ku koobneyn maamulka caadiga ah ee Maamulka, meelmarinta go'aannada Guddiga, haynta diiwaanka saxda ah ee hanaanada dacwadaha iyo go'aamada Guddiga, iyo dhammaan hawlaha kale ee guddi ahaan ku toosan.
3. Guddiga ayaa hawlgelin kara shaqaale iyo sida khubaro la talineed oo kale sida la taliyayaal, hadba sideey ugu baahan yihiin, oo si habboon oo hufan ugu fududeeya hawlaha Xoghaynta iyo guud ahaan hawlaha Guddiga si waafaqsan Sharcigan.
4. Maqnaanshaha Agaasimaha Guud, Guddiga ayaa u magacaabi kara xubin ka tirsan shaqaalaha Maamulka inay u dhaqanto sida Agaasime Guud.
5. Guddiga ayaa dhisaaya guddi-Hoosaadyo loogu talo galay fududeynta hufanaanta hawlihiisa.

**Qodobka 43:**
**Agaasimaha Guud**

1. In si waafaqsan Qodobkan, Guddiga uu magacaabaayo Agaasime Guud, oo noqonaaya Xoghayaha Guddiga oo aan xubin ka ahayn.
2. Agaasimaha Guud waxaa lagu soo xulayaa habka xulashada ku salaysan tartan rasmi ah ee waafaqsan hannaanka loo dejiyay xulashada saraakiisha sare ee ka tirsan xafiisyada dowladda.
3. Magacaabista Agaasimaha Guud waa in ay noqotaa muddo dhan shan (5) sano oo la cusboonaysiin karo hal mar oo keliya, oo shan (5) sano oo dheeraad ah,waxayna ku xiran tahay natiijada Qiimaynta waxqabadka sanadlaha ah.
4. Agaasime Guud waa iska casili karaa xilka xafiiska isagoo ogeysiinaaya Guddoomiyaha Guddiga ama waxaa xilka xafiiska ka qaadi kara Guddiga waxqabadka oo yaraada darteed ama ay jirto mid ka mid ah sababaha ku xusan Qodobka 39 (3) (a, b, c) ee Sharcigan.
5. Agaasimaha Guud wuxuu u wakiilan karaa hawlaha xafiiskiisa sarkaal kasta oo ka mid ah Xoghaynta laakiinse ma aha in laga reebaayo mas'uuliyada kama danbeysta ah oo laga gedinaayo hawlaha loo igmaday.
6. Agaasimaha Guud ayaa xilka xafiiska ku haynayaa muddada iyo sharuudaha la sheegay, sidaasna loogu dhex sheegaayo warqadda magacaabista xafiiskiisa ama waxaa sidaas qeexaya Guddiga.

**Qodobka 44:**
**Xoghaynta iyo Waaxyaha Maamulka**

1. Maamulka wuxuu yeelanayaa Xoghayn wuxuuna aasaasi karaa waaxyo iyo unugyo lagama maarmaan u ah qabashada hawlahooda. Xilalka waaxyaha iyo unugyada waa iney ku jiraan ugu yaraan hawlaha soo socda:
   a. Maalgelin iyo Maamul;
   b. Kormeerid U Hoggansanaan;
   c. Siyaasadda Iibka Qandaraasyada, Sharciyeed, iyo Cilmi baariseed; iyo
   d. Tababarid iyo Kobcin Karti Aqooneed;
   e. Iyo hawl kasta ee kale oo Guddiga uu arko iney lagama maarmaan u tahay hawlgalladiisa.
2. Xoghaynta ayaa masuul ka noqoneysa bixinta adeegyada maamulka iyo xoghaynta ee Guddiga Madaxa Bannaan Ee Dib u Eegista Qandaraaska Iibka.
3. Maamulka ayaa isagoo eegaaya shuruudaha iyo xaaladaha adeega uu isagu go'aamiyay, u hawlgelinaaya shaqaalahaan ama u shaqaaleynaaya adeegyada la taliyayaal, khubaro, ama baarayaal madax banaan hadba qaabka ku habboon ee lagama maarmaanka u ah gudashada hawlahooda.

**Qodobka 45:**
**Maamulka Maalgelinta**

1. Hawlaha Maamulka waa in lagu maalgeliyaa:
   a. Lacag ka timid Miisaaniyadda Dawladda Dhexe;

   b. Deeq soo gaartay Maamulka;
   c. Dakhliga ama ajuurada ama kharashyada laga soo ururiyey adeegyada uu bixiyo Maamulka, oo ay ku jiraan ururinta Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib u Eegista  Qandaraaska Iibka;
   d. Dhaqaalaha ka soo gala iibinta wixii daabacaad ah ee uu faafiyo Maamulka;
   e. Deeqaha, hadiyadaha, iyo tabarrucaha loo sameeyo Maamulka, laakiin kuma jiraan deeqaha, hadiyadaha, iyo tabarrucaha ay ka hesho ka qaybgalayaasha tartanka (qandaraasleyda, qeybiyeyaasha, iyo la taliyayaasha); iyo
   f. Ilaha dakhli ee noocaas oo kale ah waxaa ansaxinaaya Xeerdejiyaha.

2. Ku soo rogidda ajuurada iyo kharashaadyada ku xusan Qodobka 45 (1) (c) iyo (d), Maamulka waa inuu hubiyo in:
   a. Ajuurada noocan oo kale ah iyo kharashaadka aad bey u yar tahay waayo waa in aan laga niyad jabin dadka si ay u helaan adeegyada Maamulka iyo sameynta cabashooyinka iyo racfaanada, iyo
   b. Dakhliga daabacaadda ka soo xeroodaa waa inuu daboolaa oo kaliya kharajka ku baxay soo saarista daabacaadda.

### Qodobka 46:
### Xisaabaha iyo Hantidhowrka

1. Maamulka ayaa diyaarinaaya miisaaniyadda sanadlaha ah una haynaaya xisaabta saxda ah ee xisaabaadka iyo diiwaanadda qaabka uu u tilmaamay sharciga oo nidaaminaaya maareynta diiwaanadda dawladeed ee muddadaas dhaqangalka ah.
2. Buugaagta iyo xisaabaadka Maamulka waxaa sanad walba hubinaaya Hanti Dhowrka Guud ama hanti dhowre la magacaabay ama uu oggolaaday Hanti Dhowraha Guud.

### Qodobka 47:
### Sannad Maaliyadeed

Sannad maaliyadeedka Maamulka waa inuu la mid noqdaa, sannad maaliyadeedka Dowladda.

### Qodobka 48:
### Warbixinno sannadeed

1. Maamulka ayaa daabacaaya uguna gudbinaaya Wasiirka muddo aan ka badneyn saddex (3) bilood kaddib dhammaadka sannad maaliyadeedka, warbixin qoraal ah oo ay ku jiraan arrimahaan soo socda:
   a. Hawlaha iyo hawlgallada Maamulka ee sanadkii hore;
   b. Nuqul xisaabaad la hubiyay;
   c. Warbixin sanadeed ku saabsan hawlaha Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib u Eegista Iibka;

   d. Talooyin horumarineed ee goobaha u gaarka ah badeecadaha, hawlaha, adeegyada, wareejinada, iyo bixinta qandaraaska iyo barnaamijyada loo qorsheeyay dhaqangelinta talooyinka;
   e. Warbixin ku saabsan madasha sanadlaha  Qandaraaska Iibka ee loo qabtay si waafaqsan Qodobka 37 (h) ee sanadkii hore;
   f. Talooyin Guud iyo kuwo gaar ah.
2. Wasiirku wuxuu warbixinta hor geynayaa Guddiga Xeerdejinta si ay uga doodaan, ka dib marka ay soo marto Guddiga fulinta.

## B. UDDIGA MADAXA BANNAAN EE DIB U EEGISTA  QANDARAASKA IIBKA

### Qodobka 49:

### Aasaasidda Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib u Eegista Qandaraaska Iibka

1. Waxaa Sharcigan lagu dhisaya guddi loo yaqaan Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib u Eegista  Qandaraaska Iibka, oo halkaan hadda kaddib loogu yeeraayo Guddiga Dib u eegista.
2. Ujeedada Guddiga Dib u Eegista waa in ay sameeyaan dib u eegis maamul madax bannaan ee cabashooyinka iyo rafcaanada ay sameeyeyaan tartamayaasha ka qayb galaaya dalabka, go'aamada abaalmarinta heshiiska iyo go'aaminta arrimahaas.
3. Maamulka ayaa siinaaya Guddiga Dib u Eegista adeegyo leh maamul iyo xoghayn, oo ay ku jiraan maalgelinta iyo taageerada xagga saadka, si ay u gutaan waajibaadkooda.

### Qodobka 50:

### Qaab dhismeedka Guddiga Dib u Eegista

1. Guddiga Dib u eegista wuxuu ka kooban yahay shan (5) xubnood oo ah muwaadiniinta sumcad wanaagsan ku leh bulshada, laakiin aan ka mid ahayn shaqaalaha u shaqeeya dowladda. Xubnaha waa inuu Wasiirka u magacaabaa sida soo socota:
   a. Saddex (3) xubnood waa in laga soo dhex magacaabaa musharixiinta ah xirfadle, ganacsato, ama ururada bulshada rayidka ah.
   b. Laba (2) xubnood waa in laga soo magacaabaa ganacsiga gaarka loo leeyahay. Si uu xaq ugu yeesho qof magacaabida waa inuu asal ahaan aqoon u leeyahay mid ka mid ah meelaha soo socda: sharciga, Qandaraaska Iibka Guud, ganacsiga, maareynta maaliyadda, injineernimada, iyo maamulka guud.
2. Xubnaha ayaa dhexdooda ka dooranaya Guddoomiyaha. .

## Qodobka 51:
## Muddada Xilhaynta

Muddada xilka ee xubnaha Guddiga Dib u Eegista waa (4) afar sano, waxaana dib loo dooran karaa oo kaliya xubnaha hal (1) xilli dheeraad ah oo (4) afar sano ah, iyadoo aan loo eegin in muddada labaad ay tahay tan xigta iyo in kale.

## Qodobka 52:
## Gunnada Xubnaha Guddiga Dib u Egista Qandaraaska

1. Xubnaha Guddiga Dib u Eegista waxaa siinaaya gunnada Maamulka si waafaqsan xeerarka iyo nidaamyada uu dejiyo Maamulka ansixiyana wasiirka.
2. Dhaqaalaha lagu fulinaayo hawlaha Guddiga Dib u Eegista waa in ay ka mid noqotaa miisaaniyadda iyo xisaabaadka Maamulka.

## Qodobka 53:
## Hanaanka dib u eegista cabashooyinka iyo rafcaanka

Hanaanka dib u eegistu waa iney noqotaa si waafaqsan Jadwalka ku xusan Qodobada 2aad ee Sharcigaan.

## C. HAY'ADAHA IIBINTA QANDARAASKA
## Qodobka 54:
## Hay'adaha Iibinta Qandaraaska

1. Hay'ad kasta oo dadweyne ee loo yeelo qaab-dhismeed maamul lehna miisaaniyad oo loo igmaday mas'uuliyada qorshaynta iyo isticmaalka hantida dadweynaha ayaa la yiraah Hay'ad iibin qandaraas.
2. Hay'adda Iibinta Qandaraaska ayaa qabaneysa Qandaraaska Iibka iyo habeynta si waafaqsan Qodobada Sharcigan kuna xiran sharuudaha kale ee ay xerinayaan nidaamyada iyo tilmaamaha maamulka ee uu soo saaray Wasiirka.
3. Madaxa Hay'adda iibinta waa inuu noqdaa Sarkaalka Xisaabaha, si waafaqsan Sharcigan waana inuu mas'uul ka noqdaa la xisaabtanka u hoggansamida Hay'adda iibinta ee Sharcigan.
4. Waaxyada adeega farsamada ee Hay'adda Iibinta ayaa ka masuulka ah diyaarinta jadwalada shuruudaha, oo ay ku jiraan qiyaasta kharashka, caddaymaha, iyo mudadda tixraacaa, ka qaybgelinta tartanka dalabka iyo qiimeynta soo jeedimaha, iyo kormeerka heshiisyada, xaqiijinta helitaanka badeecadaha, dhamaystirka hawlaha heshiiska iyo adeegyada la talinta. Qaabka loo kormeeraayo iyo aqbalaada helitaanka badeecadaha waxaa lagu qeexayaa Xeernidaamyada.
5. Hay'adaha Iibinta Qandaraaska waa in lagu qoraa, oo loogu daabacaa si joogto ah faafinta iyo barta internetka ee Maamulka.

## Qodobka 55:
## Xilalka Sarkaalka Xisaabaha

1. Sarkaalka Xisaabaha ayaa yeelanayaa guud ahaan mas'uuliyadda fulinta go'aanka iibka, habeynta, iyo hanaanka bixinta qandaraaska ee Hay'adda Iibinta gaar ahaanna, waxaa uu mas'uul ka noqonayaa, hase yeeshee aan ku xaddidnayn kuwa soo socda:
   - I. Dhisidda Guddi Iibin Qandaraas si waafaqsan Sharcigan.
   - II. Dhisidda Waax Ibin Qandaraas laga shaqeeleeyo shaqaale heer ahaan ku habboon.
   - III. Ku abaalgudida iyo ku wargelinta go'aamada abaalmarinta qandaraaska kaddib ansixinta talobixinta cidda qandaraaska ku guleysatay ee uu soo jeediyo Guddiga Qandaraaska Iibka.
   - IV. Caddeyaan in la heli karo lacagta lagu maalgelinaayo qandaraaska si loo qabto hawlaha  Qandaraaska Iibka.
   - V. Saxiixidda heshiisyada hawlaha  Qandaraaska Iibka iyadoo ka wakiil ah Hay'adda Iibinta.
   - VI. U gudbinta Maamulka nuqul ka mid ah cabashooyinka iyo natiijada warbixinnada.
   - VII. Xaqiijinta hirgelinta in qandaraaska abaalmarintiisa loo maray si waafaqsan shuruudaha iyo xaaladaha heshiiska, iyo
   - VIII. Wuxuu hubinayaa dhamaystirka hawsha qardaraas fulinta, si waafaqsan shuruucda iyo Nidaamyaha hawlaha larabo in loo qabto.
   - IX. Dib u eegida iyo baarista cabashooyinka iyo racfaanada ganacsatada, qandaraasleyda. ama la taliyayaasha iyo daneeyayaasha kale ee ku qeexan Qodobka 113 ee Sharcigan.
2. Sarkaalka Xisaabaha wuxuu xilalkiisa u igman karaa si waafaqsan Sharcigan qoraal ahaan.

## Qodobka 56:
## Go'aamada Hay'ada Iibin iyo xilalkeeda

1. Go'aamada Hay'ad iibin iyadoo la tixgelinaayo hawlaheeda  Qandaraaska Iibka si waafaqsan Sharcigan waa in loola dhaqmaa qaab kulankadeed.
2. Sarkaalka Xisaabaha ayaa mas'uul ka noqonaaya hubinta u hoggaansanaanta Qodobada Sharcigan waana inaan cudur daar loogu sameyn hawlaha loo igmaday ee la xisaabtanka ama mas'uuliyada.

## Qodobka 57:
## Baaqa Hay'ad Iibin

a. Hay'ad Dadweyne ee cusub ayaa la dhisayaa oo noqoneysa Hay'adda iibinta oo sida ugu dhakhsaha badan marka loogu yeelo qaab adeeg, miisaaniyad, iyo waajibaad, oo ay ku jirto  Qandaraaska Iibka si ay u gudato hawlaheeda.

b. Ma jireyso hay'ad iibin oo qaban karta wax hawlo iib ilaa u caddeyo Maamulka in Guddi Iib Qandaraas iyo Waax Iib Qandaraas laga dhisay Hay'adda iibinta gudaheeda ayna leedahay Sarkaalka Xisaabaha.

## D. Guddiyada Qandaraaska Iibka Guud

## Qodobka 58:

## Abuuridda Guddiyada Qandaraaska Iibka Guud

1. Hay'ad kasta oo Iibin, waa inay abuurtaa Guddi Iib Qandaraas, oo ka kooban ugu yaraan shan (5) xubnood uuna u dhisaayo Sarkaalka Xisaabaha sida soo socota:
   a. Hal (1) sarkaal sare ah oo ka mid ah Hay'adda Iibinta oo guddoominaya fadhiyada; iyo
   b. Afar (4) ka tirsan Saraakiisha sare ee Hay'adda iibinta, mid ka mid ahna waa inuu noqdaa sarkaalka mas'uulka ka ah maaliyadda;
   c. Qof wakiila oo hawsha dhamadkeeda kushaqaleh iyo isku duba ridka.
2. Xoghayaha Guddiga Qandaraaska Iibka ayaa noqonaaya Madaxa Waaxda Qandaraaska Iibka .
3. Guddiga Qandaraaska Iibka waxay u adeegsan karaan la taliyeyaal adeegyada la tashiyada ama u hawgeliyaan wakiilada macaamisha ugu dambeyn isticmaalaya adeegyada, iyo dad u leh xirfad gaar ah iyo waaya aragnimo ku habboon si hufana u gudanaaya hawlahiisa.

## Qodobka 59:

## Hawlaha Guddiga Qandaraaska Iibka

Guddiga Qandaraaska Iibka waa inuu:

1. Dib u eegaa Qorshayaasha Qandaraaska Iibka si uu u hubiyo in ay taageeraayaan ujeedooyinka iyo hawlaha Hay'adda iibinta una hoggaansan yahay hannaanka miisaaniyadda Guud.
2. Ku sameeyaa kormeer ku salaysan afar biloodle ee hirgelinta Qorshaha Qandaraaska Iibka qaadana talaabada ku haboon xaaladaha ay jiraan waxqabad yar ama aan ku filnayn.
3. Dib u eegaa jadwalada iyo sumadaha Qandaraaska Iibka hubiyaana in nidaamka soo Iibka loo raacay si adag oo waafaqsan Qodobada Sharcigan, nidaamyada hawlgalkooda, iyo tilmaamahooda.
4. Dib u eegista dalabka iyo qiimeynta warbixinnada soo jeedinta iyo abaalmarinta heshiis la soo jeediyay siyaana ansixin ama haddii kale ay awood u siyaan Waaxda Qandaraaska Iibka iney sii wado hannaanka Qandaraaska Iibka.
5. Dib u eegaa heshiisyada la soo jeediyey.
6. Dib u eegaa ansixiyaana warbixinta sanadlaha ah ee Qandaraaska Iibka ay diyaarisay Waaxda Qandaraaska Iibka; iyo
7. Ansixiyaan isbeddelada arjiyada qandaraaska xaaladaha soo socda:

a. Halka asal ahaan abaalmarinta qandaraaska ay ku xiran tahay ansixinta Guddiga Qandaraaska Iibka; iyo
b. Halka wax ka beddelka qandraasku uu ku xadeysan yahay qiimaha guud ee qandaraaska ay dejisay Maamulkaee Guddiga Qandaraaska Iibka. Nidaamkuna xeeriyay.

**Qodobka 60:**

**Kulamada Guddiga Qandaraaska Iibka Guud**

1. Guddiga Qandaraaska Iibka waxay kulmayaan inta mar ee loo baahdo si ay u qabtaan hawlaha ku xusan Qodobka 59aad.
2. Marka la qabanaayo kulamada Guddiga waa in lagu ogeysiiyaa ugu yaraan toddoba (7) maalmood ka hor taariikhda la qorsheeyeynaayo kulanka.
3. Fadhiga kulanka Guddiga waxaa uu ku qabsoomayaa markey joogaan gudoomiyaha iyo laba (2) xubnood oo kale.

**E. Waaxaha Qandaraaska Iibka**

**Qodobka 61:**

**Waaxaha Iibka Qandaraaska**

1. Hay'ad kasta oo Iibin waa in ay dhistaa Waax Iib Qandaraas si waafaqsan Sharcigan.
2. Sarkaalka Xisaabaha ayaa go'aaminaaya inta xubnood ee ka mid noqoneysa Waaxda Qandaraaska Iibka Qandaraaska, waana in laga shaqaaleyaa ugu yaraan hal (1) qof oo u tababaran aqoonna u leh Qandaraaska Iibka qandaraaska.
3. Waaxda Qandaraaska Iibka Qandaraaska waa in ay ka hoos shaqeysaa oo ay kormeeraan Guddiga Qandaraaska Iibka Qandaraaska. Hawsha Unugga Qandaraaska Iibka waxaa kamida;
4. Hawlaha Waaxda Qandaraaska Iibka Qandaraaska waxaa ka mid ah:
   a. Qorshaynta Qandaraaska Iibka Qandaraaska;
   a. Haynta diiwaannada Qandaraaska Iibka qandaraasyada si waafaqsan Qodobka 31aad ee Sharcigan.
   b. Diyaarinta, daabacaadda, iyo qaybinta casumaada dalabka iyo dukumentiyada ka qaybgalka tartanka.
   c. Helitaanka iyo ilaalinta dalabyada.
   d. Qabashada furitaanka dalabka qandaraaska si waafaqsan Qodobada Sharcigaan.
   e. Waa Xoghayaha Guddiga Qiimaynta.
   f. Qiimeynta dalabyada, oo ay ku jiraan dhisidda guddiyada qiimeynta adeega adeeg farsamo iyo la taliyayaal si habboon u qiimeeya dalabyada, soo jeedinta iyo ka tallo bixinta abaalmarinta heshiiska.
   g. Bixinta adeegyada xogheynta ah ee Guddiga Qandaraaska Iibka, oo ay ku jiraan abaabulka kulamadooda iyo ka warbixinta dalabka iyo qiimeynta,

iyo dhammaan waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka u ah go'aan gaarista Guddiga Qandaraaska Iibka.

h. Kormeerka hirgelinta qandaraasyada.
i. Qiimaynta tayada badeecadaha la soo iibsanayo, hawlaha iyo adeegyada.
j. U qaabilsan arrimaha qeybiyeyaasha, qandaraasleyda, la taliyayaasha, iyo dayactirka kaydka xogta ee ku xadidan ka qaybgalaha dalabka tartanka iyo habraacyada ka qaybgalka xaddidan;
k. Maamulida bakhaarrada iyo maamulka hanaanka qashin qubida ; iyo.
l. Hawlaha kale ee noocan oo kale ah ee Sarkaalka Xisaabaha loogu xilsaaray Qaybta VI ee Sharcigan.

## F. GUDDIGA QIIMEYNTA DALABKA IYO SOO JEEDINTA

### Qodobka 62:

### Guddiga Qiimaynta

1. Sarkaalka Xisaabaha wuxuu diyaarinayaa Guddiga Qiimaynta markii loo baahdo, waxay ku xeran tahay qiimaha iyo adayga heshiiska qandaraaska Qandaraaska Iibka sida lagu faahfaahiyay Xeernidaamiyaha.
2. Xubnaha Waaxda Guddiga Qiimaynta Qandaraaska Iibka Qandaraaska waa in ay noqdaan dad leh khibrada loo baahnaa waxayna ka imaan karaan meel ka baxsan Hay'adda Iibinta.
3. Dhammaan xubnaha Guddiga Qiimayntu waa in ay saxeexaan bayaan ay ku caddeynayaan inaaney lahayn dan khilaafsan qandaraaska Qandaraaska Iibka looga baahan yahay.
4. Kulamada Guddiga Qiimaynta, qiimaynta anshaxa, habka qiimaynta, waa in loo fuliyaa si waafaqsan tilmaamaha dokumentiyada ka qaybgalka.
5. Talabixinta Guddiga Qiimaynta waa in loo gudbiyaa Waxda Qandaraaska Iibka oo ku socotaa hanaanka waafaqsan sida ku cad Qodobka 61 (4) (g)

## G. SHARCIYADA GUUD EE KU SAABSAN ANSHAXA EE HAY'ADAHA QANDARAASKA IIBKA GUUD

### Qodobka 63:

### Madaxbanaanida hawlaha iyo awoodaha.

Iyadoo la raacayo sida sharcigu farayo, Sarkaalka Xisaabaha, Guddiga Qandaraaska Iibka, Waaxda Qandaraaska Iibka, iyo Guddiga qiimaynta waa inay si madaxbanaan u fuliyaan hawlahooda gaarka ah iyo awoodahooda si waafaqsan sharcigan waana iney mas'uul uga noqdaan maamulka heshiisyada qandaraaska ay Hay'adda Iibinta galayso lana socodaan oo kormeraan waxqabadka heshiisyada qandaraaska.

### Qodobka 64:

### Awoodaha loo igmado Sarkaalka Xisaabaha

1. Mar kasta oo Sarkaalka Xisaabaha loo igmado maamulkiisa si waafaqsan sharcigan waa inay ahaataa qoraal lana aqoonsadaa arrimaha soo socda:

a. Sarkaalka Xisaabaha ayaa mas'uul ka ah go'aanada uu gaaro sarkaalka hawsha loo igmaday;
b. Igmashada waa inay noqotaa muddo lagu heshiyay ama muddo aan ka badneyn inta lagu guda jiro mudadda uu Sarkaalka Xisaabaha xilka ka haayo jagadaas.

2. Marka Sarkaalka Xisaabaha go'aamiyo in Hay'adda Iibinta lahayn awood ay ku fuliso sharciga, ama Marka Sarkaalka Xisaabaha go'aansado inay dhaqaale ahaan iyo waxtar ahaanba ay ku fiicantahay in la adeegsado wakiil iib ama adeegyada Hay'ad kale oo Iibineed, Sarkaalka Xisaabaha wuxuu uu ka hawl galin karaa adeegyada wakiil iib ama Hay'ad kale oo Iibineed, iyadoo uu raacayo sida uu xeerinaayo Xeernidaamiyaha sharcigan.
3. Sarkaalka Xisaabaha wuxuu awood karaa xilli kasta inuu kala soo noqdo maamulka xilkii uu igmaday.

## Qodobka 65:
## Khilaafka u dhexeeya dhinacyada

1. Khilaafka u dhexeeya dhinacyo kasta oo ku saabsan talo loogu talogalay abaalmarinta heshiiska ama qandaraas kordhinta, codsiga, ama fasiraad kasta ee habka Qandaraaska Iibka , hannaanka, ama dhaqanka waa in lagu xaliyaa wada tashiga dhinacyada. Haddii lagu fashilmo in sidaas la sameeyo, khilaafka waa in loo xaliyaa sida soo socota:
   a. Khilaafka u dhexeeya Guddiga Qandaraaska Iibka iyo Waaxda Qandaraaska Iibka waa in loo gudbiyaa Sarkaalka Xisaabaha. Sarkaalka Xisaabaha ayaa dhisayaa oo guddoominayaa saddex-xubnood oo Guddiga Xalinta ah , iyo labo xubnood oo ah saraakiil sare ee Dawladda oo aqoon u leh arrimaha Qandaraaska Iibka oo aan ka tirsaneyn shaqaalaha Maamulka ama la xiriirin Hay'adda iibinta, waana in ay xaliyaan khilaafka.
   b. Khilaafka u dhexeeya Guddiga Iibka iyo Sarkaalka Xisaabaha waa in loo gudbiyaa Maamulka wixii tallo ama toosin madax banaan ah.
2. Go'aanka Guddiga Xalinta iyo talo bixinta ama toosinta Maamulka ee ku xusan Qodobka 36 (1) waa waajib saaran dhammaan dhinacyada.

## Qodobka 66:
## Xafidaadda Qarsoonaanta Dokumintiyada

1. Qof kasta uu saran yahay waajib rasmi ah ama ka shaqeeya maamulka lagu dhisay Sharcigan ama ku hawlan la talinta Hay'adda iibinta waa inuu u tixgeliyaa una qabtaa si qarsoodi ah dhammaan dokumentiyada iyo xogta la xiriira hawlaha Hay'adda iibinta.
2. Qofna looma oggola in xogta iyo dokumentiga uu hayo ee ku saabsan howsha hay'adda wax gadanaysa uu la qaybsado ama uga warbixiyo ama isku dayo inuu xog u gudbiyo cid aan ahayn Sarkaalka Xisaabaha xubin ka mid ah Guddiga Qandaraaska Iibka ama Waaxda Qandaraaska Iibka.

**Qodobka 67:**
**Heerarka sinnaanta**

1. Marka ay fulinayaan waajibaadkooda, Sarkaalka Xisaabaha, Guddiga Qandaraaska Iibka, Waaxda Qandaraaska Iibka  iyo Guddiga qiimeynta waa iney u hoggaansamaan heerka ugu sareeya ee sinaanta, iyadoo la tixgelinayo:
    a. U sinaanta fursada dhammaan laga filayo  qeybiyeyaasha, qandaraasleyda, ama la taliyayaasha;
    b. In si cadaalad loola dhaqmo dhammaan dhinacyada; iyo
    c. Baahida loo qabo in la helo qiimaha lacageed ee ugu fiican marka laga eego qiimaha, tayada, iyo gaarsiinta iyadoo la tixgelinayo caddaymaha go'an iyo shuruudaha loo dhigay hannaanka.

**Qodobka 68:**
**Waqtiga Qandaraaska la galayo**

Marka laga reebo xaaladaha deg dega ah ama go'aan oggolaansho hore oo ay gaareen Guddiga Qandaraaska Iibka Guud, Hay'adaha Iibintama geli karo qandaraas iib ilaa ay ka soo wareegto afar iyo toban (14) maalmood maalintii la shaaciyey kulankadii ama ciddii kale ee qandaraaska lagu tartamayey ku guuleysatey sida ku cad Qodobka 83 (4)

## QAYBTA AFARAAD: HABABKA QANDARAASKA IIBKA  IYO HABRAACYADA

### A. Habka Xulashada Qandaraaska Iibka Guud

**Qodobka 69:**
**Kala Doorashada hababka Qandaraaska Iibka**

1. Qandaraaska Iibka  Guud waa in loo qabtaa iyadoo la marayo habraacyo tartan ka qaybgal furan oo la xayeysiiyo, oo leh fursad ka qaybgal ay u siman yihiin dhammaan tartamayaasha xaqa u leh una qalma si takoorid la'aan ah. Hababka kale ee qandaraaska iibka waa la isticmaalaya marka laga reebo sida ku cad Qaybta IV-C ee Sharcigaan.
2. Heshiisyada Qandaraasyada Iibka  lama la kala qaybin karo iyadoo qasadku yahay si looga leexdo xayeysinta ka qaybgalka tartanka furan ee looga baahan yahay dhammaan heshiisyada lagu qiyaasay in qiimohoodu ka badan yahay qaddarka lacageed ee lagu sheegay Xeernidaamiyaha Sharcigan.
3. Haddii Hay'adda Iibinta ay adeegsato hab qandaraas iibin aan ahayn tartan ka qaybgal furan oo la xayeysiyay sida uu xeerinaayo sharcigaan, waa in lagu cadeeyaa, xusuus dhowrka habraaca qandaraaska iibka  asbaabta loo xushay habka qandaraaska iibka.
4. Halka ka qaybgalka bulshada ka faa'iideysaneysa qandaraaska ay keeni karto kor u qaadidda dhaqaalaha, tayada, ama joogtaynta adeega in laga iibiyo, bulshadaa waa ka qaybgeli karaan Iibka kaddib markii ay maraan habraaca ku qeexan Nidaamyahaan.

5. Hay’adda Iibinta waa in ay ka xulataa nooca heshiiska ay u adeegsaneyso iib gaar noocyada ku xusan xeer nidaamiyaha sharcigan.

## Qodobka 70:
## Ka qaybgal tartan furan

1. Habraacyada tartanka ka qaybgalka furan waxaa soo galaaya habraaca marxaladda sharuudda gogoldhigga ah ama codsiga sharuudda dambe ee ka horeeysa ku abaalmarinta heshiiska, waxaana lagu soo bixi karaa hal wareeg ama labo wareeg.
2. Qandaraas tartan ka qaybgal furan waxaa loo qaban karaa labada marxaladood ee soo socda.
   a. Markey ahayn suurogal in si buuxda loo qeexo noocyada adeeg farsamo ama heshiis ee qandaraaska iibka ee lagu helaayo tartan dalabyo; iyo
   b. Marka Hay'adda Iibinta, ay dooneyso iney tixgeliso go’aanno adeeg farsamo oo kala duwan ama heshiiseed, kalana hadlaan tartamayaasha dalabka waxayaabo la xiriira mudnaanta kala duwanaanshaha ka hor inta aysan si kama dambays ah u go'aansan tilmaamaha gaar ahaaneed ee adeeg farsamo ama heshiis ee ku xeran kakanaanta iyo nooca heshiiska.
3. Tartan ka qaybgal furan waa inuu ku saleysan yahay Hanaanka Dokumentiyada Tartanka Qandaraasyada ee uu soo saaray Maamulka kuna qoran Xeer Nidaamyaha.

## Qodobka 71:
## Tartanka qandaraaska Guud

1. Hay’adda Iibinta waa in ay ku dhaqantaa habraacyada ka qaybgalka tartanka qaran marka xaddiga heshiiska la qiyaasay uu ku xadiddan yahay qiimaha lagu caddeyay Xeernidaamiyaha.

2. Hay'adda Iibinta ayaa ku qeexeysa dukumentiyada ka qaybgalka tartamayaasha iney ku soo qaadamaan qiimaha lacagta maxalliga ah oo kaliya, laguna bixinaayo guud ahaanteed lacagta maxalliga ah.

## Qodobka 72:
## Tartan ka qeybgal caalami ah

1. Hay’adda Iibinta waa in ay ku dhaqantaa habraacyada ka qaybgalka tartanka caalamiga ah marka xaddiga heshiiska la qiyaasay uu ku badan yahay qiimaha lagu caddeyay Xeernidaamyaha.
2. Tartan ka qaybgalka caalamiga ah waxaa la adeegsan karaa mar kasta oo la sameynaayo tartan ka qaybgal furan lamana helaayo tartan wax ku ool ah ilaa shirkadaha shisheeye lagu casumo ka qaybgalka.
3. Waxaa intaa dheer oo waafaqsan habraacyada Sharcigaan, in la dabbaqo xitaa tartan ka qaybgal caalami ah, arrimaha soo socda:
   a. Dokumentiyada casumaada dalabka iyo ka qaybgalka waa in lagu qoraa luqadda Ingiriiska si waafaqsan ka qaybgal tartan caalami ah.

b. Casumaada dalbka waa in lagu qoraa wargeys leh gaarsiin ku haboon oo soo jiidanaaya tartame shisheeye sida ku cad Xeernidaamiyaha.
c. Farsamadaha khaaska ah waa in ay ahaadaan kuwo la socon kara baahiyaha Guud kuna salaysan heerarka caalamiga ah ama heerarka si weyn loo adeegsado ganacsiga caalamiga ah, waana in si gaar ahaaneed u waafaqsan yahay Qodobka 45aad ee sharcigaan.
d. Tartamayaasha waxaa loo oggol yahay inay muujiyaan dalabyadooda, oo ay sidoo kale soo bandhigaan dokumentiyo kasta ee damaanad qaadaaya iyaga, kuna soo gudbiyaan lacagta dalkooda haddii lacagtaas si fudud loo sarifi karo, ama ay tahay lacag si weyn looga isticmaalo seyladaha ganacsiga caalamiga ah kuna xusan dokumentiyada ka qaybgalka.
e. Xaaladaha guud iyo kuwa gaar ahaaneed ee qandaraaska waa in ay ahaadaan nooc si ballaaran looga isticmaalo seyladaha ganacsiga caalamiga ah.

## Qodobka 73:
## Muddada la oggol yahay in lagu soo gudbiyo dalabyada

Si loogu oggolaado muddo ku filan ee casumaadu ku gaarto murashaxiinta uguna suurogasho iney isku diyaariyaan soona gudbiyaan dalabyada ama codsiyada, Hay'adda Iibinta waa in ay u oggolaataa ugu yaraan:

1. Muddo Soddon (30) maalmood ka yar tartan ka qaybgal dal; iyo
2. Afartan iyo shan (45) maalmood ka yar lagu soo gudbiyo dalabyada iyo codsiyada xulashada horteed ee tartan ka qaybgal caalami ah.

## Qodobka 74:
## Mudadda lagu galayo heshiiska

Marka laga reebo xaalad degdeg ah iyo ka hor ansixinta Guddiga Qandaraaska Iibka, ma jirto Hay'ad Iibin oo geli karta heshiis qandaraas iib ilaa ugu yaraan ay ka soo wareegto afar iyo toban (14) maalmood maalinta wargelinta abaalmarinta heshiiska ee tartame guuleystay si waafaqsan Qodobka 81 (4).

## B. Habraacyada Qandaraaska Iibka ee Tartan Furan
## Qodobka 75:
## Dardargelinta ka qaybgal ka habraaca dalabka.

1. Casumaada lagu dalbanaayo, ama casumaada xulashada horteed, waa in loogu daabacaa si ballaaran oo lagu siidaayaa faafinta qandaraaska iibka, sida in lagu baahiyo website loogu talagalay; iyo marka uu yahay tartanka qandaraasyada caalamiga ah ee dhameystirmay lagu baahiyo warbaahinta caalamiga ah ee la xulay iyadoo la raacaayo tilmaamaha Maamulka. Wasiirka wuxuu ku xusi karaa Xeerinidaamiyaha hadduu jiro wargeys maxali ah ee lagu faafiyo qandaraaska iibka oo lagu xayeysiin karo dalabyada laguna sheegi karo tilmaamooyin dheeri

ah, ku daabacida xogta qandaraaska iibka khasabka ah mareegta internetka ugu sareysa ee Faafinta Qandaraaska Iibka.

2. Casumaada lagu dalbanaayo ama, sida xaaladdu tahay, casumaada xulashada horteed waa in uu ku jiraa macluumaad ku saabsan:
   a. Aqoonsiga iyo cinwaanka Hay'adda Iibinta;
   b. Dabeecadda iyo waqtiga go'an ee la galaayo heshiiska Qandaraaska Iibka, oo ay ku jiraan meesha la geynaayo badeecada ama laga qabanaayo adeega, iyo goob kasta ee shaqo laga qabanaayo;
   c. Habka Helitaanka iyo kharashka dokumentiyada ka qaybgalka ama, haddii lagu dabaqi karo, dokumentiyada xulashada hore;
   d. Goobta iyo wakhtiga kama dambaysta ah iyo habka loo soo gudbinaayo ka qaybgalka dalabka, ama codsiga xulashada horteed;
   e. Arrimaha kale ee noocan oo kale ee lagu qeexay Xeernidaamiyaha iyo dokumentiyada ka qaybgalka caadiga ah iyo foomamka ama tilmaamaha uu soo saaray Maamulka.

## Qodobka 76:
## Dukumentiyada ka qaybgalka

1. Hay'adda Iibinta waa in ay u siisaa, hab degdeg ah oo aan takoor lahayn, dukumentiyada ka qaybgalka, dhammaan tartamayaasha suragalka ah ee ka soo jawaabaya casumaada dalabka ama, xaaladda habraacyada sharuudaha gogoldhigga ah, dhammaan tartamayaasha ka soo baxay sharuudaha gogoldhigga ah. Qiimaha lagu soo rogaayo dokumentiyada ka qaybgalka ayaa muujinaaya oo kaliya qiimaha daabacaada iyo qaybinta dokumentiyada sida lagu tilmaamay Xeernidaamiyaha.
2. Dukumentiyada ka qaybgalka waa in lagu wargeliyaa tartamayaasha:
   a. Dabeecadda iyo waqti go'an ee Qandaraaska Iibka, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn nashqad / sawiro adeeg farsamo, marka la eego tixraaca, marka la eego sharuudaha heshiiska Qandaraaska Iibka, iyo habka dhaqangalka heshiiska;
   b. Shuruudaha xulashada ee looga baahan yahay tartamaha haddii xulashada hore ee habraaca aan la raciin;
   c. Wargelinta ah sida iney booqdaan goobaha iyo kulamada ka horeeya dalabka;
   d. Tilmaamaha diyaarinta iyo soo gudbinta dalabyada, oo ay ku jiraan waqtiga ugu dambeeya ee soo gudbinta dalabyada, waqtiga, iyo goobta lagu furaayo dalabyada;
   e. Qaybaha uu ka muuqanaayo qiimaha kharashka, lacagta ama lacagaha, oo lagu dhex xusi karo qiimaha dalabka, iyo qiimaha la xidhiidha heerka sarrifka ee la isticmaalaayo marka la isbarbardhiga dalabyada;
   f. Habka qiimaynta dalabyada iyo xulashada ka qaybgalaha guuleystay, waa in dhammaan lagu cabiraa xaaladda lacageed ama loo muujiyaa qaab ku guleystay/ ku guuldareystay sharuudihii. Iyadoo la tixraacayo shuruudaha

qiimaynta, Hay'adda Iibinta waa in ay tixgelisaa oo kaliya arrimaha soo socda:

  i. Qiimaha dalabka, ayaa ku xeran mudnaan siinta dalka ee farqi kasta loona dabbaqo si waafaqsan Qodobka 34; iyo
  ii. Kharashka hawlgelinta, dayactirka iyo hagaajinta alaabada, ama shuqullada, waqtiga gaarsiinta badeecada, dhamaystirka hawlaha ama bixinta adeegyada, astaamaha alaabada shaqeynaaya ama shuqullada, shuruudaha lacag bixinta iyo dammaanadaha ku saabsan badeecadaha, hawlaha, ama adeegyada.

g. Farqiga mudnaan siinta gudaha dalka, haddii ay jiraan badeecado, qandaraaslayaal, iyo la taliyayaal ka imaanaaya gudaha sida ku cad Qodobka 34 ee sharcigan;
h. Isugeeyn kasta ee kooxeed oo badeeco hawlo ama adeegyo waxaa la isku raacinayaa xidhmo iyo baakado, hab ahaana waxaa loo qiimeynayaa xidhmo iyo baakado;
i. Haddii beddelka tafaasiisha adeeg farsamo ama qandaraas ee la qeexay loo aqoonsan lahaa, haddii ay sidaas tahay, sida beddelkaa loo qiimeeyn lahaa;
j. Haddii qeybiyeyaasha loo ogol yahay in ay soo gudbiyaan dalabyada qayb ka mid ah ee badeecadaha, hawlaha, ama adeegyada si looga iibiyo, sharaxaad ku saabsan qaybta ama qaybaha dalabyada la gudbin karo;
k. Mudadda loo baahan yahay ay ansax yihiin dalabyada;
l. Qadarka iyo qaababka loo aqbali karo dalab kasta ee loo baahan yahay, waxqabadka ama damaanad kale;
m. Shuruudaha qandaraaska ee lala gali doonaa tartamaha guulaystay;
n. Ogeysiiska ah dan-is-khilaafeysa xayiraad iyo xeerarka dabargoynta-khiyaamo iyo musuqmaasuq;
o. Habka ay tartamayaashu ku heli karaan in dib u eegis lagu sameeyo tallaabooyin la falay ama laga tagay iyo go'aannada Hay'adda Iibinta; iyo;
p. Arrimaha kale ee noocan oo kale ah maadaama loo baahan karo Xeernidaamyo ama ay buugaag gacmeed ama halbeegga dokumentiyada ka qaybgalka caadiga ah ama qaabab uu tilmaamay Maamulka.

**Qodobka 77:**
**Soo gudbinta Dalabyada**

1. Dalab waa in lagu soo gudbiyaa qoraal la saxiixay, laguna soo gudbiyey bakhshad xiran ama baqshadaha haddii dalabyadu ayna geli karin hal baqshad iyadoo la raacayo tilmaamaha tartamayaasha. Tartannada la helo kaddib mudadda ugu danbeysa ee soo gudbinta dalabka waxaa dib loo soo celinayaa iyadoo aan la furin. Casumaada xulashada horteed dokumentiyada ka qaybgalayaasha waa in loo ogolaadaa soo gudbinta codsiyada xulashada hordhaca ah ama dalabka ku yimaada gacanta ama iimeyl ama bus waa ikhtiyaarka tartamaha.

2. Habka ah soo gudbinta iyo furitaanka dalabka elektaroonikada la ogolaan karo waxaa lagu tilmaamay Xeernidaamyaha, ay shardi tahay in sirta iyo damaanada tartannada la ceymiyo, oo ay ku jirto ka hortagga furitaanka iyo akhriska dalabka qof ahaaneed ilaa laga gaaro furitaanka dalabka ee saacadii lagu ballamay si waafaqsan Qodobka 79
3. Tartannada waa iney ahaadaan ansax muddada lagu tilmaamay dokumentiyada ka qaybgalka. Bedelida ama ka laabashada dalab inta lagu jiro jiritaanka muddada dalabka waxay ku qasbeysa tartamaha qandaraaska inuu lumiyo damaanada dalabka. Muddada uu ansax yahay dalabka waxaa lagu kordhin karaa oo kaliya heshiis khuseeya tartamaha. Tartame oggolaaday dheereynta muddada ansaxnimada dalabkiisa waa inuu sidoo kale helaa kordhin u dhiganta damaanada dalabka, haddii damaanadaas oo kale loo baahan yahay.

**Qodobka 78:**

**Dammaanada dalabka iyo ku dhawaaqidda badbaadinta dalabka**

1. Dokumentiyada tartanka qandaraasyada waxaa tartamayaasha qandaraasyada looga baahan yahay in ay soo gudbiyaan damaanad qaadka ka qaybgalka dalabka qandaraaska ama inay caddeeyaan badbadinta ka qaybgalka dalabka qandaraaska. Sharuud kasta oo noocaas ah waa looga baahan yahay dhammaan tartamayaasha qandaraasyada, waana in loo dabbaqaa si waafaqsan Nidaamyaha. Damaanada ka qaybgalka dalabka qandaraaska ama tallaabo kata waxaa lagu luminayaa si waafaqsan caddeynta badbaadinta ka qaybgalka dalabka qandaraaska, waxaana lagu soo rogi karaa oo keliya haddii ay dhacdo:
    a. Beddellida ama ka laabashada kaddib soo gudbinta ka qaybgalka dalabka qandaraaska kama dambaynta ah iyo inta lagu jiro muddada ansaxnimadiisa;
    b. Diidmada tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska, aan aqbalin in la saxo qaladaad xisaabeedka ama turanturro kale ay ka soo if baxaan wejiga tartanka ka qaybgalka dalabka qandaraaska
    c. Ka baaqsado tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska ku guulaystay tartanku in uu u saxeexo heshiiska Qandaraaska Iibka sida lagu caddeeyey ddokumentiyada tartanka;
    d. Ka gaabinta waxqabadka damaanad qaadka qandaraaska ee tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska ku guulaystay haddii dokumentiga tartanka qandaraaska sidaa looga baahnaa.
    e. Tartamayaashu waxey soo buuxin karaan/oo saxiixayaan foom ay ku aqbalayaaan haddii ay ka baxaan ama wax ka beddelaan tartanka qandaraaska muddada soo gudbintooda ay ansax tahay ama lagu abaalmariyo heshiiska oo ay ku guuldareystaan iney saxiixaan heshiiska ama hagaajin waayan soo gudbinta damaanad qaadka ka hor waqtiga kama dambaysta ah ee lagu qeexay dokumeentiyada ka qaybgalka dalabka qandaraaska, tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaskaas waa in lagu joojiyaa muddada waqtiga lagu caddeeyay dokumentiyada qandaraaska inuu noqon karo tartamo xaq u leh

in wax heshiis oo ku saabsan tartanadii ka qaybgalka dalabka qandaraaska ee lagu casumay.

## Qodobka 79:
## Furitaanka ka qaybgalka dalabka qandaraaska

1. Tartannada dalabka waa in laga furaa goobta iyo waqtiga lagu tilmaamay dukumentiyada ka qayb galayaasha qandaraaska, oo ku beegan muddada kama dambaynta ah ee lagu soo gudbinaayo tartannada dalabka, ama muddada u dhow ee xigta, iyadoo la sinaayo xilli yar oo dhextaal ah sababo xagga saadka ah darteed.
2. Tartamayaasha dalabka qandaraasyada ama wakiilladooda waa ay ka soo qayb geli karaan furitaanka ka qaybgalka dalabka qandaraaska.
3. Magaca tartamaha ka qaybgalka dalabka Qandaraaska, wadarta guud ee dalab kasta, wax-ka-dhimis ama beddelladaha kale ee ay soo gudbiyaan, iyo jiritaanka ama maqnaanshaha damaanad qaadka dalab kasta, haddii loo baahdo, iyo dokumeentiyada muhiimka ah ee taageeraya waa in lagu akhriyaa si cod dheer lana duubaa, oo nuqul ka mid ahna waa in diiwaanka la geliyaa ee uu tartame kasta ku heli karaa codsasho.
4. Laba xubnood oo ka tirsan Guddiga ka qaybgalka dalabka furitaanka qandaraaska waa in ay saxiixaan dukumintiyada qandaraaska dalab kasta ee la soo gudbiyay lehna saameyn maaliyadeed.
5. Ma jiro go'aan ku saabsan ka-saarid ama diidmo dalab qandaraas oo la gaari karo ama lagu dhawaaqi karo fadhiga furitaanka ka qaybgalka dalabka qandaraaska.
6. Furitaanka dalabka qandaraaska kaddib, iyo ilaa inta go'aanka horudhaca ah ee abaalmarinta la ogeysiiyo tartamaha ka qaybgalka dalabka Qandaraaska ku guulaystay, ma jiri karo tartame la yeelanaayo isgaarsiin aan la weydiisan Hay'adda Iibinta ama si kastaba isugu dayi kara inuu saameyn ku yeesho qiimeynta iyo baaritaanka dalabka qandaraasyada ee Hay'adda Iibinta.

## Qodobka 80:
## Baaritaanka, qiimeynta, iyo isbarbardhiga tartannada dalabka qandaraasyada

1. Kaddib furitaanka dalabka qandaraasyada, Hay'adda Iibinta ayaa ugu horeyn baareysa dalabka si ay u hubiyaan haddii dalabka qandaraasyada ay dhameystiran yihiin, ayna saxeexan yihiin, iney dokumentiyadii yihiin kuwii loo baahnaa oo ay suggan tahay ansaxnimada jiritaankooda sharciyeed iyo in la soo buuxiyay damaanad qaadkii looga baahnaa tartanka ka qaybgalka dalabka qandaraaska iyo haddii dalabka nuxur ahaan ka jawaabayaan dokumentiyada tartannada qandaraasyada looga baahnaa.
2. Tartannada dalabka qandaraasyada, oo aan soo buuxin shuruudaha ku xusan Qodobka 78 faqradiisa (1), waa la diidayaa, waana in laga saaraa qiimayn iyo is-barbardhig dheeri ah.

3. Haddii la dabbaqo habraac isreebreeb hordhac ah, ka qaybgal dalab ee laga helay qof kasta oo kale ee aan ka ahayn tartamaha ka qaybgalka dalabka Qandaraaska isreebreeb hordhaca ah ku soo baxay waa in la diidaa lagana saaraa tartanka.
4. Tartannada dalabka qandaraasyada aan lagu reebin marka loo eego faqradaha (2aad) iyo (3aad) ee Qodobkaan waa in loo qiimeeya iyadoo la raacayo shuruudaha iyo habka lagu sheegay dokumentiyada tartannada dalabka qandaraasyada.
5. Hay'adda Iibinta waxay weeydiin kartaa tartame kasta ee ka qaybgalka dalabka qandaraaska cadeeyn si ay u fududaato qiimaynta hase yeeshee ma weydiin karaan, mana u oggolaan karaan tartame walba ee ka qaybgalka dalabka qandaraaska inuu bedello qiimaha ama arrin kasta oo kale ee ka qaybgalka dalabka tartanka qandaraaska. Haddii u tartame qandaraas uu beddelo ka qaybgalka dalabka tartankiisa qandaraas habkey noqotaba, ka qaybgalka dalabka tartanka noocaas ah waa in la diidaa tartanka damaanad qaadka dalabkiisana waa luminayaa.
6. Haddii uu jiro qalad xisaabeed, qaladkaas oo kale waa la la saxayaa tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaskana waa la ogeysiinayaa. Haddii tartamuhu diido in uu aqballo saxidaas, tartanka dalabkiisa waa la diidayaa tartanka damaanad qaadka dalabkiisana waa luminayaa. Haddii uu jiro farqi u dhexeeya tirooyinka iyo weedha, tirada weedha ku qoran ayaa mudnaanta leh marka laga rebo haddii kala duwanaanshaha uu sababay maqnaashaha tiro jajab tobanle ah, xaaladaas qaladka waa la saxayaa tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaskana waa in la ogeysiiyaa.
7. Marka la sameynaayo qiimaynta, haddii ay jiraan khaladaad yar yar oo ku yimaada tartan kasta ee dalab oo aan u qalmin wax diidmo dalab ee marxaladaha isreebreebka ugu horreeya, kala duwanaanshahaas yar sida waa qiimeynayaa haddii ay suuragal tahay. Qiimaha la qiimeeyay ee tartanka ka qaybgalka dalabkaas waa in markaa kaddib la barbar dhigaa tartannada dalabka kale si loo ogaado kan lagu qiimeeyay tartanka ka qaybgalka dalabka qandaraaska ugu hooseeya.
8. Haddii habraacu u ku jiro isreebreeb hordhac ah, sharuud buuxinta lagu qiimeeyay tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska ugu hooseeya waa in la xaqiijiyaa mar kale iyadoo la tixgeliynaayo isbedel kasta oo yimaada tan iyo isreebreebka hordhaca asalka ah.
9. Haddii unan jirin isreebreeb hordhac ah, tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska ka qaybgalka dalabka qandaraaska ee lagu qiimeeyay ka jawaabida sharuud buuxinta ugu hooseysa waa in lagu hubiyaa shuruudaha ku cad dokumentiyada tartannada qandaraasyada. Haddii ay guuldareysato, isla hubintaas ayaa lagu dabaqayaa tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska ka qaybgalka dalabka qandaraaska xiga ee ugu hooseeya uguna macquulsan, sidaasey ku soconayaan sida ay u kala darajo sareeyaan.
10. Hay'adda Iibinta waa in ay diyaarisaa warbixin qiimayn ah oo lagu faah faahinayo baaritaanka iyo qiimeynta tartannada dalabka qandaraasyada una

tilmaameysa soo jeedinta guuleystaha qandaraaskia iyadoo la raacayo shuruudaha ku cad qiimeynta documentiga tartanka qandaraaska.

## Qodobka 81:
## Daah fur-la'aanta faahfaahinta qiimeynta tartanka ka qaybgalka dalabka qandaraaska

Marka laga reebo sida ku cad Qodobka 31aad faqradiisa (3aad) iyo (4aad) ee diiwaanka habraacyada Qandaraaska Iibka, macluumaadka la xiriira baaritaanka, caddaynta, qiimeynta, iyo isbarbardhigga tartannada dalabka qandaraasyada waa in aan loo shaacin qeybiyeyaasha, la taliyeyaasha, ama tartameyda ama qof kale oo aan si rasmi ah ugu lug lahayn baaritaanka, qiimeynta, ama isbarbardhigga tartannada dalabka ama go'aanka laga gaaraayo dalabka la aqbalaayo.

## Qodobka 82:
## Reebannaanta gorgortannada lala galo bixiyayaasha qandaraaska ama tartameyaasha

1. Si waafaqsan ka reebista Qodobkaan, ma jiraan wax gorgortan ah oo dhexmaraaya Hay'adda Iibinta iyo qaybiye ama tartame marka loo eego tartanka ka qaybgalka dalabka uu soo gudbiyay qeybiyahaas ama qandaraaslahaas.
2. Haddii tartanka ka qaybgalka dalabka ugu hooseeya lagu qiimeeyay laga jawaabay ka badan yahay miisaaniyadda heshiiska farqi la taaban karo, Hay'adda Iibinta ayaa baaraaya sababaha keenay kharashka xad-dhaafka ah iyadoo:
    a. Tixgelineysa codsiga tartannada dalabka cusub ee ku salaysan dokumentiyada tartannada ka qayb galayaasha qandaraasyada ee dib loo eegay; ama
    b. Kadib markii ay ansixiyaan Guddiga loogu talagalay qandaraasyada oo raacaya habraaca Nidaamyaha iyo khadad hagayaasha uu soo saaray maamulka, heshiis lala galo tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska ugu qiimo jaban si loo helo heshiis lagu qanci karo iyo in la eego sidii kale ee wax loo yareen lahaa, si qiimaha qandaraaska loo dhimo.

## Qodobka 83:
## Abaalmarinta qandaraaska

1. Qandaraaska waa in lagu abaalmariyaa tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska soo gudbiya ka qaybgalka dalabka ugu qiimo hooseeya oo si wax ku ool ah uga jawaabaaya buuxinaayana shuruudaha qiimaynta sida ku cad dukumentiga u Qandaraaska.
2. Ka hor dhammaadka muddada ah ansaxnimada ka qaybgalka dalabka, Hay'adda iibinta waxay ogeysiinaysaa qandaraaslaha ku guuleystay abaalmarinta la soo jeediyay. Ogeysiinta abaalmarinta la soo jeediyay waxaa lagu cadeeynayaa mudadda gudaheeda lagu saxiixayo qandaraaska, iyo wixii cabashooyin la xiriira ee la soo gudbinaayo si waafaqsan Qaybta VIII ee xeerkan.

3. Isla mar ahaantaa uu qiimaha qandaraaska ka bato heerarka ku qeexan Xeer Nidaamyaha, waa in la ogeysiyaa tartamayaasha kale, iyadoo la tilmaamayo magaca iyo cinwaanka guuleystaha la soo jeediyey iyo qiimaha qandaraaska.
4. Qandaraaska waa inaan la saxiixin ilaa ugu yaraan ay ka soo wareegtay 14 cisho gudahood, kaddib siinta ogeysiiskaas loogu oggolanaayo tartame walba oo caraysan inuu ku soo gudbiyo cabasho ama racfaan.
5. Haddii tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska dalabkiisa la aqbalay ku guuldareysto inuu saxiixo qoraalka qandaraaska, haddii loo baahnaa in sidaas la sameeyo, ama uu ku guuldareysto inuu ku bixiyo wax kasta oo damaanad wax qabad ah ee looga baahan yahay heshiiska xadka mudadda gudaheeda loo qabtay, Hay'adda iibinta waxey aqbaleysaa kaalinta tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska ugu horeeya ee ka mid ah dalabka haray ee dhaqangalka ah.
6. Doorashada hay'adda iibinta ee ka qaybgalka dalabka tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska kaalinta ugu horeeya, waa iney waafaqsanaataa shuruudaha ogeysiiska lagu xusay Qodobka 81 (3).
7. Dokumentiyada tartanku waa in ay u sheegaan tartamayaasha:
   a. Nooca iyo waqtiga Qandaraaska Iibka, oo ay ku jiraan ugu yaraan astaamaha ama naqshaddaha, waajibaadka shaqo talo bixin, shuruudaha heshiska Qandaraaska Iibka , iyo habka heshiiska loo meelmarinayo.
   b. Shuruudaha awoodda iyo waayo-arragnimada looga baahan yahay tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska haddii aan tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska lagu xulan tartan hordhac ah.
   c. Wargelin ku saabsan booqashada goobta shaqo iyo kulanarka la qabanayo inta aanu tartanku bilaaban;
   d. Awaamiirta la raacayo marka la diyaarinayo jawaab-celinta iyo sida jawaab-celinta loo soo gaarsiinayo Hay'adaha Iibintaoo ay ku jiraan taariikhda iyo wakhtiga kama dambaysta ah ee jawaabta la soo gaarsiinayo Hay'adaha Iibintaiyo goobta furitaanka jawaabuhu ka dhici doonto;
   e. Faahfaahinta uu muujinayo qiimaha sicirku, nooca lacagta ama lacagaha ee qiimaha kaharashka tartanka naadadu u taaganyahay iyo xaddiga sarrifka lacagta ee la isticmaali doono marka jawaabaha tarmayaasha la is-barbardhigayo;
   f. Habraaca qiimaynta jawaabaha tartanka ka qaybgalka dalabka iyo xulashada tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska waxaa dhammaan lagu cabbirayaa qiimo lacageed ama lagu tibaaxayaa hab u kala saaraya "gudbe" iyo "ma-gudbe". Iyadoo la la raacayo halbeegga qiimaynta jawaabaha, Hay'adda Iibintawuxuu tixgelin karaa arrimaha soo socoda oo kaliye,
      i. Qiimaha uu soo jeediyo tartamuhu, iyadoo loo eegayo qoondada mudnaan siinta qeybiyeyaasha iyo tartameyda waddaniga ah ee ku xusan Qodobka 34; iyo
      ii. Kharashka shaqo-gelinta, dayactirka iyo gacan ku haynta agabka ama dhismaha, waqtiga keenidda agabka, dhammaystirka hawlaha, ama bixinta adeegga, astaamaha hawlfulinta agabka ama hawlaha dhismaha,

shuruudaha lacag bixinta iyo dammaanadda agabka, dhismaha ama adeegga.

g. Xaddiga qoondada mudnaan siinta, haddii ay jirto, alaab, qandaraaslay, iyo la taliyayyaal waddani ah sida ku xusan Qodobka 34 ee sharcigan;
h. Marka la is raacinayo, alaabo, hawldhismo, ama adeeg waxaa la iskugu ladhi karaa loona qiimeyn karaa xidhmooyin ama qaybo sida ay isu leeyihiin;
i. In loo oggolyahay tartamuhu in uu soo jeediyo hab-adeeg farsamo ama heshiis kaduwan kuwa lagu qeexay dukomentiyada tartanka, haddey jirto, sida loo qiimeynayo farasamooyinkan kale;
j. Haddii tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska loo oggolyahay inu uu kaga qaybgalo tartanka qayb kamid ah agabka, dhismaha ama adeegga loo bahanyahay, faahfaahinta qaybta ama qaybaha tartanka lagaga qaybgalayo;
k. Muddada qiimaha jawaab celinta tartanka aan la beddeli karin;
l. Qaddaraaska lacageed iyo qaablka looga baahanyahey damaanadda tartanka iyo midda hawlfulinta.
m. Shuruudaha heshiiska lala gelayo tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska tartanka ku guulaysta;
n. Wargelinta xeerarka joojinaya danaysiga shakhsiga ah, wax-isdabamarinta iyo musuqmaasuqa;
o. Habka dib-u-eegis loogu samayn karayo waxqabadka, gafafka ama go'aannada Waaxda Qandaraaska Iibka; iyo
p. Wixii kale uu qabo xeernidaamiyaha, hagayaasha, dokumentiyada mideysan ee tartanka ama qaababka kale ee ay jideyso Hayáddu.

## Qoddobka 84:

## Aqbalaada qandaraaska dhaqangalka iyo saxiixa qandaraaska

1. Halka dukumentiyada qandaraaska looga baahan yahay qeybiyaha qandaraaska ama qandaraaslaha oo dalabkiisa loo soo aqbalay inuu saxiixo qoraalka qandaraaska Qandaraaska Iibka si waafaqsan qaynuunka ka qaybgalka dalabka qandaraaska, Hay'adda iibinta iyo qeybiyaha qandaraaska ama qandaraaslaha waa in uu saxiixo qandaraaska Qandaraaska Iibka muddo 30 maalmood gudahood kaddib ogeysiiska ku xusan Qodobka 82 ( 2) la gaarsiiyo qeybiyaha qandaraaska ama qandaraaslaha.
2. Haddii qandaraaska qoraalka ah loo baahan yahay in la saxiixaa, qandaraaska waxuu dhaqangelayaa marka heshiiska ay wada saxiixan qeybiyaha ama tartame iyo Hay'adda Iibinta si waafaqsan Qodobada sharcigaan.
3. Qandaraaska waa in uu saxiixaa Sarkaalka Xisaabaha ama qof u igmaday isaga. Sarkaalka Xisaabaha, ayaa ugu wakiisho qoraal ahaan saxiixa qandaraasyada marinnadii albaabbada ee hoos lagu qeexay sarkaal kalee sare oo ka tirsan Hay'adda iibinta.

## Qodobka 85:
## Tartanka ka qaybgalka dalabka Labada-marxalood

1. Habraacyada tartannada ka qaybgalka dalabka furan ee ku xusan Qaybta IV (B) waxaa loo codsanayaa habracyada ka qaybgalka dalabka qandaraaska ku saleysan labada-marxalood, marka laga reebo ilaa xadka u wax uga beddelo Qodobkaan.
2. Marxaladda koowaad:
   a. Dokumentiyada ka qaybgalka dalabka waa iney ugu yeeraan tartamayaasha dalabka iney soo gudbiyaan naadadooda bilowga ah qiimo la'aan ah. Dukumentiyada noocan oo kale ah waxay dardargeliyaan soo jeedinta bilowga ah ee la xiriira horumarka adeeg farsamo, tayada ama sifooyinka kale ee badeecadaha, hawlaha ama adeegyada, iyo sidoo kale in la eego shuruudaha heshiiska iyo xaaladaha la soo jeediyey, iyo halka ku habboon, aqoonta xirfadeed ee adeeg farsamo iyo heerka aqooneed ee tartamayaasha dalabka.
   b. Hay'adda iibinta waxay la gali karaan wadahadalo mid kasta ama dhammaan tartamayaasha dalabka oo soo jeedintoodu ay waafaqsan tahay xaaladaha lagu jideeyey gundhigga dokumentiyada ka qaybgalka dalabka si ay u fahmaan soo jeedinta ama si ay u muujiyaan isbedelada lagama maarmaanka ah si ay u noqdaan kuwo la aqbali karo iyo in ay tartamayaashu la yimaadaan isbedeladaas
   c. Dhammaan wadahadalada lagu galay marxaladan waa in la qoraa kana mid noqdaan diiwaanka Qandaraaska Iibka .
   d. Dhammaadka Marxaladda koowaad, Hay'adda iibinta waxay:
      I. Celinaayaan dalaboyinka aan soo buuxin sharuudaha iyo kuwa aan beddelin si ay u soo buuxiyaan sharuudaha aasaasiga ah, ama aan la imaan waxqabadka ugu yar, ama aan ku soo dhameystirin mudadii loo baahnaa ama tabardari kasta oo ka dhigeysa dalabka mid si wax ku ool ah uga jawaabi ogeyn; ama
      II. Badalayaan tilmaamaha adeeg farsamo, shuruudaha qiimaynta, iyo xaaladaha heshiiska, halka la doonaya in loo kordhiyo tartanka oo si cadna ugu dhawaaqaan marinka ugu haboon ee loo maraayo qiimeynta.
3. Marxaladda labaad:
   a. Hay'adda Iibinta ayaa u yeereysa tartamayaasha qandaraaska ee aan la diidin dalabka qandaraaskooda si ay u soo gudbiyaan qiimaha kama dambaysta ah ee dalabka qandaraaskooda si loogu daro dukumentiyada tartanka ka qaybgalka dalabka ee dib loo eegayo.
   b. Tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska, ee aan doonayn inuu soo gudbiyo qiimaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska kama dambaysta ah waa ka bxi karaa habraacyada tartanka qandaraaska iyadoon aaney ka lumeyn damaanad kasta ee tartamaha ka qaybgalka dalabka looga baahnaa ee uu bixiyay, iyo

c. Dalabka tartannada qandaraaska ee kama dambaysta ah waa in la qiimeeyaa lana barbar dhigaa iyadoo la raacayo shuruudaha iyo marinka haboon ee lagu sheegay dokumentiiyada ka qaybgalka dalabka qandaraaska ee dib loo eegayo.

## C: DARIIQADAHA KALE EE QANDARAASKA IIBKA GUUD

### Qodobka 86:

### Tartan ka qaybgal dalab xaddidan ama go'an

1. Hay'adda Iibinta waxay sameyn kartaa tartan ka soo qaybgal qandaraas dalab xadidan ama go'an halkii ay ka qaban lahayd tartan ka soo qaybgal qandaraas dalab furan ee la shaaciyay waxayse ku xeran tahay ansaxinta Guddiga Qandaraaska Iibka markii:
    a. Badeecadaha, hawlaha ama adeegyada laga heli karo oo keliya tiro xaddidan ee tartamayaal qandaraas ah oo la yaqaano; ama.
    b. Hay'adda Iibinta ay waajib ku tahay bixinta iney xaq u leedahay si ay uga jawaabto jiritaanka baahi iib oo deg deg ah.
2. Habraacyada tartanka ka qaybgalka dalabka qandaraaska furan, sida ku xusan Qodobada 69–83 waxaa lagu dabaqayaa tartanka qandaraaska ka soo qaygalka ka qaybgalka dalabka xaddidan.

### Qodobka 87:

### Isticmaalka kooxaha dhismaha dawladda

1. Haddii Guddiga Iibku ansixiyaan, in qandaraasyada dhismaha ay Hay'adda Iibku u adeegsadaan shaqaalahooda iyo qalabkoodaba hawlaha dhismaha iyagoo isticmaalaya habka adeegsiga xogga sahayda dawladda waxaana laga hawlgalin karaa halka:
    a. Baaxadda hawlaha ay saameysay aan horay loo sii qeexi Karin;
    b. Tartamayaasha u qalmay qandaraaska aaney keenin dalab qiimo ahaan macquul ah, sababo la xiriira dabeecada, goobta, saadka, maalgelinta, ama kharashaadka abaabulka iyo ka dhigista;
    c. Qarsoodiga iyo damaanada arrimaha khuseeya wax loo dhimi lahaa haddii uu fuliyo tartame gaar ah;
    d. Hawsha loo baahan yahay in la fuliyo iyadoo aan hawlo kale oo socda waxba loo dhimayn;
    e. Halista kala go 'shaqo aan laga fursan karin waxaa wanaagsan iney ka timaado Hay'adda Iibinta halkeey ka imaan lahayd tartame gaar ah;
    f. Ay jiraan xaalado degdeg ah oo u baahan fiiro degdeg ah;
    g. Sidoo kale ay tahay wax ku xiran jid mar kasta loo raaco iyo barnaamij, Hay'adda iibinta ayaa horay u dhistay awoodooda gudaha ee loogu talagalay hawlaha gaar ah oo ay ku jiraan Qorshahooda Qandaraaska Iibka; iyo;
    h. Ay caddaatay in habka "Ku talagalka xogga" "Force Account" yahay habka keliya ee suurtagalka ah ee lagu qaban karo hawl dhismo ama lagu

dayactiri karo xaalado gaar ah, ama lagu horumarin karo taknoloojiyad, ama qaab hawleed ama midba aney hore u fulin kulankad gaar loo leeyahay.

2. Halka qandaraaska Qandaraaska Iibka Guud ee ka midka ah badeecadaha, ama hawlaha lagu galo qandaraas hoosaadka ama adeegyada loo baahan yahay si ay u kaabaan hawlaha ku talagalka, qandaraaskaas Qandaraaska Iibka ah waa in la fuliyaa iyadoo la raacayo qodobada muhiimka ah ee Sharcigaan.
3. Marka soo iibinta wixii alaab ah ama qalab ah ama qandaraas hoosaad sigaara larabo in loo meel mariyo loo bahanyahay, markaa hay'adda hawlaha fulinaysaa way isticmaali karaan fulinteeda keligood sida sharcigu qabo.

**Qodobka 88:**
**Codsi Qiimo-sheeg**

1. Codsiga habraaca qiimo-sheegta waxaa la sameeynayaa marka qiimaha qandaraaska ee loogu talagalay badeecadaha, hawlaha iyo adeegyada uu ka hooseeyo qiimaha lagu xusay Xeer nidaamiyaha.
2. Marka codsiga habraaca qiimo-sheegta loo adeegsanaayo asbaabaha lagu xusay Faqradda 1aad ee Qodobkan awgeed, Hay'adda Iibku waxay ka dalbaneysaa qiimo-sheegta tiro kooban oo ugu yaraan saddex tartamayaal dalab oo u qalma laguna xushay qaab aan takoorid lahayn.
3. Dokumentiyada loogu talogalayo codsiga qiimo-sheegta waa in lagu saleeyaa kuwo la sahlay oo tilmaamaya nooca iyo tirada badeecadaha ama astamaaha iyo baaxadda hawlaha, muddada la rabo gaarsiinta ama lagu dhameystirayo, goobta, iyo waqtiga lagu soo gudbinaayo codsiga qiimo-sheegta iyo shuruudaha qiimaynta iyo abaalmarinta qandaraaska. Tartamayaasha dalabka waxaa la siinayaa waqti ku filan oo ay ku soo diyaariyaan kuna soo gudbiyaan qiimo-sheegta waafaqsan Xeernidaamiyaha.
4. Tartamayaasha dalabka waxay soo gudbin karaan hal qiimo soo sheegis oo keliya iyagoo ku soo gudbinaya qoraal ahaan, fax ama qaab elektaroonik ah. Haddii ay tahay suurtagal qiimo soo sheegis waa in lagu keenaa muddo qeyxan kaddibna islamarkiiba la furaa. Ma jireyso dalab furan oo lagu weydiinaayo oo aan ka ahayn qiimayn sheegista waafaqsan mabaadi'da la mid ka ah sida kuwa ka soo qaybgalka dalabka furan ee ku xusan Qaybta IVaad (B).
5. Heshiiska Qandaraaska Iibka waxaa la siinayaa ganacsadaha, qandaraaslaha ama adeeg bixiyaha ugu qiime hooseeya soona buuxiya shuruudaha ay uga baahan tahay Hay'adda Iibinta.
6. Tartamayaasha dalabka looma oggola in ay beddelaan qiimo soo sheegistooda, wax gorgortan ahna ma dhexmari karo Guddiga qiimaynta dalabka iyo tartamaha ka qaybgalka dalabka qandaraaska oo ku saabsan qiimo-sheegta tartamaha ka qaybgalaaya dalabka qandaraaska.
7. Tartamaha dalabka ka qaybgalaayo ee la yimaadda qiimaha soo sheegista ugu hooseysa soona buuxiya shuruudaha kale ee Hay'adda Iibinta ayaa lagu abaalmarinayaa qandaraaska.

## Qodobka 89:
## Qandaraas bixinta tooska ah

1. Kaddib ansaxinta Guddiga Iibinta, Hay'adda Iibinta waxay u hawgelin kartaa si toos ah ama habraaca bixin qandaraas hal il kaliya marka ay jiraan xalaadaha soo socda:
    a. Dheereeynta heshiis qandaraas oo horay u jiray oo leh dabeecad la mid ah dhanka badeecadaha, hawlaha, ama adeegyada adeeg farsamo, ee lagu bixiyay si waafaqsan habraaca uu xeeriyay Sharcigaan. Guddiga Iibintana uu ka dheregsan yahay in aaney faa'iido ku jirin in xaaladahaas oo kale la galiyo tartan dheeraad ah iyo in uu macquul yahay qiimaha heshiiska la dheereeyey.
    b. Gadashada dheeraadka ah ee laga helaayo asal ahaanba hal ganacsade oo sabab looga dhigi karo asbaabo ku jaango'an qalabka ama dayactirka si ay ula jaan qaadaan qalabka markaa la haysto. Guddiga Iibintana uu ka dheregsan yahay in aaney faa'iido ku jirin in xaaladahaas oo kale la galiyo tartan dheeraad ah iyo in uu macquul yahay qiimaha heshiiska.
    c. Marka qalabka loo baahan yahay laga heli karo hal meel oo kaliya.
    d. Qandaraaslaha masuul ka ah hindise naqshadeed u baahan gadashada agabyo muhiim ah oo ku xeran damaanad waxqabad lagana helaayo oo kaliya ganacsade gaar ah.
    e. Xaaladaha gaarka ah ee degdega xad-dhaafka ah ay sabab u tahay xaalad degdeg ah, oo duruufaha keenay degdegga ay ahaayeen kuwo aaney sii saadaalin karin Hay'adda Iibinta garana karin dhankooda natiijada ka dhalan karta falka gaabiska ah.
2. Marka Hay'adda Iibinta ay adeegsaneyso habka Qandaraaska Iibka tooska ah ee asababaha lagu sheegay Qodobka 88 (1), waa in ay diyaarisaa qoraal ay ku qeexeyso baahideeda, iyo sharuudo kasta oo gaar ah sida tayada, tirada, shuruudaha iyo mudadda gaarsiinta.
3. Hay'adda Iibinta ayaa intaas kaddib codsanaaya soo gudbinta qoraaleed ee dalabka iyo soo jeedinta waana u banaan tahay in ay la galaan gorgortan,halkaa tartame kaliya.
4. Marka qiimaha loo qoondeeyay heshiiska iibku ka sarro maro qaddarka lacageed ee lagu caddeeyey Xeernidaamiyaha Sharcigan, wargelinta hawlaha la xiriira fulinta Qandaraaska Iibka tooska ah waxaa lagu daabacayaa faafinta rasmiga ah ama wargeyska loogu akhriska badan yahay iyo bogga barta internetka Qandaraaska Iibka.

## Qodobka 90:
## Qandaraaska Qandaraaska Iibka ee leh Qaab dhismeed loo maro

1. Hay'adaha Ibinta waxay keeni karaan iyagoo u maraaya nidaamka qaab dhismeedka Qandaraaska Iibka qandaraaska:
    a. Badeecadaha ay wada isticmaalaan macaamisha ee ka yimaada ganacsade keliya ama ganacsato badan; ama

    b. Adeegyada aan ahayn la talinta ee soo noqnoqda oo ay bixiyaan hal ama dhowr adeeg bixiyayaal. ka badan.
2. Maamulka ayaa qeexaya liisaska badeecadaha iyo adeegyada qandaraaska Qandaraaska Iibka soo noqnoqanaaya iyo inta ay ka kooban yihiin, waxay ku soo saareysaa, ku cusbooneysiineysaa kuna faafineysaa liisaska boggeeda internetka ugu yaraan hal mar sannadkii, isla markaana u qaybineysaa dhammaan Hay'adaha iibinta.
3. Waaxyada ama unugyada Hay'ad walba ee Iibinta ka mid ah waxay si gaar ahaaneed u ururineysaa baahidooda sanadlaha ah ee badeecadaha ay wada isticmaalaan macaamisha iyo adeegyada soo noqnoqonaya una soo gudbinayaan Unugooda u gaarka ah Iibinta oo isugeynaaya soo gudbinnada shaqsi ahaaneed Qorshaha Qandaraaska Iibka sanadlaha ah.
4. Guddiga Qandaraaska Iibka waa in uu dib u eegis ku sameeyaa ansixinayaana Qorshaha Qandaraaska Iibka la isku geeyay ee Qandaraaska Iibka soo noqnoqda.
5. Hay'adaha Iibinta ayaa u gudbinaaya nuqul ah Qorshooyinkooda Qandaraaska Iibka ee waxyaabaha iyo adeegyada ay inta badan uga baahan yihiin Wasaaradda iyo Maamulka.
6. Xaaladaha ay Hay'adda Iibinta kula geli karaan heshiis waafaqsan nidaamka qaab dhismeedka Qandaraaska Iibka qandaraaska ganacsade keliya ama ganacsato badan ama bixiyeyaasha adeegyada, habka la raacayo, shuruudaha qiimaynta, nooca heshiiska iyo muddada heshiiska waa in lagu xeeriyaa Xeernidaamiye, si dheeraad ahna loogu faahfaahiya dokumentiyada caadiga ah ee ka qaygalayaasha qandaraasyada ee qaab dhismeedka heshiisyada uu daabaco Maamulka.
7. Hay'adda Iibinta way ka iibin kartaa badeecadaha ama adeegyada soo noqnoqda ee ka timaada ganacsato ama adeegbixiyaal ka tirsan Hay'addo kale ee Ibiin ee galay heshiis leh qaab dhismeed iib ee badeecado ama adeegyo la mid ah ka Xaffiska Iibku u marka ay soo buuxiyaan sharuudaha soo socda:
    a. Waa inuu jirto baahi degdeg ah oo loo qabo badeecadaha ama adeegyada laga hadlayo;
    b. Marka Hay'adda cusub ee Iibinta ay xaqiijiso go'aamisana in la raacay habkii saxda ahaa ee xulashada iyo qandaraas bixinta ganacsadaha ama adeegbixiyaha;
    c. Markii Guddiga Qandaraaska Iibka dib-u-eegis ku sameeyo asbaabta loogu baahan yahay iibinta badeecadaha ama adeegyada ee loo isticmaalo heshiis ka dhexeeya ganacsadaha ama adeegbixiyaha Hay'ad kale oo Iibin; iyo.
    d. Markii nuqul dhammaystiran oo dokumentiga xulashada oo ay ku jiraan warbixinta qiimaynta iyo qaab dhismeedka qandaraaska ee u dhexeeya Hay'adda hore ee Iibinta iyo qeybiyeyaasha ama adeeg bixiyayaalka ay heli karto Hay'adda cusub ee iibinta filalkooda.

## QAYBTA SHANAAD:
## ADEEGYADA LA TALINTA EE QANDARAASKA QANDARAASKA IIBKA
### A. Qodobada Guud
### Qodobka 91:
### Baaxadda adeegyada latalinta

1. Adeegyada la talinta waxaa lagu dabbaqayaa adeegyada leh dabeecad aqooneed iyo la talin, kumana jiraan noocyada adeegyada kale ee u badan dhinacyada maadiga ah oo ay ka dhalaneyso natiijo maaddi ah oo la qiyaasi karo.
2. Wadahadalada waa astaanta ugu muhiimsan Qandaraaska Iibka qandaraaska ee adeegyada la talinta. Habraacyada iyo tilmaamaha loogu talogalay qabashada wada- xaajoodyadaas waa in lagu sheegayaa Xeernidamyada.
3. Hay'adda Iibinta waxay ka xulanaysaa nooca heshiiska ee hawl gaar ah oo la qabanayo noocyada heshiisyada lagu qeexay Xeernidaamiyaha.

### Qodobka 92:
### Midowga Ururada lataliyayaasha

1. La taliyeyaasha waxay kulankoobi karaan muddo dheer ah ama mid ku kooban shaqo gaar ah oo mid kasta uu ku qabanaayo qaab heshiis hawlgal wadajir ama uu ka dhexeeyo heshiis hosaad-la talineed si ay isaga kaabaan howlahooda shaqo dhinacyada khibradaha, si loo xoojiyo soo jeedinta wax qabadkooda adeeg farsamo iyo in la sameeyo gole khubaro lana helo habraaca fulineed ee ugu haboon iyo si xaaladaha qaarkood u bixiyaan sicir hoose.
2. Hay'adaha Iibinta kama codsan karaan la taliyeyaasha iney la kulankoobaan kulankad gaar ah ama kooxo kulankado ah, laakiin waxay ku dhiirrigelin kartaa inay la kulankoobaan kulankaddo qaran ee u qalma.
3. Isla kulankoobid dhexmarta kulankado horey isku xushay waxaa la oggol yahay oo keliya marka horaanba ansixin qoraal ah laga haysto Hay'adda Iibinta.

### Qodobka 93:
### Tababar ama gudbin aqooneed.

Marka hawsha la taliyaha ay qayb ka tahay in la tababaro ama la kobciyo aqoonta shaqaalaha Hay'adaha Iibinta ama la taliyayaasha kale, shuruudaha tixraaca ayaa tilmaamaya ujeeddooyinka, nooca, baaxadda, himilada iyo wax soo saarka barnaamijka tababarka, oo ay ku jiraan faahfaahin ku saabsan tababarayaasha iyo ardayda, xirfadaha ay tahay in la baro, mudadda, la socodka iyo qiimaynta qabanqaabada. Qiimaha barnaamijka tababarka waa in lagu daraa heshiiska lala galaayo la taliyaha iyo miisaaniyadda loogu talogalay hawsha.

## B. Xulashada Ku Salaysan Tayada Iyo Qiimaha

## Qodobka 94:

## Xulashada ku salaysan tayada iyo qiimha

1. Dhammaan xulashada adeegyada talobixinta waa in loo maraa habka xulashada ku salaysan tayada iyo qiimaha, iyadoo la adeegsanayo habraaca tartanka ka dhexeeya kulamada isxushay laguna daro xisaabta marka la xulanaayo kulankadda guuleystay, soo jeedinta tayada adeeg farsamo iyo qiimaha adeegyada. Hababka kale ee xulashada waa in loo adeegsadaa xaaladaha gaarka ah sida ku xusan Qodobada 99 ilaa 106aad.
2. Miisaanka la siinayo ee la xiriira tayada iyo qiimaha waxaa lagu go'aaminayaa oo ay xeran tahay hadba xaalad kasta dabeecada hawlaha la qabanayaa siday tahay.
3. Hay'adda Iibinta waxay adeegsaneysaa "Codsiga Loogu Talogalay Soo Jeedimaha" caadiga ah oo ay ku jiraan warqadda ka qaybgalka dalabka, wargelinta talobixiyaasha, sharuudaha tixraaca iyo heshiiska la soo jeediyay.

## Qodobka 95:

## Xulashada hore ee la taliyayaasha

1. Dhammaan xaaladaha oo dhan ka hor intaan loogu yeerin iney soo gudbiyaan soo jeedimaha, la taliyayaasha waa in ay soo xushaa Hay'adda Iibinta. La taliyayaasha la soo xulay waa in ay ka tirsan yihiin meherad ahaan isku qayb lehna aqoon, waayo-aragnimo, sharciyad iyo ujeedooyin ganacsi oo isku mid ah. Tirada la taliyayaasha la soo xulanaayo ma noqoneyso mid xad la'aan ah laakin waxaa lagu xadiddi karaa ilaa lix (6) ama tiro la mid ah uu oggolaado Maamulka si waafaqsan tilmaamaha.
2. Marka qiimaha la qiyaasay ee qandaraaska iibka uu ka bato qadarka lacageed ee lagu sheegay Xeernidaamiyaha, Hay'adda Iibinta, si ay u abuurto liiska gaaban, waa iney ka dalbataa shirkadaha daneyn cad, iyagoo isku xayeysiiyaan si furan si ay u codsadaan tixgelin ah in lagu daro liiska gaaban.
3. Codsiga ka qaybgalka dalabka waa in la shaaciyaa si waafaqsan Xeernidaamiyaha iyadoo lagu daabacayo ugu yaraan mid kamid ah wargaysyada Qandaraaska Iibka ee loogu akhriska badan yahay, ama mareegta internetka ee loo sameeyey qandaraaska Qandaraaska Iibka. Mararka qaarkood ogaysiisyada waxaa lagu shaacin karaa wargaysyada ganacsi ee ku haboon ama wargaysyada u gaarka ah. Wasiirku wuxuu Xeernidaamiye ku tilmaami karaa in wargaysyada maxalliga ah lagu shaaciyo u yeeritaanka dalabka hordhaca ah, wuxuuna ku bixin karaa tilmaamo dheeri ah faafinta Qandaraaska Iibka ee sharciga ah iyo mareegtada internetka.
4. Hay'adda Iibinta waxay u oggolaaneysaa la taliyayaasha waqti ku filan oo ay ku diyaariyaan codsiyadooda, hase yeeshee kama yaraan karto 14 maalmood oo ka bilaabaneysa maalinta la shaaciyey ilaa maalinta ugu dambeyn ay soo gudbin karaan ka qaybgalka daneynaaya dalabka.

5. Xulashada la taliyayaasha waxaa laga samaynayaa inta ka soo jawaabtay ka qaybgalka dalabka ee daneyneysa isla markaana leh awood ama karti ay ku fuliyaan adeegga laga rabo sida ay ku caddeeyeen codsiga soo gudbintooda.
6. U yeerida loogu talogalay muujinta danaynta waa inay ku caddahay magaca iyo cinwaanka Hay'adda Iibinta, sharraxaad kooban oo ku saabsan adeegyada, taariikhda iyo goobta loo gudbinayo caddeynta danaynta, iyo warbixinta looga baahan yahay codsadaha u qalma iyo wax qabadka codsadaha. Warbixinta looga baahan yahay waa inay noqotaa mid ku filan go'aan ka gaarista kulankadda ku haboon ama aynan noqon mid adag oo niyad jebisa la taliyayaasha inay caddeyaan danaynta.
7. Haddii qiimaha adeeggu uu ka yar yahay inta Xeernidaamiyaha lagu xaddiday xulashada la taliyaasha waxaa lagu salayn karaa xaaladda suuqa ama xog laga helayo ilo kale, iyadoo la tixgelinayo in haddii muhiimadda adeegaasi lagu qiimeeyey uu ka yar yahay inta xeerku xaddiday, hase ahaatee si gaar ah uga culus yahay la isticmaali karo xayeysiin soo gudbin codsi ama dalab.

**Qodobka 96:**
**Codsi soo jeedin Dalab**

1. Kulamada la xusahay ayaa loogu yeerayaa iney soo gudbiyaan soo jeedinta naada ku saleysan "Codsiga Loogu Talogalay Soo Jeedimaha", oo la siinayo tartamayaasha dalabka ee ku soo baxay xulashada oo leh warbixinnada lagama maarmaanka ah ee u suurtogelinaaya iney ka qayb galaan habraaca Qandaraaska Iibka qandaraaska ayna u soo gudbiyaan soo jeedinta dalabka ee ka jawaabayo dhammaan baahiyaha Hay'adda Iibinta Qandaraaska.
2. Codsiga Loogu Talogalay Soo Jeedimaha waa iney noqdaan kuwo caadi ahaan uu soo saaray Maamulka kuna xusan Xeernidaamiyaha, waana iney ku jiraan arrimaha soo socdo:
    a. Magaca iyo cinwaanka Hay'adda Iibinta;
    b. Nooca, muddada iyo goobta adeegyada laga bixinaayo, sharuudaha tixraaca, hawlaha la qabanayo iyo wax soo saarista;
    c. Shuruudaha loo isticmaalaayo qiimaynta iyo isbabardhigga soo jeedimaha, iyo culeyska la siinayo marka la barbardhigo qiimaha;
    d. Shuruudaha heshiiska Qandaraaska Iibka iyo habka dhaqangalka heshiiska;
    e. Qaababka loo soo diyaarinayo laguna soo gudbinayo soo jeedimaha, goobta iyo mudadda kama dambaysta ah ee la soo gudbinaayo soo jeedimaha;
    f. Habraacyada loo adeegsanayo dhammaystirka xulashada;
    g. Wargelinta ku saabsan xakamaynta danaha isdiidan, khayaamada iyo sharciyada musuqmaasaqa, oo ay ku jiraan asababaha keeni kara in kulankad laga xaaraantinimeeyo mustaqbalka ka qaybgalka tartamada qandaraaska Qandaraaska Iibka badeecadaha, adeegyada ama hawlaha ka dhalan kara shaqo loo tartamayo;

   h. Iyo wixii kale ee lagu qeexo Xeernidaamiyaha iyo dokumentiyada caadiga ah ee uu soo saaro Maamulka.

**Qodobka 97:**
**Qiimaynta Tayada**

1. Hay'adda Iibinta waxay qiimeyneysaa soo jeedin kasta ee adeeg farsamo iyadoo adeegsaneysa guddi qiimayn oo ka kooban saddex (3) iyo khabiiro ka badan, oo tixgelin ku samaynayaa shuruud dhawr ah: Waayo-aragnimada muhimka ah ee looga baahan yahay in uu yeesho la taliyaha loo xilsaaraayo hawlaha waa:
   a. Tayada waxqabadka habka la soo jeediyay;
   b. Astaanta aqoonta shaqaalaha la soo jeediyey;
   c. Qorshe hawleedka la soo jeediyey;
   d. Gudbinta aqooneed, haddii looga baahan yahay sharuudo tixraac leh; iyo
   e. Baaxada ka qaybgalka u dhexeeya muwaadiniinta iyo astaanta shaqaalaha muhimka u ah waxqabadka hawsha loo baahan yahay.
2. Shuruud kasta waxaa lagu bixinayaa tiro abaalmarin u dhexeysa 1 ilaa 100. Kaddib abaalmarinta waxey noqoneysaa darajooyin. Muuqaalada tiradaan boqollayda ah ee la isticmaalayaa waxay noqonaysaa mid ku sargo'an hawshaas gaarka ah waxayna u dhexaynaysaa safafka gudahoodu hoos ku tilmaaman yihiin. Abaalmarinadaas la soo jeediyay waa in lagu daahfuraa Codsiga Loogu Talogalay Soo Jeedimaha. Shuruudaha (a), (b) iyo (c) waa qasab balse shuruudaha (d) iyo (e) waa ikhtiyaari ku xiran sharuudaha tixraaca.
3. Hay'adda Iibinta waxey kaloo go'aamineysaa tirada ugu yare ee lagu helaayo abaalmarinta soo jeedinta adeeg farsamo, oo aan ka yaraan Karin boqolkiiba toddobaatan 70% dhibcood. Abaalmarinadaas waa in lagu tilmaamaa caadi ahaan Codsiga Loogu Talogalay Soo Jeedimaha waana iney ku jirtaa heerarka kala duuwan ee abaalmarinta oo lagu qeeyxaa Xeernidaamiyaha.
4. Hay'adda Iibinta waxay caadi ahaan u qaybineysa shuruudahaas qaybo kala duwan ee shuruudo hoosaad oo laga qaadanaayo inta muhiimka ah oo kaliya. Hay'addu waxay iska ilaalineysaa isticmaalka shuruuda hoosaadka ka dhigi kara qiimaynta hawlgal adeeg farsamo halka ay ka tixgelin lahayd waxqabadka qibrad ahaaneed ee la soo jeediyay. Miisaanka la siinayaa shuruudaha waayo-aragnimada waxay noqon karaan mid meeldhexaad ah maadaama waayo aragnimadu tahay shuruuda loo isctimaalo xulashada tirada kooban ee tartamaasha. Muhiimad dheeraad ah waxaa la siin karaa habraaca hadii hawshu tahay mid culus.
5. Waxaa lagu talinayaa in qiimaynta shaqaalaha lagu kobo shaqaalaha muhiimka ah oo keliya (shaqaalaha furaha ah), Maadaama tayada hawlfulintu ku xiran tahay shaqaalaha muhiimka, miisaan badan waa in la siiyo shuruudaha qiimaynta shaqaalaha haddii hawsha la qabanayaa ay kakan tahay. Hay'adda Iibintawuxuu si qoto dheer uga fiiriyaa aqoonta iyo waayo aragnimada shaqaalaha muhiimka ah ee lasoo jeediyey warbixinta hab-nololeedkooda kasoo ay tahay inuu noqdo mid dhab ah, dhamaystiran oo ay isla soo saxiixeen

mas'uul ka tirsan kulanka latalinta iyo qofka lasoo jeediyey. Shaqaalaha la soojeediyey waxaa qof walbka lagu qiimaynayaa saddexda shuruud-hoosyada soo socda sida ay hawsha la qabanayo ugu habboon yihiin:

   a. Aqoonta iyo kartida guud: waxbarashada guud iyo tababarka, dhererka iyo kuhaboonaanta waayo-aragnimo, xilalka u soo qabta, iwm
   b. Kufilnaanshaha hawsha: waxbarshada, tababarada iyo waayo-aragnimada la xiriirta takahsuska gaarka ah oo ku haboon hawsha la qabanayo, iyo
   c. Waayo-aragnimada gobolka: aqoonta luqadda deegaanka, dhaqanka, hab maalmulka, hay'adaha dawladda, iwm;

6. Hay'adda Iibintawuxuu qiimaynayaa soojeedin kasta sida ay uga jawaabeyso una waafaqsan tahay waajibaadka hawlfulinta. Soojeedinta waxaa laga soo qaadayaa mid aan ku habboonayn hawsha waana la diidayaa haddii aanay ka jawaabayn arrimo muhiim ah oo ku jira waajibaadka hawlfulinta ama ay ku guulaysan waydo in ay hesho darajada ugu yar ee ku guuleysiga oo lagu caddeeyey Cosiga Soojeedimaha.
7. Marka ay dhammaanto qiimaynta soojeedinaha adeeg farsamo, Hay'adda Iibintawuxuu diyarinayaa warbixinta qiimaynta adeeg farsamo ee tayada soojeedinaha. Warbixinta waxaa lagu darayaa sharaxaad lagu sababaynayo darajadda qiimaynta ee la siiyey soojeedin kasta iyo dhinacayada ay soojeedintu ku fiican tahay ama ku liidato, wax kasto oo raadraaca ee la xiriira qiimaynta, sida qiimaynta xubin kasta oo ka mid ah Guddiga qaymaynta ay samayso, waana in la kaydiyaa ilaa mashruuca iyo xisaab xirkiisuba ka dhamaadaan.

**Qodobka 98:**
**Qiimaynta kaharashka**

1. Kadib markuu Hay'adda Iibinta dhammeeyo qiimaynta tayada wuxuu wargelinayaa talobixiyaashii tartanka ka qaybgalay dhibcihii u mid walba ka helay qiimaynta adeeg farsamo waxaanu oggaysiinayaa talobixiyaashii aan ku gulaysan qiimaynta adeeg farsamo ama loo arkay in soojeedintoodii hareermarsan tahay Codsigii Soojeedinaha iyo waajibaadka hawlqabadka dibna loogu celinayo soojeedintooda iyadoo aan la furin soo jeedintooda kaharashka marka la saxiixo heshiiska.
2. Hay'adda Iibintawuxuu markaa oggaysiinayaa talobixiyaashii ku guulaystay qiimaynta adeeg farsamo taariikhda, waqtiga iyo meesha lagu furi doono soojeedintooda kaharashka. Taariikhda loo xadido furitaanku waa iney tahay mid siinaysa waqti ku filan la taliyaalka si ay uga soo qayb galaan furitaanka soo jeedinahooda kaharashka.
3. Soojeedinaha kaharashka waxa lagu furayaa meel fagaara ah oo ay joogaan wakiillo ka tirsan kulamada tartanka kaqaybgelay ee goáansaday in ay xafladda furitaanka kaqaybgalaan. Waxaa la diiwaangelinayaa iyadoo cod kor ah loogu dhawaaqayo magaca la taliyaha, dhibcaha qiimaynta soojeedinta adeeg farsamo uu ka helay iyo kaharashka ay soojeedisay. Hay'adda Iibintawaxaa kale oo diyaarinayaa xog-qoraalka xafladda furitaanka iyadoo nuqulka xog-qoraalka lagu

darayo galalka dokumentiyada Qandaraaska Iibka, waana loo bandhigi karaa kulamada tartanka kaqaybgalay hadday codsadaan.

4. Marka ay dhammaanto qiimaynta soojeedimaha adeeg farsamo, Hay'adda Iibintawuxuu si qotodheer u eegayaa soojeedinaha kaharashka. Haddii ay ku jiraan wax qaladaad xisaabeed ah, waa in la saxo. Si la isu babardhigo soojeedimaha kaharashka, lacagta qiimaha waxaa loo beddelayaa hal lacag oo qura ah oo oo uu go'aansaday Hay'adda Iibinta (lacagta dalka ama lacag si buuxda loogu bedeli karo) sida lagu caddeeyey Codsiga Soojeedimaha.
5. Marka Hay'adaha Iibintalacagta qiimaha soojeedimaha u beddelayo lacag qura, wuxuu isticmaalayaa kaharashka sarifka oo lagu iibsado lacagahaas oo lagu daabacay il-xogeed xafiis rasmi ah sida Bangiga Dhexe ama bangi ganacsiga ama wargays caalamiya oo u khaas u ah arrimaha maaliyadda. Codsiga Soojeedimaha waa in lagu caddeeyaa meesha laga soo qaatay heerbeegga sarifka loo isticmaalay beddeelaada lacagaha iyo taariikhda kaharashka sarifka lacagaha, Hase yeeshee taariikhda sarifku waa in aanay ka badan afar (4) usbuuc ka hor maalinta ay xirmayso qabshada soojeedimuhu ayana ka dambayn taariikhda kama danbaytaee ay dhacayso jiritaanka soojeedintu.
6. Marka qiimaynta laga hadlayo, kaharashka waxaa laga saarayaa cashuuradaha dadban ee la garan karo iyo cashuurta dakhliga ee dalka Hay'adda Iibintau saaro khidmadda adeegyada ay ka fuliyaan dalkaas shaqaalaha talobixiyaha aan ruqsada deggenaasho ku lahayn dalka. Kaharashka waxaa ku jiraya dhammaan khidmayaha talobixiyaha iyo wixii kale ee kharashyo ah sida kharashada safarka, turjumaadda, daabacadda warbixinta ama kharashyada xoghaynta.
7. Soojeedinta ugu qiimo hoosaysa ayaa la siin karaa derajo qiimayn oo ah 100, soojeedimaha kalena waxaa la siinayaa darajo u dhiganta sicirkooda. Sidaa kale tirooyin boqoley ah (percentage) ayaa la isticmaali karaa si derajada loo kala siiyo. Habka ama dariiqada la isticmaalayo waxaa lagu qeexayaa xeernidaamiyaha.

**Qodobka 99:**

**Qiimaynta isku darka tayada iyo kaharashka**

1. Wadarta dhibcaha guud waxaa lagu helayaa iyadoo la isku darayo darajada qiimaynta tayada iyo tan kaharashka oo mid walba la qiimeeyey. Darajada loogu talogalay "kaharashka" waxaa lagu helayaa iyadoo lagu xisaabtamayo adayga hawsha iyo muhimada gaarka ah ee ay leedahay tayada. Sida caadiga ah darajada loogu talogalay kaharashka waxay noqoneysaa 20 dhibcood oo ka mid ah wadarta guud ee dhibcaha 100 ee xulashada tayada- iyo kharashka ku salaysan.
2. Qaaciidada isku darka derajooyinka adeeg farsamo waa in lagu tilmaamaa heerka Codsiga soo Jeedinta waana iney waafaqsanaataa qaaciidada tusaalaha ah ee lagu qeexay Xeernidaamiyaha. Kulankadda hesha wadarta dhibcaha ugu sareeya ayaa loogu yeerayaa gorgortanka.

## C. Hababka Kale Ee Xulashada

### Qodobka 100:

### Xulashada ku salaysan tayada

1. Marka laga reebo ansixinta Guddiga Qandaraaska Iibka, Hay'adda Iibinta waxay adeegsan kartaa xulasho ku salaysan tayo haddii hawsha la qabanaayo:
   a. Ay tahay mid adag ama shaqo takhasus sare leh oo ay adag tahay in si hagaagsan loo qeexo sharuudaha la tixraacaayo iyo talooyinka looga baahan yahay la taliyayaasha, iyo waxyaalaha la taliyayaasha laga filaayo iney muujiyaan soo jeedintooda hal abuurnimo.
   b. Ay saamayn sare oo xoogan yeelaneyso ujeedaduna tahay in leeyihiin khuburada ugu wanaagsan; ama
   c. Loo samayn karo siyaabo kala duwan oo wax ku ool ah, soo jeedimaha noocaas ahna aan u dhigmin.
2. Xulashada ku salaysan tayada, Hay'adda Iibinta waxay isugu yeeraysaa kulamada la soo xushay iney ku soo gudbiyaan soo jeedimaha adeeg farsamo iyo maaliyadeed oo ku kala jira laba baqshadood oo kala duwan. Hay'adda Iibinta waxay qiimaynaysaa soo jeedimaha adeeg farsamo oo keliya; kaddib waxaa la xulanayaa kulankadda ugu dhibco sareysa kaalinta soo jeedimaha adeeg farsamo lana weydiisanayaa iney soo gudbiyaan soo jeedinta maaliyadeed oo faahfaahsan si loola gorgortamo laguna abaalmariyo heshiiska qandaraaska. Soo jeedimaha maaliyadeed ee kulamada kale waa in dib loogu celiyaa kaddib marka gorgortanada la xushay uu guul ah lagu soo gabagabeeyo.
3. Dhammaan dhinacyada kale ee hanaanka xulashada waa inuu la mid noqdaa sida kuwa xulashada tayada- iyo kharashka ku salaysan, marka laga reebo oo kaliya kulankadda qiimaha ku guuleysata waa in la faafiyo.

### Qodobka 101:

### Xulashada qiimaha ugu yar

1. Habkan waa midka kaliya ee ku haboon xulashada hawlgelinta la taliyayaasha ee dabeecadda caadiga ah ama joogtada ah, oo ay ku jiraan hanti dhawrayaasha iyo hawlaha naqshadaha aan adkeyn ee injineernimad, halkaas oo hab aad u hormarsan iyo waxqabad ka jiro.
2. Habraacyada xulashada loo adeegsado habkaan waa iney la mid noqdaan kuwa loo isticmaalay xulashada ku salaysan tayada iyo kharashka, marka laga reebo kulankadda bixinaysa qiimaha ugu yar la xusho.

### Qodobka 102:

### Xulashada ku salaysan misaaniyad goán

1. Marka laga reebo ansixinta Guddiga Qandaraaska Iibka, Hay'adda Iibinta waxay adeegsan kartaa habka xulashada ku salaysan misaaniyad go'an marka hawsha la qabanayaa tahay mid fudud oo qiimaha ku baxayo si hufan loo qeexi karo miisaaniyaduna go'an tahay.

2. Habraacyada xulashada ku saleysan habkaan waa iney la mid noqotaa kuwa ku salaysan tayada iyo kharashka, Marka laga reebo in kulamada ka qaybgalaaya tartanka dalabka looga baahan yahay iney ku sargooyaan soo jeedimahooda maaliyadeed miisaaniyad go'an. Miisaaniyada go'an waa in lagu dhex sheegaa Dalabka Soo Jeedimaha.
3. Soo jeedimaha ka badan qiimaha la sheegay waa in la diidaa

**Qodobka 103:**

**Xulashada kulamada ku salaysan aqoonta**

1. Habkaan waxaa loo adeegsan karaa hawgelinta kulamada aan dhaafin qadarka qiimaha lagu xadiday Xeernidaamiyaha, iyo xulashada la taliyayaasha soo jeedimalooga baahan yahay soo diyaarinta laguna qiimeynaayo tartanka soo jeedimahaa aaney sababeysneyn (kharshka iyo waqtiga ku baxayo)
2. Si waafaqsan habkaan, Hay'adda Iibinta waxay diyaarinaysaa sharuudaha tixraaca, codsiga caddeynta ee daneynta iyo xogta ku saabsan waayo-aragnimo iyo aqoonta la xiriira howsha la taliyayaasha, la sameeyo liiska xulashada tirada kooban, kadibna la xusho kulankadda leh shahaadooyinka iyo tixraacyada ugu habboon.
3. Shaqsiga ama kulankada la xushay waa in la weydiiyaa iney soo gudbiso isku jirka soo jeedinta adeeg farsamo iyo maliyadeed kaddibna loogu yeero in lagala gorgortamo heshiiska.

**Qodobka 104:**

**Xulashada shaqsi la taliye**

1. La taliyayaasha shaqsiga ah waxaa loo shaqaaleyn karaa hawlaha aan u baahnayn koox shaqaale ah oo isla shaqeeya ama aan uga baahnayn dibadda taakuleyn xirfadeed oo dheeraad ah. La taliyayaasha shaqsiga ah waa in lagu xushaa iyadoo lagu salaynayo shahaadooyinkiisa aqooneed ee uu u haysto hawsha la qabanayo. Shaqsiyaadka loo tixgeliyay in la is barbar dhigi karo shahaadooyinkooda aqooneed waa iney buuxiyaan shuruudaha aqooneed ee ugu yar oo looga baahan yahay hawshaas, kadibna kuwa ay u xulatay hawlaha Hay'adda Iibinta waa iney noqdaan kuwa ugu haboon awood buuxdana u leh fulinta hawshaas. Qiimaynta kartidooda waxaa lagu salaynayaa heerkooda aqooneed, waaya-aragnimadooda iyo hadba siday ugu haboon tahay aqoonta ay u leeyihiin xaaladaha deegaanka sida luqada deegaankaas, Dhaqanka, hab-maamulkooda iyo hay'adaha dawlada.
2. Hay'adda Iibinta waa iney tiro liis kooban xulataa oo ugu yaraan dhan sadex (3) qof isna barbar dhigtaa shahaadooyinkooda aqooneed iyo kartida aqooneed ee la xiriirta hawsha la qabanayo. Shaqsiga leh shahaadooyinka aqooneed ee ugu sareeya ayaana loo xulanayaa hawsha.
3. Shaqsiga la xushay waa in la weydiiyaa inuu soo gudbiyo soo jeedinta adeeg farsamo iyo maaliyadeed kadibna waxaa loogu yeerayaa in lagala gorgortamo heshiiska.

**Qodobka 105:**
**Xulasho leh hal-il kaliye**

1. Marka laga reebo ansixinta Guddiga iibku, Hay'adda Iibinta waxay adeegsan kartaa xulasho leh hal il kaliya ee la taliyayaasha xaaladdo gaar ah oo keliya haddii habkan uu muujiyo faa'iido cad marka loo eego habka tartanka ee:
    a. Hawlaha u taagan dabeecad ahaan socodsiinta shaqo socota ama horey ay u fulisay kulankadda;
    b. Xaaladaha degdega ah, sida ka jawaabida masiibooyinka iyo adeegyada la talinta loo baahan yahay inta lagu jiro mudadda xigta masiibooyinka ee gurmadka;
    c. Hawlgelinada aad u yar sida lagu qeexay Xeernidaamiyaha; ama
    d. Marka hal kulankad keliya ay hawshaas qaban karto ama ay u leedahay waayo-aragnimo u gaar ah hawsha.
2. In kasta oo ka mid ah xaaladaha ku qeexan Qodobka 104 (1), Hay'adda iibinta ayaa weydiin karta la taliyaha la xushay, oo ku salaysan shuruudaha tixraaca ay dejisay Hay'adda iibinta ah, si ay u diyaariyaan soo jeedinta adeeg farsamo iyo maaliyadeed, oo kadibna ka gorgortamaaya.

**Qodobka 106:**
**Wakiilada Qandaraaska Iibka**

1. Hay'adda Iibinta waxay adeegsan karaan adeegyada wakiilada Qandaraaska Iibka si ay ugu qaadaan tallabo kasta ama dhamaan hawlaha Qandaraaska Iibka, oo haddii kale ay sidaas u fulin lahayd Hay'adda Iibinta iyadoo shuruudu tahay in hawlahaa loo fuliyo si waafaqsan Sharciga. Marka laga reebo ansixinta Guddiga Iibinta, wakiilada Qandaraaska Iibka waa in loo adeegsadaa meesha Hay'adda Iibinta ayna awoodin fulinta qandaraaska Qandaraaska Iibka.
2. Halka looga baahan yahay adeegyada wakiilada Qandaraaska Iibka, Hay'adda Iibinta waa iney u martaa adeegyadaas si waafaqsan qaybta IV (C) ee sharcigan.
3. Hay'adda Iibinta waa iney ku amartaa wakiil kastoo iib in loo magacaabay inuu u dhawro si wax ku ool ah qodobada sharcigan iyo Xeernidaamiyaha.
4. Wakiilka Qandaraaska Iibka waa inuu si adag ugu dhaqmaa isagoo ku hadlaya magaca Hay'adda iibinta raacaana dhammaan habraacyada Qandaraaska Iibka qandaraaska ee ku qeexan Sharciga iyo Xeernidaamiyaha, oo ay ku jirto isticmaalka dokumentiyada caadiga ah ee ka qaybgalka tartanka dalabka iyo dokumentiyada kale ee uu soo saaro Maamulka.

**Qodobka 107:**
**Wakiilada Kormeerka**

Marka ay Xukuumada u magacaawdo wakiiladda iney ku sameeyaan kormeer hordhac ah shixnadaha iyo shahaadada alaabaha la soo dejiyo, Hay'adda Iibinta waxay adeegsan kartaa wakiiladaas iyadoo aan u marin habraac xulasho kale.

## QAYBTA LIXAAD:
## HABRAACYADA LOOGU TALOGALAY QANDARAASKA IIBKA QANDARAASKA EE BIXINTA HESHIISYADA
### A. Qeexidda Iyo Ujeeddooyinka Bixinta Heshiisyada
### Qodobka 108:
### Qeexid

1. Bixinta macneheedu wuxuu yahay in Dowladda ama hay'adaheeda ay ku wareejiso muddo cayiman hanti-dadweyne hay'ad gaar loo leeyahay si ay uga hawlgasho, u maamusho, u manaafacsato ama u horumariso hantida iyadoo ka bixinaysa khidmo shardiguna yahay in Dowladda danteeda guud ee hantida ku waayeen hantidaasna ugu soo noqoneyso hay'adaha Dowladda muddo cayiman. Si waafaqsan sharcigaan, mudadda bixinta qandaraaska waxay ka kooban tahay dhammaan xilliyadeeda kala duwan oo ay ku jiraan kuna koobneyn arrimaha soo socda:

    a. Dhisid/Dayactir/Casriyeen - HawlgalWareejin (DhCKW)" waa marka ay kulankad gaar ah maalgeliso horumarinta kaabayaasha/xarunta/tasiilaadka kuna hawlgasho muddo cayiman oo dhammaadka muddadaas ay ku wareejinayso Dowladda/hay'ad dawladeed iyadoo aan wax qaan ah ama kharash ah ku sheeganayn hay'adda dawladeed.

    b. "'Dhisid/Dayactir/Casriyeen- Wareejin-Hawlgal (DhCWK)" waa marka ay Dowladda/ Hay'ad dawladeed heshiish kula gasho kulankad gaar loo leeyahay iney dhisto ama dhameystirto dayactirka dhismo milkiyadiisa kaddib lagu wareejinayo Dowladda/Hay'ad dawladeed oo kaddib dhammaadka dayactirka agabkaas dib looga kireynaayo hay'ad gaar loo leeyahay muddo go'an oo la cusboneysiin karo.

    c. "'Dhisid/Dayactir/Casriyeen-Lahaansho-Hawgal-Wareejin (DhCLKW)" waa marka hay'adda gaarka loo leeyahay ay hesho ruqsad qandaraas muddo go'an haddii ay u gaar tahay ama aanay u ahayn si ay u horumariyaan, hawlgalaan, ilaaliyaan, maareeyaan una ururiyaan muddo go'an lacagta adeegyada caamka ah dhammaadka hawgalkana gacan ku haynta xaruntaas ay dib ugu noqoneyso hay'adda dawladda/Dowladda.

    d. "'Dhisid/Dayactir/Casriyeen - Lahaansho-Hawgal (DhCLK)": waa marka Dowladda/hay'ad dawladeed ku wareejiso lahaanshaha iyo mas'uuliyadda hanti dawladeed ama heshiis kula gasho kulankad gaar loo leeyahay in ay dhisto, yeelato kuna shaqayso agab cusub oo ku

shaqaynaaya mudadda iyo shuruudaha ay jideeysay Dowladda/hay'adda dawladeed.

e. "Maamulka Heshiis/Adeeg Heshiis": waa marka kulankad gaar loo leeyahay loo hawlgeliyo iney wakiil ka noqoto Dowladda/hay'ad dawladeed si ay ugu qabato magaca Dowladda/hay'ad dawladeed hawl caam ah iyadoo la siinayo khidmo qaabkeey doonto ha noqotee, leh ama aan lahayn gunno ku xeran waxqabadka kana madaxbanaan haddii hay'adda caamka ay ka haysaneyso mas'uuliyada hay'adda gaarka loo leeyahay ama in kale.

f. "Joogteyn adeeg bixin" waa marka Dowladda/hay'ad dawladeed heshiis ugu xilsaarato hay'ad gaar loo leeyahay iney si joogto ah u bixiso adeegyo caam ah oo haddii kale ay bixin lahayd hay'ad dowladeed.

g. "'Qayb ahaan laga dhigo hanti gaar loo leeyahay": Ku meeleynta qayb ahaaneed ee danta Dawladda oo lagu wareejiyo hay'ad gaar loo leeyahay iyadoon loo marin sayladaha lagula kala gato saamiyada.

h. "Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraaska" waxay u aqoonsan karaan heshiisyo kale ee ganacsi in lagu sameeyo bixin qandaraasyo.

## Qodobka 109:
## Ujeedooyinka Bixinta Qandaraasyada

1. Ujeedooyinka bixinta qandaraas kasta waa si kor loogu qaado mid ama ka badan ee arrimaha soo socdo:
   a. In bixinta qandaraasyada ay kordhiso dakhliga Dawlada;
   b. Laga faa'iidaysto ilaha maaliyadda, aadanaha iyo farsamada ee ganacsiga gaarka ah si loo horumariyo dhaqaalaha;
   c. In lagu tartamo bixinta qandaraaska adeegyada, keenida, badeecadaha ama kaabayaasha lana yareeyo in cid gaar ah kaliya la wareegto qandaraaska
   d. La dardar geliyo horumarinta kaabayaasha, aqoonta aadanaha iyo bixinta adeegyada;
   e. Kobaca ganacsiga gaarka ah ee Soomaaliya;
   f. Iskaashiga ka dhexeeya dawladda iyo qeybiyeyaasha gaarka

## A. BAAXADA, CODSIGA IYO HAYADAHA GANACSIGA GAARKA AH EE AAN U QALMIN

### Qodobka 110:

### Baaxada iyo Codsiga

1. Dhinaca waa inuu fuliyaa dhammaan hawlaha la xiriira bixinta qandaraasyada waana in uu si gaar ah u fuliyaa arrimaha soo socdo:
    a. Hirgelinta hawlaha la xiriira bixinta qandaraasyada oo ay ku jiraan, kuna xadidneyn:
        i. Aqoonsiga iyo shahaadada loogu talogalay bixinta qandaraasyada
        ii. Qorshaynta habraaca loogu talogalay bixinta heshiisyada qandaraaska
        iii. Diyaarinta dukumentiga tartanka bixinta qandaraaska
        iv. Dalbashada iyo qiimaynta tartannada dalabka, gorgortanka iyo saxiixa heshiisyada bixinta qandaraaska
        v. Hirgelinta, kormeerka iyo la socodka heshiisyada bixinta qandaraaska
        vi. Bixinta nooc kasta ee damaanada qandaraasyada ee dhammaan qaybaha oo ay ku jiraan kuna xadidneyn:
        vii. Qodida iyo ka faa'iideysiga macdanta
        viii. Kalluumeysiga
        ix. looxa
        x. Isgaarsiimaha
        xi. Korontada, Biyaha iyo wixii la hal maalo
        xii. Daaqa
        xiii. Bixinta qandaraasyada beeraha oo ay ku jiraan miraha abuurka
        xiv. Sahmida iyo soo saaristiisa shidaalka
        xv. Horumarinta kaabayaasha dadweynaha oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn garoomada diyaaradaha, bosteejeeyinka, wadooyinka/ buundooyinka, suuqyada, iwm
        xvi. Bixinta shatiyada gaarka ah oo ay ku jiraan shatiyada wax soo dejinta, wax dhoofinta, adeegyada ama waxqabadka hawlaha lagu qabanayo magaca Dawladda.
        xvii. Qaybaha kale oo ay go'aamiyaan Gollaha Wasiirada
    b. Dhammaan Bixinta Qandaraaska Hay'adaha ama Hay'addaha Dowladda iyo laamaha si sharci ah loogu xilsaartay iney fuliyaan bixinta qandaraasyada.
    c. Dhammaan hay'adaha ganacsiga gaarka ah ee ka qaybgalaaya bixinta qandaraasyada.

**Qodobka 111:**
**Hay'adaha Bixinta Qandaraaska**

1. Hay'ad kasta ee la siiyay shahaado bixin qandaraasyo sida ku cad Sharcigan waxay noqoneysaa Hay'ad Bixisa Qandaraas sida Sharcigan waafaqsan waxayna masuul ka noqoneysaa habraaca bixinta qandaraaska.
2. Madaxa Hay'adda Bixinta Qandaraaska ayaa lagula xisaabtamayaa mas'uulna ka noqonaya tallaabo kasta ee gudashada masuuliyadihiisa/aheeda ee hoos timaada Qaybtan iyo inaan lagula xisaabtami karin xilalka uu idmaday.

**Qodobka 112:**
**Doorka Waaxda Qandaraaska Iibka ee Socodsiinta Heshiisyada Bixinta Qandaraaska**

1. Waaxda Qandaraaska Iibka oo lagu dhisay Sharcigan waxay mas'uul ka ahaaneysaa fulinta waxqabadka xilalka bixinta qandaraasyada soo socdo ee hoos yimaada Guddiga Qandaraaska Iibka
2. Marka laga hadlayo bixinta qandaraaska, Waaxda Qandaraaska Iibka waxay gudaneysaa xilalka soo socdo:
    a. Diyaarinta Qorshaha Bixinta Qandaraaska Iibka;
    b. Qorshaynta iyo maamulka bixinta qandaraaska oo aaney ku jirin qiimaynta iyo abaalmarinta bixinta heshiiska qandaraaska;
    c. Diyaarinta dukumentiyada bixinta dalabka qandaraaska iyagoo la kaashanayo khubaro adeeg farsamo;
    d. Qabashada iyo xafidaada dalabyada la qabtay;
    e. Qabashada habraacyada furitaanka dalabka si waafaqsan Sharcigan;
    f. Fulinta adeegyada xoogheyneed ee Hay'adda Bixinta Qandaraaska;
    g. Xilalka kale ee madaxa hay'adda uu u dhiibo si waafaqsan Sharcigan.

**Qodobka 113:**
**Hawlgelinta la Taliyayaasha**

1. Hay'adda Bixinta Qandaraaska iyo/ama Guddi Wasaarado isku dhafa ah waxay awoodaan marka ay ku jirto danta qaranka, iney hawlgeliyaan hay'adaha ganacsiga gaarka loo leeyahay ama khubaro si ay ugala taliyaan habraacyo kasta oo ka mid bixinta qandaraaska oo aan ahayn ansixinta khubaradaasna waxay kala shaqaynayaan Waaxda Qandaraaska Iibka ujeedooyinka gaar ah ee bixinta qandaraaska.

2. Xulashada hay'adaha ganacsiga gaarka loo leeyahay ama qof ee ujeedooyinka ku xusan qodobkan waa in loo sameeyaa si waafaqsan habraaca xulashada la taliyayaasha lagu dejiyay Sharcigan.

**Qodobka 114:**
**Diyaarinta Qorshaha Bixinta Qandaraaska Iibka**

1. Qorshaha Bixinta Qandaraaska Iibka waa iney ku jiraan faahfaahinada soo socdo:

   **a.** Qoondeynta mas'uuliyadaha iyo waqtiyada kama danbaysta ah ee dhammaan hawlaha ka horeeya fulinta oo lagama maarmaanka u ah habraaca bixinta qandaraaska iibka oo ay ka mid yihiin shaqasiinta la taliyayaasha si ay ula taliyaan marxalad kasta oo ka mid ah habraaca bixinta qandaraaska;

   **b.** Qabanqaabada si loo hubiyo isku dubbarididda hay'adaha kale ee loo baahdo;

   **c.** Habka tilmaamaya ka shaqaaleynta bixinta qandaraaska iibka iney tahay iyo inkale Tartan Ka Qaybgal Qandaraas Qaran ama Tartan Ka Qaybgal Qandaraas Caalami ah iyo sababaha ay isku mid u yihiin;

   **d.** Tariikhaha loo qoondeeyay Wargelinta Guud ee Fursadaha Maalgelinta, muujinta daneynta, ku casumida ka qaybgalka qandaraaska, qiimeynta gorgortanka iyo dhammaan habraacyada hagaayo heshiiska bixinta qandaraaska.

2. Guddiga ayaa haddii ay lagama marmaan tahay in la hubiyo waafaqsanaanta Sharcigaan' codsanaaya wax ka beddelida Qorshaha Bixinta Qandaraaska inta lagu gudo jiro muddada lagu sheegaayo Xeernidaamiyaha ee lagu gaaraayo Qorshaha Hirgelinta Bixinta Qandaraaska.

**Qodobka 115:**
**Qaabdhismeedka Bixinta Qandaraaska**

Sharcigaan waxa lagu dhisayaa Guddi Wasaarado isku dhafa ah ee Bixinta Qandaraaska iyo Guddiga Qiimeynta Bixinta Qandaraaska Dalabka.

**Qodobka 116:**
**Xubnaha Guddi Wasaarado isku dhafka ah ee Bixinta Qandaraaska**

1. Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraaska waxay ka koobn yihiin todobo qof (7) oo lagu dhisay si waafaqsan faqrada qodobka ee Sharcigan.
2. Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraaska wuxuu mas'uul ka noqonayaa dib-u-eegista bixinta qandaraaska iyo ansixinta warbixinta Guddiga Qiimaynta Dalabka Bixinta Qandaraaska iyo diyaarinta qorshaha sanadlaha ah ee bixinta qandaraaska ee loo gudbinaayo ayna ansixiyaan Golaha Wasiirada;
3. Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraaska wuxuu ka kooban yahay Sarkaal(ada) Xisaabaha ee wasaaradaha iyo hay'adaha guud ee soo socdo:
   a. Guddoomiyaha Guddiga waxaa noqonaaya Sarkaalka Xisaabaha ee Wasaaradda Maaliyada mas'uulka ka ah;

   b. Wasaaradda mas'uulka ka ah Cadaalada;
   c. Wasaaradda mas'uulka ka ah qorsheynta iyo Wasaaradda u xilsaaran Arrimaha Federaalka;
   d. Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka; iyo
   e. Labo Sarkaal Xisaabeed kale oo ay magacaabayaan Golaha Wasiiradda oo u taagan danta guud ee qaybaha kala duwan ee dhaqaalaha oo ku xiran bixinta qandaraaska aan ahayn Wasiirka mas'uulka ka ah qeybta;

4. Madaxa Waaxda Farsamada ee Bixinta Qandaraaska oo lagu dhisay Qodobka 117 ee Sharcigan ayaa u adeegaya sida xoghayn aan xubin ka ahayn Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ah ee Bixinta Qandaraaska ee ujeedooyinka hawshooda ee Hay'adda Bixinta Qandaraaska.

5. Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ah ee Bixinta Qandaraaska waxay u yeeran karaan khubaro kulamadiisa ee bixin qandaraas gaar ah oo dib u eegis lagu samaynayo si ay talo uga dhibtaan arrimahaa.

## Qodobka 117:
## Hawlaha Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraaska:

1. Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ah ee Bixinta Qandaraaska ayaa fulineysa hawlaha soo socdo:
   a. Dib u eegis ku sameeyaan ansixiyaana dukumentiyada dalabka bixinta qandaraaska ka hor ku casumida dalabka qandaraaska;
   b. Dib u eegis ku sameeyaan qiimaynta warbixinta si ay u hubiyaan in habraacyada si sugan loo waafajiyay shuruuda, Sharciga iyo xeernidaamiyayaasha khuseeya, ansixiyaan ama diidaan, qiimaynta warbixinnada si awood loogu siiyo Hay'adda Bixinta Qandaraaska iney sii wadaan tallaabada xigta ee habraaca;
   c. Ansixiyaan ugu yaraan bartilmaameedyada gorgortanka lala gelayo adeeg bixiyaha qandaraaska sida ay soo jeedisay Hay'adda Bixinta Qandaraaska;
   d. Haddii gorgortanka lagu guuldareysto, iyo haddii la aqbali karo, oo ay oggolaato Hay'adda Bixinta Qandaraaska in gorgortan lala galo tartamaha ku xiga darajada ugu sareeysa;
   e. Dhisaan Guddiga Qiimaynta Bixinta Dalabka Qandaraaska iyo Kooxda Gorgortannada;
   f. Tallooyin ka siiyaan meeshii iyo markii loo baahdo Sarkaalka Xisaabaha ee Hay'adda Bixinta Qandaraaska iyo Guddiga;
2. Ma jirto cid aan ahayn Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraaska oo lagu dhisay Sharcigan oo fulineysa hawlaha Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraaska iyo waxqabadka ay geysteen oo ka mid hawlaha Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraaska oo ay fuliyaan dad kale ama hay'ad kale waa la baab'inayaa.

**Qodobka 118:**
**Kulamada Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ah ee Bixinta Qandaraaska**

1. Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraaska waxaa isugu yeeraaya Sarkaalka Xisaabaha ee Hay'adda Bixinta Qandaraaska marka codsi qoraal ah uu u gudbiyo Guddoomiyaha Guddiga(GIWBQ).
2. Marka codsiga Sarkaalka Xisaabaha ee Hay'adda Bixinta Qandaraaska, uu helo Guddoomiyaha GIWBQ ayaa u gudbinayaa codsiga Waaxda Farsamo ee Bixinta Qandaraaska si ay dib u eegis ugu sameeyaan una codsadaan tallo. Kaddib markuu xaqiijiyo in codsiga uu helay Guddoomiyaha GIWBQ ayuu ugu yeeraya kulanka dhammaan xubnaha in ay go'aan ka gaaraan arrintaas;
3. Ma jiro xubin ka mid ah Guddiga oo doorkeeda xubinimo u wakiilan kara xubin kale. Marka ay gebi ahaan lagama maarmaan ku noqoto mid kasta oo ka mid ah dadka lagu sheegay Sharcigan, wuxuu soo diri karaa Sarkaal Sare oo ka wakil ah hay'adda uu ka tirsan yahay si uu wakil uga noqda xubinta kulanka Guddiga. Xubinta ayaa mas'uul ka ah go'aan kasta uu gaaro wakiilka.

**Qodobka 119:**
**Daah-Furida danta**

1. Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraaska ama qof loo magcaabay/u yeertaan guddiga oo leh dan kasta, si toos ah ama dadban, dhacdo kasta uu u kuurgalaayo ama uu ku hadlaayo magaca Guddiga waa inuu daaha ka qaadaa dabeecadda dantiisa ee Guddiga, daahfuridaana waa in lagu dhigaa qoraal warbixineedka kulanka guddiga.

2. Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraaska oo dan kasta ku leh kama qeybgalaayo codeyn kasta iyo go'aan gaarista Guddiga ee la xiriirta arrintaas, xubintii ku xadgudubta qaybtan waxay noqoneysaa dembiile anshax-xumo wuxuna mutaysanaa in laga saaro Guddiga iyo/ama in lagu qaado ciqaab kasta oo lagu dabbaqi karo si waafaqsan Sharcigan.

**Qodobka 120:**
**Qabsoomida kulanka**

Guddiga Isku Dhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraaska uma qabsan karo si quman hawlahiisa haddii ay maqan yihiin Sarkaalka(iisha) Xisaabaha ee u xilsaaran Maaliyada, Qorshaynta, Cadaaladda, Sarkaalka Xisaabaha ee Hay'adda Bixinta Qandaraaska ama maqnaashaha mid kasta oo iyaga ka mid ah ee ku xigeenka loo idmaday ee aan taaghayn.

**Qodobka 121:**
**Dhismaha Waaxda Farsamo ee Bixinta Qandaraaska**

1. Waxaa laga dhex dhisayaa Wasaaradda, waaxda lagu magacaabaayo Waaxda Farsamo ee Bixinta Qandaraaska.
2. Waaxda waxay ka kooban tahay:
    a. Agaasimaha Waaxda; iyo
    b. Shaqaalahaas sida Sarkaalka Xisaabaha ee Wasaaradda oo la tashanaya Guddiga IWBQ hawlqabadka uu arko iney lagama maarmaan u yihiin hawlaha Waaxda waafaqsan Sharcigani.
3. Agaasimaha lagu xusay Qaybta afraad ee Sharcigan waxaa loola jeedaa Agaasimaha Waaxda Farsamo ee Bixinta Qandaraaska wuxuuna xiriir la leeyahay Agaasimaha Maamulka Guud ee Qandaraaska Iibka oo lagu dhisay Qaybta III ee Sharcigan.
4. Agaasimaha iyo shaqaalaha Waaxda waa in hab tartan ah lagu shaqaaleeyo oo ku saabsan muddadaas iyo shuruudahaas uu go'aaminaayo Sarkaalka Xisaabaha oo la tashanaaya Guddiga IWBQ si waafaqsan Sharciga iyo Xeernidaamiyaha.
5. Qof wuxuu u qalmayaa in loo magacaabo Agaasimaha Waaxda markuu qofkaas:
    a. Ka haysto Shahaado Jaamacad oo la aqoonsan yahay mid kasta oo ka mid ah hawlaha soo socda:
        i. Maaliyada;
        i. Dhaqaalaha;
        ii. Injirneenimo; ama
        iii. Sharci; iyo
    b. Uu leeyahay ugu yaraan 10 sano waayo aragnimo xirfadeed oo la xiriirta hawshaas.
6. Mudadda xilka loo magacaabaayo Agaasimaha Waaxda waxay noqonaysaa xilli dhan 5 sano waxaana la dooran karaa oo dib-loo magacaabi karaa hal xilli oo dheeraad ah.
7. Madaxa xafiiska iyo xubnaha Waaxda waxay wayneyaan haddii xubinta:
    a. Lagu xukumo musalaf;
    b. Uu galo dembi ciqaabeed laguna xukumo muddo in xabsi la geliyo;
    c. Uu isku casilo qoraal uu ku hagaajinaayo Sarkaalka Xisaabaha ee Wasaaradda nuqulna u diraayo Guddiga GIWBQ;
    d. Uu ka qaado xafiiska Sarkaalka Xisaabaha ee Wasaaradda oo la tashanayo Guddiga GIWBQ Kadib markii:
        i. Uu awoodi waayo fulinta hawlaha xafiiska sabab caafimaad darro ee maskaxeed am jir ahaaneed;
        ii. Uu ku guuldareystoo inuu ka muujiyo dantiisa dhacdo kasta oo loo kuurgalay ama ay u kuurgaleyso Waaxda ama GIWBQ
    e. Uu ku guuldareysto gudashada waajibaadkiisa si waafaqsan mudadda iyo shuruudaha loo magacaabay
    f. Geeriyoodo.

8. Ka hor intaan laga saarin xubinta ka tirsan Waaxda Farsamo ee Bixinta Qandaraaska, Sarkaalka Xisaabaha ee Wasaaradda oo la tashanayo Guddiga GIWBQ ayaa ka codsanaaya Waaxda iney:
    a. Baaraan xaaladaha soo if bixiyay soo jeedinta ka saarista; iyo
    b. Talo ka bixiyaan haddii laga saaraayo xubinta xafiiska iyo inkale.

**Qodobka 122:**
**Hawlaha Waaxda Farsamo ee Bixinta Qandaraaska**

1. Hawlaha guud ee Waaxda waa:
    a. Hagida siyaasadeed iyo kordhinta kartida aqooneed – iney qeexaan siyaasadaha bixinta qandaraaska ee waafaqsan tilmaamaha Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraaska(GIWBQ) iyo habraacyada kordhinta kartida aqooneed ee laamaha harbaraacyadaas;
    b. Dalacsiin Bixinta Qandaraaska ee xukuumada dhexdeeda iyo bannankeedaba – Dhiirigelinta laamaha qaybta si ay ugu aqoonsadaan fursadaha adeegsiga bixinta qandaraaska dalacsiin;
    c. Kaalmo farsameed siiyaan hirgelinta mashaariicda bixinta qandaraaska oo ay ku jiraan siinta taagerid gacan-qabasho ee kooxaha u xilsaaran hirgelinta ee wasaaradaha ama wakaaladaha ama si toos ah masuul uga ah wejiyada hirgelinta bixinta qandaraaska qaarkood; iyo
    d. Dib u eegidda iyo kormeerka maamulidda mashaariicda bixinta qandaraaska hufnaaneed iyo bixineed iyo oggolaanayaan mashaariicda bixinta qandaraaska ama ka talinayaan habraaca ansixinta.
2. Hawlaha gaarka ah ee Waaxda waa iney:
    a. U adeegaan sidii xoghayn iyo gacan adeeg farsameed ee Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraaska;
    b. Siiyaan adeeg farsamo, maaliyad iyo khubarro sharciyeed Guddiga IWBQ iyo Qandaraas Iib kasta iyo Waaxda Bixinta Qandaraaska ee lagu dhisay Sharcigaan;
    c. U adeegaan sida xarunta ilaha ee arrimaha la xiriira bixinta qandaraaska;
    d. Qabtaan waxbarashada arrimaha madaniga ah si kor loogu qaado wacyi gelinta iyo fahmka habraacyada bixinta qandaraaska ee ka mid ah daneeyayaasha.
    e. Sameeyaan talobixino ku saabsan oggolaashaha ama diidmada mashaariicda ka hor intaan loo gudbin Guddiga IWBQ si ay u oggoladaan;
    f. Ka caawiyaan Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraaska qaabeynta tilmaamaha qoraaleed iyo dukumentiyada caadiga ah ee uu Sharcigaan faraayo;
    g. U xilsaaraan yihiin kana caawiyaan Hay'adaha Bixinta Qandaraaska doorarkooda kala heerarka duuwan ee wareega mashruuca;

h. Hubiyaan, iyagoo kaashanaaya Maamulka Qandaraaska Iibka Guud, mashruuca la xiriira habraac qandaraaseyn waafaqsan qodobada qandaraaska iibka ee Sharcigaan;
i. Dhaqangeliyaan hawlaha kale sida hadba uu ugu xilsaaray Guddiga IWBQ Sharcigaan.

3. Waaxda ayaa diyaarineysa xisaabaha maaliyadeed ee bankiga iyo tirinta lacagaha loo qoondeeyay iyo wax kasta oo taageero dhaqaale ah ay heshay iyada;

**Qodobka 123:**

**Maalgelinta Waaxda Farsamo ee Bixinta Qandaraaska**

1. Hawlaha Guddiga IWBQ iyo Waaxda waxaa lagu maalgelinayaa:
    a. Lacag ka imaaneysa misaaniyadda Wasaaradda guddaheeda; iyo
    b. Maalgelin kasta ee uu ansixiyo Baarlamaanku

**Qodobka 124:**

**Dadka Ganacsiga Gaarka U Leh/Hay'adaha laga joojiyay**

1. Hay'adaha gaarka loo leeyahay ee soo socdo, ha noqdeen kuwa dalka ama caalamiga ah, ee laga joojiyay iney ka qayb galaan habraac kasta ee bixin qandaraas:
    a. Shirkadda Wadaag ah
    b. Shirkad Qof Kaliya Leeyahay
    c. Dadka Dabiiciga ah
    d. Hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn ama Ururada aan Dowliga Ahayn
    e. Ururo Qof Kaliya Ah

**C: Qorsheynta Habraaca Bixinta Qandaraaska Iibka**

**Qodobka 125:**

**Iskujirka Qorshaha Horumarinta Dhaqaalaha**

1. Wasaaradda masuulka ka ah Maaliyadda ayaa horumarinaaya qorshaha bixinta qandaraaska sanadlaha ah ee qaybaha kala duwan ee dhaqaalaha oo lagu dhiirigelinaayo ansixinta bixinta qandaraaska ee Golaha Wasiiradda.
2. Doorka loo xilsaaray Wasiirka mas'uulka ka ah Maaliyadda ee lagu sheegay qaybtaan ayaa qabanaaya oo kaliya isagoo la tashanaaya dhammaan Wasiiradda iyo Saraakiisha Xisaabiyaha oo daneyn kara Qorshaha Bixinta Qandaraaska sanadlaha ah.
3. Sarkaalka Xisaabiyaha ee Hay'adda Bixinta Qandaraaska ayaa intaan la bilaabin hawl kasta oo loola jeedo fulinta bixinta qandaraaska, ka codsanaaya Wasiirka masuulka ka ah Maaliyadda inuu soo saaro Shahaadada Bixinta Qandaraaska ee bixinta qandaraaskaas gaarka ah.

## Qodobka 126:
## Ma jirto Bixin Qandaraas oo Shahaado la'aan

1. Habraac kasta oo lagu fulinaayo bixin qandaraas waxay ku bilaabaneysa Shahaadada Bixinta Qandaraaska mana jirto bixin qandaraas oo la fulinaayo ilaa mashruuca la soo jeediyay loo soo saaro Shahaadada Bixinta Qandaraaska.
2. Wasaaradda masuulka ka ah Maaliyadda ayaa yeelanaaya oo keliya mas'uuliyadda soo saarista Shahaadada Bixinta Qandaraaska.

## Qodobka 127:
## Shuruudaha lagu soo saaraayo Shahaadada Bixinta Qandaraaska

1. Ka hor intaan la soo saarin Shahaadada Bixinta Qandaraaska ee Sharcigan, Wasaaradda masuulka ka ah Maaliyadda ayaa hubineysa in:
   a. Bixinta Qandaraaska iney soo galeyso qaybta dhaqaalaha laga hirgelin karo heshiis qandaraas bixin si loo horumariyo ujeedooyinka dhaqaale ee qaranka;
   b. Qandaraas bixinta la soo jeediyay aan horey loogu qondeyn maalgelin guud oo isla ujeedadaa ah ee lagu sheegay mashruuca la soo jeediyay.
   c. In caqabadaha ama ciriiriga ee loo baahan yahay in wax laga qabto ka hor xilliga habraaca bixinta qandaraaska iibka oo ay si cad u aqoonsatay Hay'adda Bixinta Qandaraaska ama Wasiirka masuulka ka ah Maaliyadda una la socodsiiyo Hay'adda.
2. Hawlaha Wasaaradda masuulka ka ah Maaliyadda ee qaybtaan ayaa fulineysa ka hor la tashiga madaxa Hay'adaha Bixinta Qandaraaska daneeyaan bixin qandaraas gaar ah.

## Qodobka 128:
## Usoo bandhigida bulshada hababka meeleynta hantida

Hay'adda Bixinta Qandaraaska ayaa si waafaqsan helitaanka Shahaadada Bixinta Qandaraaska qaadeysa talaabo ah iney tashi la yeelato dhinacyada daneynaaya oo ka mid ah habraaca fulinta bixinta qandaraaska.

## Qodobka 129:
## Warbixinada loo gudbinayo kulanarka dhinacyada daneynayo

1. Kulanka dhinacyada daneynayo, Hay'adda Bixinta Qandaraaska waa iney ugu yaraan soo gudbiyaan warbixinnada soo socdo:
   a. Muhiimada istaratiijiyadeed ee mashruuca
   b. Xaddka maalgashiga ama ilaha gaarka ah ama dadeed IWM. si loo buuxiyo baahida bulshada;
   c. Suuragalnimada shaqeynta mashruuca ee dhanka farsamo iyo maaliyadeed;
   d. Tallaabooyinka la sameeyey ama la sameeyn doono si wax looga qabto caqabadaha deegaanka uu ku keeno iyo isbedelka xaaladaha ee bulshada
   e. Sabab kasta oo kale oo lagu xushay bixinta qandaraaska.

## Qodobka 130:
## Diiwaannada Habraaca Ka Qaybgalka Bixinta Qandaraaska

Iyadoo la raacaayo daah-furnaanta iyo isla xisaabtanka ee hay'ad kasta oo ku lug leh habraac kasta ee bixin qandaraas ayaa lagu keydinayaa diwaan qoran dhammaan habraacyada si waafaqsan Sharcigan.

## Qodobka 131:
## Baarista Diiwaannada

Diiwaannada waxaa loo diyaarinaa si ay u baaraan GIWBQ iyo Hanti Dhawraha Guud ama qof kasta ay u idmatay GIWBQ ama maamulka Xukumadeed ay khuseyso.

## Qodobka 132:
## Diiwaannada gaarka ah ee La Qoraayo

1. Iyadoon lagu xadideyn guud ahaan qeybtaan ama qeybhoosaad kasta ee ka mid ah qeybtan, waa in dhammaan arimaha soo socda mar walba noqdaan qoraal:
    a. Ogeeysiinta Guud ee Fursadda Maalgashiga
    b. Codsiga lagu caddeynaayo daneynta
    c. Timaamaha Tartamayaasha
    d. Codsiga soo jeedinnada
    e. Warbixinta Qiimaynta oo ay la socdaan lifaaqyadooda
    f. Dhammaan dokumentiyada la xiriira abaalmarinta heshiisyada
    g. Xogta is-fahamka Bixinta Qandaraaska

## Qodobka 133:
## Dokumeentiga ka qybgalka Tartanka

Habraacyada qandaraas bixinnada ee dokumeentiga ka qeybgalka tartanka waxaa lagu saleynayaa tartan furan dokumeentiga ka qeybgalka haddaan si gaar ah sharcigan loogu sheegin.

## Qodobka 134:
## Tartanka Dokumeentiga Ka Qeybgalka ee Qaranka

1. Hay'ad waxay isticmaaleysaa ka qaybgalka dokumeentiga ee tartanka qaranka marka ay jiraan:
    a. Laga heli karo Soomaaliya farsamo ku haboon mashruuca qandaraas bixinta
    b. Hantidii qalabkii iyo xirfaddii loo baahnaa in hawlaha lagu qabto ganacsiga gudaha laga heli karo
    c. Bixinta Qandaraaska wuxuu dhacayaa xeyndaabka dhaqaalaha kaasoo sharciga ku xaddiday muwaadiniinta soomalida.
2. Marka tartanka ka qeybgalka dokumeentiga ee Qaranka la qabanayo, tartamayaasha dalka ayaa bartilmaameed ah inay ka qayb galaan tartanka, balse aan la xayirin tartamayaasha shisheeye iney ka qeyb qaataan.

## Qodobka 135:
## Tartanka dokumeentiga ka qaybgalka ee Caalamiga

1. Tartan caalami ah ayaa la qabanayaa haddii mid ama inka badan oo shuruudaha soo socda ay timaaddo:
    a. In mashruuca uu baahan yahay khabiir caalami ah
    b. Adeeg-bixiyeyaasha dalka aysan awoodin in ay keenaan adeegyadda/ badeecadaha/ howlaha loo baahan yahay.
    c. In mashruuca uu baahan yahay adeeg farsamo oo aan Soomaliya laga heli karin
    d. In mashruuca u baahan yahay miisaaniyad culus oo aan caadi ahayn laga heli Karin dalka Soomaaliya.
2. Tartamayaasha waxaa loo ogol yahay muddo aan lix (6) todobaad ka yareyn inay ku soo diyaariyaan iyo gudbiyaan dalabyada.

## Qodobka 136:
## Shirkadaha dalka ee ka qayb galaya tartanka ka qaybgalka dokumeentiga ee caalamiga

Xaaladaha kasta ee tartanka caalamiga ee ka qaybgalka dokumeentiga, ganacsiga dalka ee buuxiya shuruuddii loo baahnaa way ka qeybgeli karaan, iyadoon la xaddideyn, way ka qayb geli karaan keli ahaan ama la midoobi karaan hay'adaha shisheeye.

## Qodobka 137:
## Shuruudaha Codsiga ee lagu Xulanayo Bixinta Qandaraasyada

1. Marka bixinta qandaraas la abaalmariyay lagu saleynayo tartanka caalamiga ee ka qayb-galka dokumeentiga, Hay'adda qandaraas bixinta ayaa ogolaaneysa qiyaas ahaan mudnaanta ganacsiyada dalka sida sharcigani qeexayo iyo Maamulka ayaa dejinaya shuruudda lagu jaangoynayo doorashada lagu dabaqi karo bixinta mashruucyada.
2. Hase yeeshee guud ahaan qaybtaan, Maamulka oo la tashanayo IMCC ayaa soo saareysaa xeernidaamiyayaasha ku saabsan shuruudda iyo in la hubiyo in shuruudda qoondada la dooranayo lagu dabaqi karo bixinta qandaraasyada sida ugu badan ee suura galka ah iney la jaan qaadaan qoddobada ku qeexan qodobka 33aad ee sharcigan.

## Qodobka 138: Tartanka dokumeentiga ka qayb-galka la xaddiday

Ansixinta IMCC, ee xaddiday tartanka ka qayb-galka qandaraaska loo isticmaalayaa marka heyadda bixinta qandaraaska hore u xulatay tartamayaasha si waafaqsan qoddobada qaybtan ee sharcigan.

## Qodobka 139:
## Isha Keliya

1. Ansixinta IMCC Ganacsi qandaraas qaataha wuxuu noqon karaa isha keliya haddii hal ama ka badan shuruudahan soo socda ay jiraan:
    a. Bixinta qandaraaska u baahan yahay xirfadii gaarka aheyd ee uu leeyahay hal Tartame khaas oo keliya.
    b. Bixinta qandaraaska ku lug leh halabuurka ruqsadda shatiga la xiriira uu hal tartame oo khaas keliya uu haysto
    c. Bixinta qandaraaska u baahan tahay cilmi baaris khaas ah ama tijaabo loogu tala galay cid keliya fulin karto
    d. Bixinta qandaraaska marka loo fiiriyo istiraatijiyada danta Guud ama danta Guud ay ku jirto ka badan hal tartame.

## Qodobka. 140:
## Ogolaanshaha hore ee IMCC

Waqti kasta wixii aan ka ahayn tartanka dokumeentiga ka qayb'galka qandaraaska qaranka iyo kan caalamiga ah, habkii la isticmaalay waa inuu helaa ogolaanshaha IMCC oo degdeg ah.

## D. Diyaarinta Dokumentiga Ganacsi
## Qodobka 141:
## Habqabadka Aas-aaska ah/ ee Daraasadka Suura galka ah

1. Hay'adda Bixinta Qandaraaska waa inay qaaddaa aas-aaska ama daraasaadka suurtagal ah si loo go'aamiyo suura galka mashruuca la soo jeediyey iyo daraasaadka suurta galka ah sidii loo fulin lahaa iyadoo lala tashanayo Wasiirka u xilsaaran miisaaniyadda, iyo khubaro kale, haka yimaadeen ganacsiga gaarka ah ama ganacsiga guud sida ku haboon.
2. Xulashadda lagu sameynayo Hay'adaha ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo shaqsiyaadka caadiga ah sida lataliyaal, si ay u caawiyaan Hay'adda Bixinta Qandaraaska waa in la waafajiyaa qaybtan ee sharcigan.

## Qodobka 142:
## Bixinta Qandaraaska ee Dokumentiyada Ka Qayb-galka Tartanka

1. Ka hor intaan la soo saarin Codsiga ah Muujinta danta ama casumaada dalabka Naadada, Waaxda Qandaraaska Iibka waa in ay diyaarisaa xirmo dhameystiran ee dokumantiyada ka qayb-galka bixinta qandaraaska loona gudbiyaa sidoo kale Sarkaalka Xisaabaha ee Hay'adda Bixinta Qandaraaska si ay dib ugu eegto una u ansixiyo Guddiga Bixinta Qandaraaska Iskudhafka Wasaarado.
2. Gudiga Isku dhafka Wasaarado ee Bixinta Qandaraasyada waxay dhisayaan koox farsamo oo ku haboon si ay dib ugu eegaan dokumentiyada ka qayb-galka tartanka ee bixinta ganacsi waxeyna ku saleynayaan tala bixintooda ay ansiyaan ama haddi kale dokumentiyada kaqayb-galka tartanka ee bixinta qandaraaska.

**Qodobka 143:**

**Baaxadda Dokumentiyada ka qayb-galka ee bixinta qandaraaska**

1. Bixinta qandaraaska dalabka ka qayb-galka dukumentiyada ugu yaraan waa in ay ku jiraan arimaha soo socda:
   a. Xogta mashruuca isfahamka, laakiin aan ku xaddidneyn arimaha soo socda:
      i. Asalka mashruuca
      i. Ujeedada bixinta qandaraaska lasoo jeediyay
      ii. Horumarka la rajeynayo ama wax soo saarka
      iii. Kormeerista Waxa laga filayo inay kasoo baxaan iyo meesha looga cabir qaadanayo si loo gaaro ujeedooyinka mashruuca.
   b. Casumaadda dalabka sida ugu habboon
   c. Waxa laga rabo tartamayaasha oo ay kamid yihiin arimaha soo socda
      i. Tilmaamo haddii ama aysan jirin in la qabto kulan dalab hordhac ah iyo haddii ay sidaa tahay xilliga iyo waqtiga iyo meesha lagu qabanayo
      ii. Shuruudaha la raacayo marka dalabka la hubinayo ama la qiimeynayo.
      iii. Shuruudaha gudbinta ee bixinta qandaraasyada
      iv. Qaabka heshiiska
      v. Qaabka dalabka
      vi. Qaabka Dammaanadda dalabka iyo damaanadda waxqabadka
      vii. Xiliga iyo goobta gudbinta iyo furitaanka dalabyada
      viii. Qaabka soo jeedinta miisaaniyadda oo si gaar ah loo gudbinayo
      ix. Dhamaan qaababka lagama maarmaanka ah ee diyaarinta dalabyada
      x. Shuruudaha guud ahaaneed iyo kuwa gaarka ee heshiiska.

**Qodobka 144:**

**Wargelinta xogta guud ee Fursadda maal gashiga, sheegidda daneynta ama Arjiga dalabyada.**

Marka la ansixiyo dalabka bixinta qandaraaska ee dokumentiyada ka qayb-galka, Waaxda Qandaraaska Iibka ayaa daabacaysaa shuruudaha loo baahan yahay, wargelinta guud ee fursadda maalgashiga, shegidda daneynta, codsiga dalabyada ama dhamaantood si hab isku xig-xiga ee loo baahan yahay si waafaqsan qoddobada sharcigan.

**Qodobka 145:**

**Habka Wax loo baahinayo**

IMCC ayaa soo saaraya tilmaamaha ku saabsan daabacaadda ee la raacayo Wargelinta Guud ee Fursadda Maalgashiga, sheegidda daneynta Danta ama codsiga dalabka.

## E. Kulanka Dalabka hordhaca ah, Dalab soo gudbinta iyo Furitaanka

### Qodobka 146:

### Kulanka dalabka hordhaca ah

Markii lagama maarmaan ay tahay Kulanka dalabka hordhaca ahi waxaa loo abaabulayaa si loo siiyo fursad wax loogu kala caddeeyo tartamayaasha si ay u helaan warbixin dheeraad ah ee ku saabsan shuruudaha bixinta qandaraasyada iyo caddeynta waxyaabaha ku xusan dalabka bixinta qandaraaska ee dokumeentiga.

### Qodobka 147:

### Waxyaabaha gaarka u ah Kulanka dalabka Hordhaca ah

Taariikhda, saacadda, iyo meesha lagu qabanayo kulanka dalabka hordhaca ah waa in lagu sheegaa dalabka Dokumentiga ka qayb-galka ee bixinta qandaraaska muddo aan ka yareyn afar iyo toban (14) beri oo ka bilaabaneysa maalintii la shaaciyey casumaadda dalabka lagaga qayb gelayo.

### Qodobka 148:

### Soo gudbinta iyo Furitaanka dalabyada

1. Dhamaan Jawaabaha lagu sheegayo daneynta iyo/ama casumaadda dalabka markii uu soo gudbiyo tartame waqti hore ama isla maalintii la qorsheeyay furitaanka dalabka wuxuu noqonayaa waqti isku mid ah iyo hal meel ayadoo dhammaan tartamayaashii xaadir yihiin, ama wakiiladoodii joogaan goobta.
2. Dalab gudbinta iyo furitaanka waa in la dhowraa xeerarka soo gudbinta dalabka iyo furitaanka ku xusan isla sharciga.
3. Haddii ay jiraan laba baqshadood oo ka qayb-gal tartan ah, bixinta qandaraaska dokumeentiga waa in lagu caddeeyaa, habraaca furitaanka farsamada iyo dhaqaale ee baqshadaha.

## F. Qiimayn

### Qodobka 149:

### Habraaca Qiimeynta

1. Qiimeynta dalabyada bixinta qandaraaska waxaa sameynaya Waaxda adeegga farsamadda bixinta qandaraaska ee ay sameeyeen Gudiga Isku dhafka Wasaarado ee bixinta qandaraaska Ganacsiga.
2. Waaxda Adeegga Farsamadda ee Bixinta Qandaraaska waxay ahaanayaan waax ka tirsan wasaaradda.

### Qodobka 150:

### Xaqiijinta Shuruudaha Qiimaynta

Majirto shuruuddo la isticmaalayo oo wax lagu qiimaynayo, oo aan lagu sheegin Dalabka Dokumentiga Bixinta Qandaraaska oo ay heli karaan Tartamayaasha iyo Hay'adda Bixinta Qandaraaska ma bedeli karto shuruudaha qiimeynta kadib marka dalabyada la qabto.

## Qodobka 151:
## Waxyaabaha ugu yar ee shuruuddaha qiimeynta

1. Qiimayntu waa in:
    a. Marka laga hadlayo sheegidda daneynta la tixgeliyaa shuruudaha gaarka ee looga baahan yahay mashruuca iyo dabeecada khibradeed ee loo baahan yahay hirgelinta saxda ah ee mashruuca kaas oo lagu tilmaamay arjiga lagu sheegayo daneynta
    b. Marka laga hadlayo soo jeedimaha codsiga la tixgeliyaa shuruudaha lagu timaamay soo jeedimaha codsiga taasoo xaalad kasta loo qaabeeyay in lagu gaaro ujeedooyinka bixinta qandaraaska iyo waana iney ku jiraan ugu yaraan waxyaabaha soo socda:
        i. farsamo ahaan hirgelinta soo jeedimaha.
        ii. Waxku oolnimada hababka iyo ilaha loo baahan yahay.
        iii. Qorshaha lagu horumarinayo inta lagu jiro mudada bixinta qandaraaska
        iv. Raadka soo jeedinta ay ku yeelanayso ujeeddooyinka Straatiijiyadda iyo qorshaha horumarineed ee qaranka ee ay jaangoysay wasaaradda masuulka ka ah horumarinta arrimaha dhaqalaha.
        v. Wareejinta teknoolajiyadda.
        vi. Saamaynta la filayo ee uu ku yeelanayo bixinta qandaraaska ee dakhliga Guud, shaqaaleynta soomaalida, deegaanka, warshadaha iyo qaybaha kale ee dhaqaalaha la xiriira .
        vii. Dabaqidda heerka mudnaanta xulashada marka dabaqidda lagu dhaqmayo uu waafaqsan yahay Sharcigan.

## Qodobka 152:
## Shuruudaha reebban marka qiimaynta la samaynayo

1. Shuruudaha lagu xulayo tartamayaasha waa ineysan marxalad kasta, ku jirin waxyaabaha soo socda:
    a. Shuruudo aan si macquul ahaan loo fasiri Karin, sida xaalad loola jeeddo in lagu gaaro mabaadi’da uu tilmaamayo sharcigan.
    b. Shuruudo aan lahayn dabeecad ganacsi oo aan lagu gaari Karin ujeeddooyika heshiiska bixinta qandaraaska.
    c. Shuruudo aan caddeyn oo noqon kara shaqsi.
    d. Shruuddo ama xaalad keeni kara in la siiyo bixinta qandaraaska dad gaar ah ama koox gaar ah.
    e. Shuruud ama xaalad loogu talagalay in ay fududayso xulista tartame la yaqaan taasoo ka horimanaysa geedi socodka tartanka.
    f. Xaalad abuuri karta dhiirigalin musuqmaasuq dhamaan ama qayb ka mid ah habka bixinta qandaraaska ee qandaraaska iibka.

## G. Qiimaynta ka Dib.

### Qodobka 153:
### Qiimaynta Warbixinta

1. Waaxda adeegga farsamo ee qandaraas bixinta ayaa soo gabagabeyneyso qiimeynta lixdan (60) cisho gudahood laga bilaabo maalinta la furo dalabyada iyo waxey u gudbinayaan warbixinta qiimaynta Guddiga iskudhafka wasiiradda ganacsi.
2. Warbixinta qiimayntu waa inay ka koobnaanta ugu yaraan:
    a. Warbixin ku saabsan ka jawaabidda dalabyada oo ku salaysan shuruudaha ku xusan soo jeedinta
    b. Natiijooyinka qiimaynta adeegga farsamo.
    c. Natiijooyinka qiimaynta dhaqaaleeed.
    d. Talooyinka oo ay ka mid yihiin qoraal kaasoo tartamaha ugu dhibca sareeya ee lagu casumay si loola gorgortamo, haddi gorgortankaasi guul daraysto waxa hadana lala gorgortamaya ka ku xiga dhibcaha. Sidaas ayaa gorgortanka looWadayaa ayadoo kala saraynta dhibcaha la tixgalinayo ilaalagu guulaysto hal tartame in la xulo.
3. Dadaalka la sameeyay tartamayaasha la soojeediyay ee lagu caddeeyay sharcigan.
4. Madaxa hayadda ma laha awood uu ku beddeli karo warbixinta Waaxda Adeegga farsamo ee Qandaraas Bixinta ama inuu codsado in isbedelo lagu sameeyo talooyinka.

### Qodobka 154:
### Taxadir Sameynta

1. Ka hor inta aan loo gudbin warbixinta qimaynta Guddiga iskudhafka wasiiradda Qandaraas Bixinta. Hay'adda Bixinta Qandaraaska ayaa fiirinaya si txadir leh dhammaan jawaabaha tartamayaasha**.**
2. Baaxadda sameynta taxadir waxa go'aaminaya hayadda haseyeeshe waa iney ku jiraan caddeymaha soo socota:
    a. Awoodda qebta gaarka ee hey'adda u leedahay iney gasho heshiiska bixinta qandaraaska.
    b. Xaqiijinta shahaadadda diiwaan gelinta iyo dokumentiyada kale ee sharci ee uu haysto. Haddi uu yahay qebta gaarka ee lammaanaha asal ahaan shirkad shisheeye saxnimada dokumentigiisa waa in lagu caddeeyaa dalka uu ka soo jeedo.
    c. Xaqiijinta shakhsiyaadka sheeganaya iney wakiil ka yihiin tartamaha oo ujeedadeedu tahay, hey'adda guud waxey ka dalban doonta guddiga xallinta tarmaha guuleystay ogolaanshahiisa dadka ku gorgortamaya magaciisa ama u gelayaheshiiska
    d. Dhameystirka qeybta gaarka ee Hay'adda haddii ay gebi ahaan tahay shisheeye ama la kaashaneysa dhigiisa kale maxalli ah shuruudaha sharciyada laguu nidaamiyo hawlgalka ganacsiga ee soomaaliya.
    e. Marka tartamaha uu yahay dallad, taasoo caddeyneysa:
        **i.** Xubin ka mid ah xubnahaaan aanu sharcigan ka reebin.

ii. Xubnaha dalladda waxey mas'uul uga wada yihiin si wada jir ah waajibaadka qeybta gaarka sida ku xusan heshiiska bixinta qandaraaska ama haddii xubin ka mid ah dalladda ay ogolaato iney qaado Qatar qof kale iyo nuqul ka mid ah dukumeentiga la dhigo Hay'adda.

f. Xaqiijinta cabashooyinka adeegga farsamo iyo awoodda dhaqaale ee tartamaha

3. Hay'adda bixinta qandaraaska haddii ay la haboonaato waxay kiraysan kartaa khubarro madaxbanaan oo fulisa baarista si taxadir leh.
4. Si kastaba ha ahaate baarista waa in lasoo gabagabeeyo inta aanu Heshiiska bixinta qandaraaska dhaqan galin.

## Qodobka 155:
## Qaabka Heshiiska

Qaabka heshiiska ee mid kasta oo Heshiis bixin qandaraas waxaa horumarinaya Hay'adda bixinta qandaraaska ayadoo la kaashaneysa xeer ilaaliyaha guud eyna ogolaadaan Guddiga bixinta qandaraaska iskudhafka Wasaaradeed ee bixinta qandaraasyada ka hor gorgortanka.

## Qodobka 156:
## Wada Xaajood

1. Afar iyo toban (14) cisho gudahood kaddib ansixinta warbixinta qiimeynta ee Guddiga bixinta qandaraasyada iskudhafka wasaaradeed, Guddiga bixinta qandaraasyada iskudhafka wasaaradeed ayaa dhisayaa koox wada xaajood oo ka kooban farsamo yaqaanno iyo khubaro ka caawisa hadba baahida wada xaajoodka lala galayo tartamaha ugu sarreeya.

2. Kooxda wada xaajoodku wuxuu ka kooban yahay tiro aan ka yareyn saddex (3) kana badneyn toddoba (7) qof oo ay magacaabayaan Guddiga bixinta qandaraasyada iskudhafka wasaaradeed.

3. Kooxda wada xaajoodku wuxuu ka kooban yahay farsamo yaqaanno, iyo madaxa hay'adda bixinta qandaraaska xubin kama noqon karo kooxda wada xaajoodka.

4. Kooxada wada xajoodka ayaa masuul ka ah in wada xajoodka la soo gunaanado ka hor ita anay dhammaan muddada asal ahaan u xaddidan ama loo kordhiyey damaanadda dalabka ee tartamuhu gudbiyey.

5. Wada xaajoodka waxaa lala galayaa tartamaha ugu darajada sarreeya sida lagu tilmaamay warbixinta qiimeynta ee uu ansixiyey Guddiga bixinta qandaraaska iskudhafka Wasaaradeed. Haddii ay dhacdo in wada xaajoodku burburo, kooxda wada xaajoodku waxay ku wargelinaysaa Guddiga iskudhafka bixinta qandaraaska wasaaradeed. Guddiga iskudhafka bixinta qandaraaska

wasaaradeed waxay ansixinayaan in haddii ay la haboonaato, tartamaha daraja ahaan k u soo xiga lala bilaabo wada xaajood, ilaa laga soo gabogabaynayo, iyo dhamaan shuruudaha quseeyana la buuxiyay.

**Qodobka 157:**
**Arrimaha tixgelinta mudan xilliga wada xaajoodka.**

1. Kooxda wada xaajoodku waa inay tixgelin siiyaan arrimahan iyadoo loo eegayo xaaladaha shuruucda jira, wada xaajoodka lala galayo maalgashadaha la filayo.

   a. Waajibaadka dhinacyada uu dhex marayo bixinta qandaraaska.

   b. Heerka tayada waxqabadka, oo ay ka midyihiin adeegga, waqtiyada, amaanka, waafaqsanaanta iyo shuruudaha, /dayactirka, hawlgalka.

   c. U diyaarsanaanta xaaladaha lama filaanka ah iyo khataraha cayiman.

   d. Canshuuraha waajibka ah

   e. Qaabka la socodka hawlqabadka, tayada adeegga, iyo ujeedooyinka kale ee mashruuca.

   f. Habka xallinta khilaafka

   g. Fullinta damaanadda.

   h. La socodka iyo warbixinnada

   i. Shuruudaha warbixnta

   j. Shuruudaha mas'uuliyadda ka saaran bulshada

   k. Isticmaalka shaqaalaha waddanka

   l. Kobcinta awoodda shaqo.

   m. Qeybaha dhaqaale oo ay ka mid yihiin qoddobada lacag bixinta, , xilliga iyo nooca lacagta la bixinayo

   n. Mas'uuliyaddaha sida caymiska, dammaanadda, hawlaha shaqo iyo daryeelka halka ay khuseyso.

   o. Heshiis Dibu eegis ka iman karta wax iska isbedelka dhabt ee shuruudaha heshiiska.

   p. Arrimaha deggaanka.

   q. Qoddobada dhamaadka heshiiska.

   r. Guuldarrda Mashruuca iyo wixii lagu dhayi karo, haddey jiraan.

   s. Jebinta heshiiska/ dhacdooyinka oofin la''aanta.

t. Shuruudda dibu gelidda, wareejin dibu gadasho, dibu eegis, iyo arrimaha la xiriira.

u. Canshuuraha, qarashyada, qiimaha, qarashyada oo lagu dallici karo dhinac saddexaad, halkii ay khuseyso iyo masuuliyadda goynta qaddar la mid ah.

v. Ka baxsi la'aanta, xog dhowrista iyo xayndaabka xeerarkan

w. Lahaanshaha ama milkiyadda hantida fikriga, adeegyada, ama tiknoolojiyadda cusub ee horumartay,

x. Qoddobada badbaadin kara dhamaadka heshiiska, sida dhexdhexaadinta, xog dhowrista iwm.

y. Habka wax ka beddelka heshiiska

2. Guddiga bixinta qandaraasyada iskudhafka wasaaradeed way fidin karaan arrimahan wada xaajoodka ee qandaraas bixin kasta oo gaar ah, hase ahaatee arrimaha waa in lagu muujiyaa dokumeentiyada dalabka bixinta qandaraaska.

## Qododka 158:
## Xog dhowrista Heshiiska

Kooxda wada xaajoodka ma bilaabi karto wada hadalka ilaa ay qabtaan nuqulka heshiiska xog dhowrista ee u dhexeeya tartamaha loogu yeedhey wada xaajoodka iyo hay'adda, kaas oo ka reebaya dinac kastaba inuu shaaciyo xogta wadaxaajoodka si waafaqsan heerarka caalamiga ah ee dhowrista xogta xaaladdahan oo kale.

## Qodobka 159:
## Maareynta Heshiiska

1. Kooxda wada xaajoodka waxay soo gabo gabaynayaan maareynta heshiiha la raacayo inta lagu jiro wadaxaajoodka, oo ka mid yihiin ugu yaraan;

   a. Qaabka la socodka waxqabadka shuruudaha iyo xaaladaha heshiiska.

   b. Warbixinnada la gudbiyo xilliyo muddeysan iyo nidaamka loo raacayo xaqiijinta warbixinnada

   c. Daryeelka hantida iyo shuruudaha horumarinteeda haddii ay jirto

   d. Diyaargarowga maareynta cabashooyinka dadweynaha

## Qodobka 160:
## Xeerarka khuseeya bixinta qandaraaska macdanta iyo batroolka

1. Iyadoo aan la xaddideyn arjiga qaybtan Guddiga bixinta qandaraaska iskudhafka Wasaaradeed kama dib dhici karaan boqol iyo siddeetan (180) maalmood marka sharcigan dhaqan gal noqdo, la hubiyo in xeerkan la soo saaray si loo keeno

habraaca soo saarista baarista, sahaminta, iyo shatiyada ka faa'iideysiga bixinta qandaraaska batroolka iyo macdanta iyadoo loo eegayo sharci kasta ee jira oo waafaqsan qaybta sharcigan.

2. Waxqabadaka hawlaheeda sida uu tilmaamayo qaybhoosaadka cutubkani, hay'adda awoodda u leh waxay hubinaysaa in soo saaridda shatiga qodista, sahaminta, iyo ka faaii'deysiga waxaa loo samaynayaa hab tartan furan oo ka reebban in keli ahaan (monopoly) lagu siiyo daraf gaar ah.

## QAYBA TODOBAAD:
## MEELEYNTA ALAABTA IYO QALABKA
### Qodobka 161:
### Awoodda Meeleynta

1. Sarkaalka Xisaabaha wuxuu ugu yaraan sannadkiiba mar magacaabaayaa Guddi Sahan oo ka kooban ugu yaraan shan (5) qof oo ah shaqaalaha sare ee hay'adda iyo shaqsiyaad khibrad u leh baaritaanka, isu geynta iyo qiimaynta alaabta ama qalabka aan la dayactiri karin, hawlgabay ama dheeriga ah oo ka soo diyaariya warbixin kana soo talo bixiya habka ugu wanaagsan ee loo tuuri lahaa sida ku xusan qodobka 111.
2. Kadib markuu ansixiyo Sarkaalka Xisaabaha talada Guddiga Sahanka, alaabta waxaa lagu khaarijinayaa habraacyada ku xusan Qodobka 111(Qodobka 156).
3. Guddiga Sahanku wuxuu goynayaa qiimaha ugu yar ee lagu khaarajinayo shay kasta oo alaabta ka mid ah iyagoo adeegsanaya qiimaynno madax bannaan suuqa laga sameeyey ama habkii kale ee macquul ah oo lagu goyn karo qiimaha la sheegay.
4. Marka ay alaabi adeeg gabto sababo ka duwan inay duugowdo oo ay gaarto xaalad aan dayactir waxba lagaga qaban karin, sida shil ku dhaca ama iyadoo khaayista (ama waqtigeedi isticmaalka dhaafta), waxaa la raacaya hab uu soo saaro Guddiga oo lagula tacaalayo khasaaraha alaabta inta aanan la soo xeraynin ama aan la tuurin.
5. Hay'ad dawladeed alaab ama qalab ay khaarajinayso kuma wareejin karto shaqaalaha hay'adda, xubin ka mid ah Guddida Sahanka marka laga reebo xaaladda lagu xusay Qodobka 110 (6).
6. Hay'adda Iibku wuxuu warbixinta alaabta la khaarajiyey u gudbinayaa Xisaabiyaha Guud si looga saaro Diwaanka Hantida Dowladda. Markii ay tahay Hay'adaha kale ee dawliga, Sarkaalka Xisaabaha ayaa xaqiijinaya in laga saaray alaabta Diwaanka Hantida ee Hay'adda Dawladda.

### Qodobka 162:
### Habraacayada Meeleynta

1. Meeleynta alaabta iyo qalabka aan la dayactiri karin, hawlgabay ama dheeriga ah waxaa loo maamulayaa hababka soo socda:
    a. Ku wareejinta laamaha dawladda ama hay'ado kale oo dawladdu leedahay iyadoo ay jirto ama aysan jirin dhaqaale lagu jaangooyo marka hantidu

ama alaabtu ay faa'iido ama isticmaal u leedahay hey'ad kale oo Iibin, hantida la tuurayo waxaa loo wareejinayaa si rasmi ah.

b. In lagu gado tartan furan iyadoo laga gadayo tartamaha ugu qiimo sarreeya iyadoo lagu salaynayo arrimaha soo socda:
    i. Dejinta qiimo aan laga hoosmari karin;
    ii. Xayeysiis guud oo lagu daabacayo wargeysyada loo qoondeeyay in lagu qoro faafinta Qandaraaska Iibka, iyadoo loogu yeedhayo tartamayaasha inay hubiyaan alaabta iyo iney soo gudbiyaan dalab xiran.
    iii. Xayeysiiska waxaa lagu xusayaa waqtiga iyo meesha dalabka la keenayo;
    iv. Muddo aan ka yareyn 14 cisho ayaa loo oggolyahay ka hor waqtiga la qabtay furitaanka dalabyada;
    v. Dalabyada waxaa lagu furayaa meel fagaara ah qiimahoodana cod sare ayaa lagu sheegayaa iyo dhammaan dadka daneynaya waxaa loo ogolyahay iney ka soo qeybgalaan furitaanka;
    vi. Iibinta xaraashka ah iyadoo lagu salayanayo:
    vii. Dejinta qiimo aan laga hoos mari karin;
    viii. Xayeysiis guud oo lagu soo saarayo ugu yaraan hal wageysyada Guud iyadoo tartamayaasha loogu yeedhayo inuu hubiyaan alaabada kana soo qeybgalaan habsocodka xaraashka.
    ix. Xayeysiisku waxaa lagu muujinayaa waqtiga iyo goobta xaraashka iyo
    x. Waxaa loo oggolaanayaa muddo aan ka yarayn 14 cisho ka hor waqtiga xaraashka.

c. Burburinta, meeleynta, ama duugidda amaba qaab kasta oo kale oo loo khaarijin karo oo ku habboon in loo khaarijiyo alaabta, laakiin burbuinta, duugista iyo meeleynta waxaa la sameyn karaa oo keliya;
    i. Marka alaabtu aysan lahayn wax qiimo lacageed ah, loona wareejin karin hey'ad kale, ama loo beddeli karin qaab kale oo qiimo isticmaal u yeeli kara, ama
    ii. Marka laga eego dhinaca amniga Guud, danta guud, ama caafimaadka iyo khatarta ay keeni karaan ama sharci ahaan iyo arrimaha xuquuqda aadanaha, ama iyadoo la tixgelinayo dhowrista degaanka.

2. Habka khaarijinta sida ku cad qodobada 111(d) iyo 155 (d) waxaa lagu qaban karaa ansixin qoran oo ay sameyso wakaaladda ka masu'uulka ah ilaalinta deegaanka ama wakaalad kasta oo kale oo mas'uuliyadi ka saaran tahay dhowrista ammaanka sida ku xusan qodobka hore ee 155(ii).
3. Habraacyo faahfaahsan ee khaarijinta alaabta waa in lagu qeexaa xeernidaamiyayaasha.

## QAYBTA SIDEEDAAD:
## CABASHOOYINKA IYO RACFAANNADA DIB U EEGISTA DACWOOYINKA

### Qodobka 163:
### Xaqqa Dib u Eegista

1. Tartamaha dhabta ah ee soo gudbiya cabasho ku saabsan dhibaato kasoo gaartay ama qasaare ama dhaawac kasoo gaaray jebin waajibaad uu farayo sharcigani Hay'adda Qandaraaska Iibka, ama xeernidaamiyaasha la xiriira fulinta iyo dokumentiyada tartanka wuxuu dalbi karaa in dib loo eego heer kasta oo dacwadaha Qandaraaska Iibka ah si waafaqasan qaybtani VIII ee sharcigan.
2. Arjiga dib u eegista lama tixgelinkaro haddii aan la tilmaamin fal cayiman oo laga saaray ama maqan, wakaaladda ama Hay'adda Qandaraaska Iibka ee ku eedeysan iney ku xadgudubtay sharciga ama xeernidaamiyaha ama sida ku xusan qoraalada/dokumentiga tartanka.
3. Haddii uu arjiga dib u eegistu khuseeyo eedeyn la xirrirta maamul xumo ka timid habkii tartamayaasha lagu kala reebayey ee la fuliyey inta aanan dokumentiga tartanka lafurin, markaa cabashadaa waxaa la fiirinayaa oo keliya haddii la soo gudbiyey intaan naadada tartanka ee qandaraaska lafurin.

### Qodobka 164:
### Dibu eegista uu Sameeyo Sarkaalka Xisaabaha ee hay'adda Qandaraaska Iibka

1. Ka hor intaan la gaarin dhaqangalka heshiiska, arjiga dib u eegista waxaa lagu sameynayaa marka ugu herreysa, qoraal ahaan, oo loo gudbinayo Sarkaalka Xisaabaha.
2. Sarkaalka Xisaabaha.ma aqbalayo arjiga dib u eegista lasoo gudbiyey, haddii aan cabashada lakeenin 14 maalmood gudohood kaddib wargelinta heshiiska lasoo jeediyay sida ku cad Qodobka 81(2) ama marka tartamaha cabashada gudbinayo ogaado xaaladda dhalisay cabashada, ama marka tartamuhu ay tahay inuu ogaado xaaladaha jira, hadba tii labada soo hormarta.
3. Ka timaaddo cabasho la xiriirtaa habka dalab kasta, Sarkaalka Xisaabaha ku hawlaha lihi wuxuu dawladda iyo tartamayashaba ku wargelinayaa cabashada jirta.
4. Haddii aan cabashada laga gaarin heshiis loo dhanyahay, Sarkaalka Xisaabaha wuxuu joojinayaa Qandaraaska Iibka tartanka oo dhan wuxuuna go'aan qoraal ah kusoo saaaraya muddo shan (5) maalmood gudohood oo ka bilaabma maalintii cabashada lasoo gudbiyey wuxuuna kuxusayaa ga'aankiisa;
    a. Asbaabaha go'aanka.
    b. In cabashadii la aqbalay dhammaan ama qayb kamida iyo
    c. Inay ku caddahay tallaabooyinka wax lagu saxayo iyo meelaha ay khuseyso.
5. Haddii aan Sarkaalka Xisaabaha go'aan kusoo saarin waqtiga lagu xusay Qodob (4), ama haddii aan dacwooduhu ku qancin go'aanka Sarkaalka Xisaabaha dacwooduhu markaa wuxuu xaq u leeyahay inuu cabashadiisa u gudbiyo

Guddiga Madaxa bannaan ee Dib u Eegista Cabashooyinka sida ku Qodobka 114

**Qodobka 165:**
**Dib-u-Eegista Gudiga Madaxabanaan ee Qandaraaska Iibka**

1. Sida ku xusan Qodobka 113(5) arjiga cabashada waxaa loo soo gudbin karaa Guddiga Dibu Eegista Madaxa bannaan xaaladahan soo socda;
    a. Rafcaanka tartatamaha dacwoonayaa ka qaato go'aanka uu gaaro Sarkaalka Xisaabaha, iyadoo uu kusoo gudbinayo muddo toban (10) maalmood gudohood oo ka bilaabmeysa maalinta go'aanka uu ka gaaray Sarkaalka Xisaabaha.
    b. Haddii ay dhacdo in Sarkaalka Xisaabaha go'aan ka gaari waayo cabashada mudadii sharcigu xaddiday kadib markii arjiga dib u eegista lagu keenay toban (10) cisho gudahood waqtigii loo qabtey inuu ku soo wargeliyo Sarkaalka Xisaabaha sida uu qabo qodobka 113
    c. Haddii ay dhacdo in dhinacyadu heshiiska kala saxiixdeen, cabasho kasta oo markaa kadib loo keeno in Gudiga madaxa bannan ee Dibu eegista dib u eegis ku sameeyo lama aqbalayo, laga reebo marka Gudiga Dibu eegista sheego in heshiiska la saxiixay iyadoo aan la raacin nidaamka saxda ah ee sharcigan tilmaamay.
2. Si codsi dib u eegis ay u tixgeliyaan Gudiga Madaxa Bannan ee Qandaraaska Iibka, waa in arjiga lagu soo lifaaqaa khidmad lacageed sida ku cad xeernidaamiyaha.
3. Gudiga Madaxa bannaan ee Dib u eegista Qandaraaska Iibka wuxuu go'aan ku soo saarayaa muddo soddon (30) maalmood ah marka cabashada la qabto sida Qodobkani qabo.
4. Cabashada waa la diidi karaa haddii;
    a. Ay buuxin weydo shuruudaha laga rabo ee ku xusan Qaybtan,
    b. Ay ku saleysan tahay wax aan xaqiiqo ahayn, ama aanay wadan wax faafaahin sharci ah ama xaqiiqo la taaban karo ah.
    c. Loo diiwaan geliyay hab qaldan makii ugu horeysay loona soo gudbiyey Guddiga madaxa bannaan ee dib u eegista Qandaraaska Iibka.
    d. Ay khuseyso fulinta heshiiska ama maamulkiisa oo ay san khuseyn bixinta heshiiska; iyo
    e. Ay ka hor imanayso go'aan cad oo la xiriira qiimeynta marka loo eego tartamayaasha tartanka kula jira.
5. Haddii aan cabashada la diidin, talaabooyinka ay Gudiga Madaxa Bannan ee Qandaraaska Iibka amri karaan waxaa waxaa ka mid ah;
    a. In ay ka mamnuucdo hay'adda qandaraaska iibka sameynta ama go'aan gaarida hab aan la ogoleyn ama iney raacdo habraac qaldan.
    b. La baabi'iyo si buuxda ama qayb ahaan in hay'adda qandaraaska iibka fal kasta oo aan la ogoleyn ama go'aankasta oo ay gaarto marka laga reebo go'aanka xoojinaya heshiiska fulintiisa;

c. In dib loo soo celiyo go'aanka ay gaartay Hay'adda qandaraaska iibka ama la bedelo go'aankoodii marka laga reebo inta ku saabsan fulinta heshiiska;

6. Haddii cabashadu timaaddo xili waafaqsan waqtiga la oggolyahay in cabashada lagusoo gudbiyo sida Qaybtan ku cad, markaa hawsha qandaraaska iibka waa la hakinayaa ilaa inta ay go'aan la xiriira cabashada soo saarayaan Gudiga Dibu eegista Madaxa banaani ee qandaraaska iibka.
7. Hakinta ku xusan Qodobka 154 (6) lama fulinayo haddii Hey'adda Qandaraaska Iibka u caddeyso Maamulka in hawlaha loo fulinayaa la xiriirto ka hortegidda masiibo dabiiciya, macluul dillaacday ama arrimo xagga caafimaadka ah oo waxkaqabad deg deg ah u baahan, ama dagaal qarxay ay lagama maarmaan tahay fulinta hawlaha qandaraaska iibka.
8. Caddeynta lagu qorayo sababaha muujinaya arimahan korkuxusan ee xaaladda degdegga ahi caddaato, markaa waxaa laga diyaarinaya dokumenti xog ururin ah oo qayb ka noqonaya habka shaqa fulinta Qandaraaska Iibka waxaana loo tixgelinayaa inuu kama dambays yahay marka laga reebo wixii maxkamadi ka furan tahay
9. Go'aanka Gudiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista Qandaraaska Iibka ee Dibu eegiddu gaaraan waa kama dambays laakiin rafcaan maxkamadeed oo keliya ayaa laga qadan karaa sida ku xusan Qodobka 156 ee sharcigan.

## Qodobka 166:
## Hababkaka Madaxa Bannaan ee Dibu eegista Qandaraaska Iibka

Habka la raacayo ee Gudiga Dib u eegista waxaa lagu qeexay Ajandaha 2 ee xeerkan.

## Qodobka 167:
## Dib-u-Eegis Maxkamadeed

Hay'adda Qandaraaska Iibka ayaa ikhtisaas u leh iney ku sameyso cabashooyinka dib u eegis maxkamadeed go'aamadii ay soo saareen Guddiga Qandaraaska Iibka Madaxa bannaan ee dibu eegista, ama haddii ay go'aan ku gaari waayaan muddaddii sharcigu u xaddidey.

# QAYBTA SAGAALAAD:
# QODDOBADA GUUD (GENERAL PROVISIONS)

## Qodobka 168:
## ka Difaaca mas'uuliyad shakhsi

Qofna looma qabsan karo dacwad madani ama ciqaabeed oo ku saabsan fal kasta ama ka joogsado si niyad sami ah u qabanaya shaqadiisa sida ku xusan sharcigani.

## Qodobka 169:
## Arjiga xogta ee Maamulka

Hay'ad qandaraas ee iib kasta waxey xog buuxda siineysaa Maamulka, xogtaas oo noqon kara qoraal oo ku saabsan qandaraaska iibka ee Hay'adda Qandaraaska Iibka sameysay.

## Qodobka 170:
## Hantidhawrid Waqtiyeysan

1. Hanti Dhowrka guud wuxuu fulinayaa shaqadii hanti dhawridda ee sannad laha ahayd ee qandaraaska iibka dhacay iyo fulintiisii sida xeerka hanti dhowrka ku cad waxaana koobiga xogta hanti dhawrka loo gudbin karaa xafiiskii la hanti dhawray haddii uu soo codsado.
2. Hanti dhowridda sharciga ee hawlaha qandaraaska iibka ayey cuskan kartaa Maamulka marka ay dejinayaso siyaasadaha ama tallaabooyinka lagu horumarin karo Qandaraaska Iibka, meeleynta, ama habka bixinta qandaraaska.

## Qodobka 171:
## Baaritaanka uu sameeyo Maamulka

1. Maamulku wuxuu magacaabi karaa qof soo baara arin kasta oo la xiriirta habraaca Qandaraaska Iibka ee ay sameysay Hay'adda Qandaraaska Iibka, ama go'aamadii waxku dhamaadeen, ama hawlihii heshiiska qandaraaska iibka ee lagalay ama la fuliyey, haddii loo arko in baarista lagama maarmaaan u tahay ama la doorbidayo in lagu joojiyo ama lagu ogaado wax isdaba marin ee sharciga ka hor imaanaysa
2. Qofka wax baaraya sida uu qabo qodobka 165 (3)
   a. Waqtigii loo baahdo ee saacadaha hawlaha waxaa la tegi karaa dhismaha hay'adda Qandaraaska Iibka, tartamayaasha, qeybiyeyaasha, lataliyayaasha, qandaraaslayaasha ku guda jira hawlaha Qandaraaska Iibka ee baaritaanku ku socdo
   b. Ka dalbaan sarkaalka, shaqaalaha, ama wakiilka hay'adda Qandaraaska Iibka, qandraaslaha, ama lataliyaha, iney soo saaraan buugaag kasta iyo cajalado, koontooyin ama dokumeentiyo.
   c. Ka baaraan dhismayaasha bugaag kasta, cajalado, koontooyin ama dokumeentiyo.
   d. Waxaa dhismayaashooda laga baaka sameeyaan nuqullo buugaagta, cajaladaha, koontooyinka ama dokumeentiyo ee Hay'adda Qandaraaska Iibka, tartamaha, adeegbixiye, qandaraasle ama la taliye.
   e. Qaataan buugaag, cajalado, koontooyin ama dokumeentiyo ee Hay'adda Qandaraaska Iibka, tartame, adeegbixiye, qandaraasle ama la taliye ilaa iyo inta ay u arkaan iney lagama maarmaan tahay iney baaraan ama ka sameeyaan nuqullo, laakiin baaraha waa inuu siiyaa warqad caddeyn ee bbuugaagta, cajaladaha ama dokumeentiyada uu qaatay.
   f. Ka dalbaan sarkaalka, shaqaalaha. ama wakiilka Hay'adda Qandaraaska Iibka ama tartame, adeegbixiye, qandaraasle, ama la taliye;
      i. sharaxaan xotga buugta ku qoran, koontooyinka, dokumentiyada iyo

ii. inay siiyaan baarayaasha xog buuxda oo ku saabsan maamulka iyo hawlaha hay'adda qandaraaska iibka ama tartamayaasha.

3. Awoodda xafiisyada lagu gelayo iyo baarsita ku xusan Qodobka 160 (2), (b) iyo (j) laguma dhaqmayo ilaa la helo sababo macquul ah oo la rumaysan karaa oo lagama maarmaan ka dhigeysa.
4. Qofkasta oo isku dayo inuu hor istaago in baarista kor ku xusan lafuliyo wuxuu noqonayaa danbiile sida sharcigan ku cad

**Qodobka 172:**

**Habraaca dhammaystirka baarista**

1. Qofka wax baaraayaa waa inuu;
   a. U gudbiyaa koobi warbixinta barista Maamulka
   b. Xogtii barista kasoo baxday oo kooban iyo wixii sixid ah ee loo baahdo waxaa loo diryaa Hay'dda Qandaraaska Iibka ee la baadhay, iyo tartamaha, qeybiyeyaasha, qandaraaslayda ama la taliyayaasha hawlqabadkoodu yahay waxa u baahan baaritaanka

2. Maamulku hadduu ku qanaco xogta baarista oo ay caddaato in xadgudub lagu sameeyey habka Qandaraaska Iibka loo maareeyey oo xeerarka sharcigan ka hor imanaya waxay qaadaysaa tallaabo lagu saxayo wixii isdabamarin ah ee soo baxay waxaana talaabooyinka kamid ah;
   a. In la buriyo hab socodka Qandaraaska Iibka
   b. In la joojiyo heshiiska qandaraaska Iibka
   c. In la ansixiyo wixii la qabtay ee habsocodkan la xiriira
   d. Bayaan waafaqsan wax alla wixii la xiriira qoddobada sharcigan
3. Maamulka wuxuu siinayaa qofku fursad ku haboon arrinta, ka hor intaanan tallaabo laga qaadin sida uu dhigayo qodobka 121 (2) taasi oo waxyeelleyn karta xuquudiisa ama hantida qofkaasi.
4. Qofkasta oo sabab la'aan u diida ama horistaaga qof baare ah shaqadiisa sida sharcigani qabo waa denbi

**Qodobka 173:**

**Xadgudubyada la xiriira Sharcigan**

Qofkasta oo xadgudub ku sameeya qodob ka mid ah sharcigan iyo ciddii ay maxkamdi ku xukunto faldambiyeed waxaa loo qaadanayaa inuu dambiile yahay si waafaqsan sharcigan waxaana uu ku muteysan karaa ganaax lacageed oo aan ka badneyn ilaa 1000 doolar maraykan ah ama xarig aan ka badneyn ilaa (3) saddex sanno.

**Qodobka 174:**

**Helitaanka Dadweynaha**

Maamulku wuxuu hubinayaa in go'aanada maamul ee Gudiga Madaxa bannaan ee Dib u eegista Qandaraaska Iibka iyo talooyinka Maamulka ee wixii codsiga guud si waafaqsan sharcigan in isla markiiba fursad u helaan dadwaynaha iney ogaadaan ama helaan.

## Qodobka 175:
## Nasakhid iyo wax ka beddel

Marka sharcigani dhaqan galo wuxuu bedelayaa dhamaan qoddobada wixii shuruuc kale ee la xiriira Qandaraaska Iibka Guud.

## Qodobka 176:
## Qoddobo ku meel gaar ah

1. Hay'adaha Iibinta Qandaraaska ee ku lug laheyd qandaraas iib ama mid aan dhamaan isla markiiba ka hor inta aanu sharcigan dhaqan gelin wey sii wadayaan dhamaystirka qandaraaska iibka, ilaa ay noqoto wixii dambe in sharcigan lagu dabaqo.
2. Sida lagu xusay qodobka 125 (1) halka aragtida Maamulka ee sii wadidda wax heshiis sharcigan ah ama waxkasta oo la qabtay ama uu sameeyay qof oo xadgudub ku ah sharciga markaa Maamulka wuxuu qaadi karaa talaabooyin ku habboon oo lagu saxayo meeelaha isdhaafku ka jiro ilaa laga gaarayo in leys waafajiyo sida sharcigu oggolyahay.

## Qodobka 177:
## Dhaqan gelinta Sharcigan

1. Sharcigani waxaa la dhaqan gelinayaa fulintiisa muddo kayar 12 bilood oo ka bilaabaneysa maalintii Madaxweynuhu saxiixo ama faafinta rasmiga lagu soo saaro ee loo aqoonsaday inuu yahay sharci qaran ama la dhamaystiray arimaha soo socda hadba labada kii soo hormara.
   a. Miisaaniyadda Wasaaradaha Xukuumadda Federaalka la dejiyey
   b. Xubnaha Guddiga Agaasinka Hay'adda Iibinta Qandaraaska Guud iyo agaasimaha guud la magacaabay.
   c. Xubnaha Guddiga dib u eegista madaxa Bannaan ee iibka qandaraaska la Magacaabay
   d. Ugu yaraan 12 ee Hay'adaha Qandaraaska Iibka ay bilaabaan maalgelin weyn oo ka koobnaan doona qiyaastii boqolkiiba 70 miisaaniyadda guud loo qoondeyey lana abuuriddii Guudiga qandaraaska iibka iyo waaxda Qandaraaska Iibka.
   e. Si kastaba ha ahaatee faafinta rasmiga ahi waxay ku xaddidan tahay muddo aan ka badnayn 12 bilood laga bilaabo maalinta madaxweynuhu sixiixo.

## Qodobka 178:
## Nuqulka Ingiriiska ayaa Asal ah

1 Maadaama ay lagama maarmaan tahay in la hubiyo arjiga iyo tarjumidda sharcigani oo ka kooban guud ahaan eray bixin dhaqaale oo la isticmaalo oo takhasus sare leh, waxaa leysku raacay in Luuqadda Ingiriiska iyo kan soomaaliga noqdaan luqadaha Rasmiga ah ee sharcigan.

2. Haddii ay dhacdo inay iska hor imaadaan ama is khilaafaan luqadda Soomaliga iyo Ingiriiska ee sharcigan, midka ku qoran luqadda Ingiriiska ayaa la qaadanayaa.

## LIFAAQA 1aad:
## XEERKA SARAAKIISHA DOWLADDA, TARTAMAYAASHA, ADEEG BIXIYAALKA, HESHIIS GALAYAASHA, TALOBIXIYAYAASHA QANDARAAS QAATAYAASHA

### 1. Xeerka Saraakiisha Dawladda

1. Sarkaal dawladeed kasta oo lug ku leh Dalabaadka, Qorsheynta, Diyaarinta, Meeleynta, samaynta habka qandaraaska iibka iyo maamulida fulinta heshiisyada; waa inuu:
    a. U fuliyaa hawshiisa/hawsheeda si dhexdhexaadnimo ah si loo xaqiijiyo tartan cadaalad ah u helaan qandaraaska iibka guud ee tartamayaasha;
    b. Markasto uu ku shaqeeyo danta guud, iyo u hogaansanaanta ujeedooyinka iyo nidaamka lagu qeexay sharcigaan, xeernidaamiyaha iyo sida uu qabo sharciga shaqaalaha rayidka ee anshaxa iyo meeshii lagu dabiqi karo xeerarka kale ee la xiriira.
    c. Markasta iska ilaaliyo iska hor imaadka danaha gaarka ah iyo inuu dhaco iska hor imaad danaysi gaar ah shaqadiisa, shaqdeeda iyo hawlaha kale iyo inuu sida ugu dhaqso badan u soo sheego hadii wax danaysi gaar ahi dhacay oo cudur daar u noqoneysa naftiisa/nafteeda ku lug lahaanshaha wax kasto ooh hawl ah oo ay ku jirto danaysi gaar ahi.
    d. Aanu gelin ama ka qayb qaadan fal musuqmaasuq ama been abuur, khasbid ama khiyaamo, oo ay ku jiraan xaqiraad ama ogolaansho laaluush;
    e. Xafido xogta siraha ah oo soo gaaro xafiiskiisa/keeda oo la xiriira habka qandaraaska Iibka iyo dalabka naadada, oo ay ku jiraan wabxinta hantida tartamaashu leeyihiin; iyo
    f. Markuu ka tago Hay'adda Qandaraaska Iibka waa in aanu mudo 3 sano wax xil ah ka qaban maamulka arin kasta oo gaar ah oo isaga/iyada la sameeyay hawlo Qandaraas Iib.
3. Saraakiisha Hay'adda Qandaraaska Iibka ama qaraabadooda dhow waa in aaney ka qayb qaadan tartamayaasha habka qandaraaska iibska ee hay'adda iibka qandaraaska.
4. Sarkaalka dawladda waa inuu ka cudur daarto in aanu sina uga qayb qaadan habka qandaraaska iibka marka dalabka u soo gudbiyo tartame qaraabo la ah qofkaas sarkaalka ah, ama tartame qofkaas sarkaalka ah ama qaraabadiisa laga shaqaaleeyey heer maamul ama wakiil ahaan ama xubin ka tirsan Guddiga agaasimayaasha ee shirkad ama ku leh wax dan dhaqaale ah shirkadda

5. Hadii eedayn dhacdo waa in lasoo sheego markii qofka sarkaalka ahi ogaado in qof qaraabadiisa ahi soo gudbistey dalabkaas, lakiin waa inaan sheegistaasi ka danbeyn maalinta furitaanka dalabyada.
6. Shardiga eedeynta waxaa la gaarsinayaa maamulka iyo maareynta ee mid kasta oo qandaraas iib oo tartamahaas oo kale ah.
7. Dhamaan sarkaaladda dawladaa iyo shaqsiyaadka kale oo ku lug leh qandaraaska iibka guud sida sharcigaan iyo sharciyada kale oo la xiriiraaba qabaan waa inuu siiyo wada shaqayn buuxda iyo wax qarin la'aan Maamulka, Hantidhawrka, iyo maamullada kale oo sameynayo hawlaha kormeerka iyo korjoogtaynta qandaraaska Iibka guud sida ku cad shuruucda soomaliyeed oo ay kamid yihiin soo bandhigida hantidooda;
8. Sarkaallada dowladeed oo jebiya xeerarka lagu qeexay sharcigan iyo xeernidaamiyahaba wuxuu mutaysanayaa xayiraadaha maamul iyo madaniba oo lagu dabiqi karo iyo sidoo kale in lala tiigsato xeerarka ciqaabta oo ay ku jiraan ka hortaga musuqmaasuqa.

## 2. Habdhaqanka tartamayaasha, Adeegbixiyaalka, heshiis qaatayaasha, la taliyaasha iyo qandaraas qaatayaasha

1. Tartamayaasha, adeeg-bixiyaalka, la taliyayaasha, qandaraas qaatayaasha iyo heshiis qaatayaalka waa iney markasto u hogaansamaan waajibaadyada uu saaray sharcigaan, xeernidaamiyaalka iyo tilmaamaha kale ee Maamulka, heshiiska iyo arimaha kale oo la xiriira dhaqankooda iyo faladooda ee la xiriira Qandaraaska Iibka.
2. Tartamaha, adeeg-bixiyaha, la taliyaha, qandaraas qaataha iyo heshiis qaataha waa in aaney gelin ama fududeyn musuqmaasuq ama khiyaamo adeeg bixiyaalka, gelin hawlo been abuur ah oo ay ka mid yihiin bixinta laallush si toos ah iyo si dadbanba, been ka sheegid xaqiiqda si ay usoo jiitaan habka qandaraaska Iibka, ama hanashada heshiiska, oo ay ku jiraan iney lacag usoo gudbiyaan si aan haboonayn ama carqalad ku sameeyaan awooda ltartanka ee tartamayaasha si uu uga qayb qaato habka qandaraaska Iibka.
3. Tartamayaashu waa in aaney gelin, tartanka ka hor iyo kaddiba hawl kasta oo looga danleeyahay , in lagu hakiyo ama joojiyo in Hay'adda Qandaraaska Iibkahesho faa'iidada tartan furan oo xor ah oo ay kamid yihiin laakiin aan ku koobneyn khiyaamo lagu sameeyo fursadaha tartanka iyo goynta kaharashka, khasbid, musuqmaasuq iyo hawlo been abuur ah.
4. Hay'adda Qandaraaska Iibkawaa iney ka joojiso tartanka tartamaha soo bandhiga, bixiya ama ogolaado laaluush sida lagu qeexay faqrada 3 aad, isla markaana la ogeysiiyo tartamahaas laga joojiyey Maamulka iyo Maamullada kale ee sharciga oo ay khusayso;
5. Hay'adda Qandaraaska Iibka waa in aaney siin heshiis tartame mas'uul ka ahaa diyaarinta waxyaabaha loo baahan yahay ama dukumentiga tartanka ee heshiiskaas ama ilaalinayay go'aaminta heshiiskaas, ama shirkad kasta oo ixiriir la leh tartamahaas. Qodobkani laguma dabaqaayo shirkadaha kala duwan (la

taliyaalka, heshiis qaatayaalka, qandaraas qaatayaalka ama adeeg-bixiyaalka) oo si wadajir ah isula qabanayo waajibaadka adeeg-bixinta si faa'iido wadaag ah ama naqshad mashruuc lagu dhisayo.

6. Tartamayaalka, adeeg-bixiyaalka, la taliyaalka, qandaraas qaat iyoayaasha, heshiis qaatayaasha sameeya been abuur, musuqmaasuq, khasab ama fal is hortaag oo la xiriiro Qandaraaska Iibka guud waxaa lagu oogayaa dacwad ciqaab ah sida ku xusan qaanuunka ciqaabta  oo ka mid ah xeerka ka hortaga musuqmaasuqa;
7. Maamulka waxay ka saari karaan tartame, adeeg-bixiye, heshiis qaate, qandaraas qaate iyo la taliye inuu ka qayb qaato qandaraaska iibka guud haduu ku xadgudbo nidaamkaan.

## LIFAAQA 2aad:
## Nidaamka GUDDIGA Qandaraaska Iibka MADAXA BANAAN EE DIB U EEGISTA

### 1. Ujeedada hagayo

Ujeedooyinka muhiimka ee nidaamkaan waa in la xaqiijiyo hawlihii lasoo qabtay ka hor Guddiga madaxa banaan ee dib u eegista in loo qabtay si cadaalad ah, dhaqso badan iyo sida ugu haboon oo macquulka ah, taasoo ay xubnaha Guddiga dib u eegista mas'uuliyaddoda tahay iney arintaas xaqiijiyaan

### 2. Habeynta Ganacsiga

1. Guddoomiyaha Guddiga dib u eegista ayaa mas'uul ka ah inuu xaqiijiyo in hawsha Guddiga loo diyaariyey sida ugu haboon oo macquulka ah arintaas awgeedna wuxuu tilmaamo ka bixinayaa:
   a. Qorsheynta hawlaha Guddiga Dib u eegista;
   b. Meelaha uu Guddiga dib u eegistu fariisan karo;
   c. Nidaamka guud ahaaneed ee Guddiga dib u eegist; iyo
   d. Nidaamka Guddiga dib u eegista ee meel khaas ah
2. Meelaha iyo waqtiyada la qabanayo dhageysiga Guddiga dib u eegista waxaa go'aaminaya Guddoomiyaha isagoo ka duulayo fursadaha ugu macquulsan oo hawsha la qabanayo ay ku hor iman karaan Guddiga hortiisa dhinacyada sida ugu fudud iyo kharashka oo ugu macquulsan.

### 3. Inta ay ka koobnaanayaan Guddiga dib u eegistu

1. Guddiga dib u eegista waa in aaney ka yaraan 3 xubnood markii ay dacwad u fariisanayaan.

2. Hadii, kahor arinta uu fadhigaan la xiriiro aan la goaamin, ay xubin kamid ah Guddiga dib u eegista ka istaagto (diido) iney xubin ka noqoto hawshaas laga

hadlayo, ama aaney soo xaadirin hawshaas socoto awgeed, Arimahaan soo socdo midkood ayaa la samayanayaa:

   a. Hadii Dhinacyada hawshu quseysaa isla ogolaadaan, heshiiska ayaa la qorayaa kadib ayaana go'aanka la gaarayaa; ama
   b. Hadii dhinacyadu isla ogolaan waayaan, Kulanka waa la joojinayaa kadibna xubin kale ayaa lagu soo bedelayaa xubintii kabaxday kulanka hawshaas awgeed kadibna dhegeysigii ayaa dib loogu celinayaa.

3. Guddiga dib u eegista, wuxuu ujeedada hawshan awgeed, isagoo tixgelinaayo inuu dib u fiiriyo diiwaanka dacwadihii la qabtay Guddiga hortiis oo hawshaan lagu fuliyey, oo ay ku jiraan qoraalada wax kasta oo cadaymo ah oo la sameeyey xiligii hawshaas lagu jirey;
4. Dib u dhegeysi waxaa loo baahan yahay dacwad kasta oo tirada intooda badan ee Guddiga oo fadhida dhegeysiga istaago xubin Guddiga oo ka baxday awgeed ama aan soo xaadirin hawshaas socoto awgeed.

**a. Cadaynta danaynta (ku lug lahaanshaha).**

1. Markii xubin Guddiga dib u eegista ka mid ah ay jiraan dano dhaqaale ama Dano kale oo ka hor imaaneysa habsami u socodka shaqooyinkiisa xuin ahaaneed, waa inuu u sheegaa (cadeeyaa) ku lug lahaanshahaas dhinacyada hawsha ku jira;
2. Markii xubin uu sheego ama caddeeyo ku lug lahaanshaha hawsha sida ku cad farqada 1 aad, xubinku waa in aaney ka qayb qaadan hawshaas ama isticmaalin wax awood ah Guddiga dib u eegista go'aan gaaristooda la xiriirta hawshaas, Marka laga reebo ogolaansha dhinacyada hawsha isku haya.

**b. Xooghaynta Guddiga dib u eegista**

1. Maamulka ayaa siinaya Guddiga dib u eegista iyo xooghaynta iyo waa inuu u diyaariyaa dhamaan adeegyada uu u baahan yahay oo ay ku jiraan kharashka iyo saadka si uu u fushado waajibaadkiisa;
2. Xooghayntu waxay mas'uul ka tahay xafidaada qoraalada Guddiga dib u eegista waxayna kale oo sameynaysaa xiriirada iyo hawl qabadka iyo shaqo kasta oo loo baahdo oo ka caawineysa guddoomiyaha si uu/ay hawshiisa u guto.

**4. Guddiga dib u eegistu waa inuu dib u eegis ku sameeyo go'aanada hay'adaha Qandaraaska Iibka**

1. Tartamaha Hadii:
   a. Uu diido go'aan uu gaarey hay'adda qandaraaska iibka wuxuu qoraal dacwad usoo gudbinayaa Guddiga dib u eegista si uu go'aankaas dib ugu eego,
   b. Uu ku eedeeyo inuu jiro khilaaf dano oo ka horimaanayo kan Hay'adda Qandaraaska Iibka oo ku lug ku leh hawshaas kahor oo aaminsan in

Hay'adda Qandaraaska Iibkasi cadaalad ah u fulin Karin, waxaa la weydiisan karaa Guddiga dib u eegista si go'aan uga gaaro eedyanta, iyo hadii loo baahdo in hawshu ka horeysey Hay'adda Qandaraaska Iibka

2. Marka lagu daro farqada 1 aad. Guddiga dib u eegistu wuxuu awood u leeyahay inuu dib u fiiriyo Go'aanka hay'adda Qandaraaska Iibka markii uu si haboon codsi ugu soo gudbiyo Hay'adda Qandaraaska Iibka ama qof kasta oo kale oo xuquuqdiisa ay si qaldan u saamayeen go'aanadii uu gaarey Hay'adda qandaraaska iibka.
3. Si shaki looga baxo, arrimaha soo socda looma gudbin karo Guddiga dib u eegista:

    a. Go'aan uu gaarey hay'adda qandaraaska iibka inuu diido qayb ama dhamaan tartamayaasha ka hor bixinta heshiiska sida ku cad qodobka 81 aad oo ay ku jiraan go'aanada Hay'adda Qandaraaska Iibka oo ah inuu joojiyo sii wadida dariiqo iib oo socotey, kadib markii ay hesho soo jeedino ay soo gudbiyeen tartamayaal kasoo jawaabayo arjiga dalabaadka ama u qalmida ka hor.
    b. Go'aan uu gaarey Hay'adda Qandaraaska Iibka si uu u xadido ka qayb galka tartamayaasha nidaam doorasho ah ama nidaam boos celin ah.
4. Markii Guddigu dib u eegista, dib u eegis ku samaynayo go'aan isaga ka horeeyey wuxuu samayn karaa:
    a. Inuu hakiyo go'aanada Hay'adda Qandaraaska Iibka oo ay khusayso, ilaa Guddiga dib u eegistu uu go'aan ka gaarayo hawshaas socoto;
    b. Inuu toosin ku sameeyo wax kasto oo ay tahay in Hay'adda Qandaraaska Iibka uu sameeyo ama wax ka bedelo oo quseeyo habka Qandaraaska Iibka ama habka meeleynta;
    c. Amar ku bixiyo in Qandaraaska Iibka ama habka meeleynta la baabi'iyo;
5. Markii dib u eegis lagu samaynayo go'aan ay gaartey Hay'adu, Guddiga dib u eegistu waa inuu sameeyaa go'aan qoraal ah waana inuu sababeynayo go'aankiisa, oo ay ku jiraan waxyaabaha usoo baxay oo su'aashu ku jirto iyo cadaymaha uu u adeegsadey iyo waxyaalihii kale oo arimahaas la helay lagu saleeyey;
    a. Ansixiyo go'aanka Hay'adda Qandaraaska Iibka
    b. Ka duwanaado go'aanka Hay'adda Qandaraaska Iibka
    c. Dhinac iska dhigo go'aanka Hay'adda Qandaraaska Iibka isagoo:
    d. Samaynayo go'aankii lagu bedeli lahaa go'aankaas dhinaca layska dhigay
6. Dib ugu celiyaan hawsha Hay'adda Qandaraaska Iibka si ay uga fiirsadaan iyagoo raacayo tilmaamaha iyo talooyinka Guddiga dib u eegista.

7. Guddiga dib u eegistu waa inuu go'aan kusoo saaro mudo aan ka badnayn 10 casho gudohood kadib markii ay soo gaarto arjiga dib u eegistu;

5. **Wargelinta Racfaanka**

   Racfaanka loo soo qaadanayo Guddiga dib u eegista waxaa keliya oo la aqbali karaa markii ogeysiiska racfaanka uu khuseeeyo go'aankaas iyadoo la eegayo dariiqadii loo maray, oo aaney ku jirin markii Sarkaalka Xisaabaha uu u gudbiyo si qoraal ah xadgudubyadii ama xadgudubyada ku jiri kara oo sharciyada Qandaraaska Iibka ah Guddiga dib u eegista si uu talaabada ku haboon uga qaado.

6. **Qaabka iyo nuxurka ogeysiiska racfaanka**

1. Ogeysiiska racfaanka waa in uu yahay mid si haboon u sharxan waana inuu:
   a. Muujiyaa magaca iyo cinwaanka racfaan qaataha;

   b. Cadeeyaa in racfaan qaatuhu uu awood u siiyey cid kale iney metesho racfaankaas, hadii taasi jirtona, uu bixiyo magaca cida metelayso iyo cinwaankeeda;
   c. Si cad u muujiyo faahfaahsanaanta sharci iyo sababeed ee racfaanka, o ay ku jiraan faahfaahinta qodobada sharci ee arinta la xiriira, dukumentigii tartanka, iyo arrimaha kale ee lagu xadgudbay.
   d. Sababeeyo taageeridda iyo sababaha uu ku taageerayo.
   e. Sidii ay hadba suurtogal u tahay, liiska dukumenti kasta uu racfaan qaatuhu uu rabo inuu u isticmaalo caddeyn uu ku taageerayo racfaanka;
   f. Cadeeyo nooca waxqabadka uu codsanayo; iyo
   g. La socoto bixinta lacagta maamulka hawsha sida uu jideeyey xeernidaamiyuhu
2. Ogeysiiska racfaanka waa iney la socdaan ogeysiiska go'aanka uu racfaan qaatuhu ka qaadanayo racfaan, ama nuqul ka mid ah ama markhaati cadeynayo ku guuldareysiga in go'aan la soo saaro.
3. Ogeysiiska racfaanka waa in uu saxiixo racfaan qaataha ama qofka metaelayo lana taariikheeyo.
4. Hadii ogeysiiska racfaanka uu saxiixo qof metelayo racfaan qaataha, Meteluhu waa inuu ku cadeeyaa ogeysiiska racfaanka inuu warbixinta ku soo dhamaystiray isgaoo raacayo amarka racfaan qaataha. Qofka metalayo racfaan qaatuhu waa inuu haysta aawoodsiin u qareemid oo qoraal ah si uu u helo awood uu ku metelo racfaan qaataha;
5. Qodobada xeerkan laguma dabaqi karo Sarkaalka Xisaabaha haddii uu hawsha si toos ah ugu soo gudbiyey Guddiga dib u eegista;

7. **Diidista racfaanka aan sax ahayn**

1. Marka laga reebo hadii gaarsiinta racfaanku la xiriirto ku guuldareysi in Hay'adda Qandaraaska Iibkauu soo saaro go'aan waqtigii loo xadidey, Guddiga dib u eegista waa in aanu aqbalin racfaan Hadii:

   a. Aanu jirin go'aan arintaas khuseeyo, ama
   b. Uu ku guulaysan waayo inuu u hogaansamo qodobada lifaaqa ee sharcigan
2. Hadii Guddiga dib u eegista aanu aqabalin racfaan waa in ay:
   a. Ogeysiiyaan qofka racfaanka keensaday iyo Waaxda Qandaraaska Iibka ba; iyo
   b. Aaney wax hawl ah oo dambe ka qaban

**8. Racfaan Wargelintiisa soo Daahdey**

Haddii arjiga Racfaanka aan lagu soo gudbin waqtigi loo qabtay, lama aqbalayo

**9. Wargelinta Adeegga Racfaanka Sarkaalka Xisaabaha**

1. Marka Gudigga dib u eegista ay helaan wargelin Racfaan, waxay koobi siinayaan Sarkaalka Xisaabaha muudo todoba (7) casho gudahood ah.
2. Marka Sarkaalka Xisaabaha lagu wargeliyo arinta Racfaanka sida qormada sare ee (1) wuxuu joojinayaa hawshii socotay ilaa gudigga dib u eegistu kasoo saaraan go'aan ku saabsan cabashada la soo gudbiyey.
3. Gudigga dib u eegistu waxay soo saari karaan amar lagu qaadayo joojinta habraaca Qandaraaska Iibka lagu sameeyey, markii ay ku qancaan haddii arinta arjiga loo sameeyay arrimo danta ummaddu kujirto, ama lagaga hortegayo masiibooyinka dabiiciga, xaalad caafimaad degdeg ah, dagaal sokeeye,iyo dagaallo ka dhashay, waxaa loo baahan yahay in Iibka la sii wado.

**10. Diiwaan gelinta Dukumiintiyadda Sarkaalka Xisaabaha**

1. Marka Sarkaalka Xisaabaha uu soo gaaro koobiga arjiga Racfaanka, waa inuu muddo todoba casho (7) gudahood ah ugu gudbiyaa Gudigga dib u eegista hadaan hore loo sameyn koobi ah:
   a. Wargelin la xiriirta go'aankii lagu wargelinayey Racfaanka iyo hadii ay jirto wax dokumentiya oo quseeya ama sababeynaya go'aankii hore loo gaaray
   b. Marka lala xiriiriyo go'aanka la gaaray:
      i. inay jiraan sababo guuldareeyey in uu go'aanku soo baxo xilligii loo baahnaa dhexdiisa.
      ii. Xogag ku saabsan qaabka ay u dhacday howsha Iibku
      iii. warar ay bixiyeen shaqaalaha hay'adda wax gadanaysa
      iv. warbixin laga heley tartameyaasha kale iyo
      v. warbixin laga helay baaritaankii la sameeyey iyo go'aankii uu gaaray Madaxa Waaxda Qandaraaska Iibka halka ay ku haboon tahay.
      vi. Wixii dokumentiyo kale ah ee aan weli la daabicin ee laxiira sida qormada sare lagu sheegay ee Sarkaalka Xisaabaha wadaa ka warhayo

2. Sida kucad qormadda (3) waa in Sarkaalka Xisaabaha wadda uu kaydiyaa xogta qormada lagu taxay:
    a. ayadoo la eegayo tilmaamaha ay bixiyeen Gudiga dib u eegista iyo
    b. hadii aaney jirin tilmaamo, sida ugu macquulsan ee suura galka ah, waa in aan mudadu ka yaraan hal maalin, si loo qabto waqtiga dacwad dhegaysiga.
3. Sarkaalka Xisaabaha waa inuu, isla markii uu diiwaangeliyo, siiya rafcaanlaha dhammaan koobiga dokumentiyada lagu xusay faqradda (1) marka laga reebo dokumentiyada uu Sarkaalka Xisaabaha horay ugu diray rafcaanlaha.

### 11. Kala duwanaanshaha sababaha Racfaanka

Racfaan qaatuhu ma bedli karo sababaha Racfaankiisa marka laga reebo duruufo gaar ah oo ogolaansho laga helo Gudiga dib u eegista.

### 12. Habka loo go'aaminayo Racfaanka.

1. Rafcaaan kasta waa iney Gudiga dib u eegista galaan oo dhegaystaan marka laga reebo Racfaanka laga noqday, oo uu racfaan qaatuhu qoraal ahaan ka noqoshadiisa u soo gudbiyey ama
2. Gudiga dib u eegista ay go'aamin karaan iyadoon dacwadda ladhegeysan, haddii
    a. Dhinacyada is hayaa ay ogolaadaan, ama
    b. Haddii middood ku guuldaraysato in nidaamka la rabo fulin waydo ama raaci waydo Go'aamada Gudiga dib u eegista ama uu Gudiggu ku qanco iyadoo dhinac kasta laga eegay oo ay ku jiraan xadka guuldareysiga iyo sababo kasta inay sax tahay in go'aan la gaaro iyadoon dacwadda la dhegeysan ama
3. Sida lagu xusay qorma hoosaadka (2), waa in Gudiga dib u eegista aanu go'aan gaarin isagoon dhinacyada is haya ku wargelinin in dacwadda la dhegeysanayo, fursad kalena loo siiyo inay wakiil soo dirsan kaaran kuna soo gudbiyaan qoraal ahaan.
4. Dhegeysiga dacwadda lama qabanayo iyaddoon la wargelinin dhinacyada ay khuseyso.

### 13. Dacwadda oo la dhegeysto iyadoo dhinacyadii mdikood maqan yahay

1. Gudiga dib u eegista wuu wadi karaa dacwadda dhegeysigeeda iyadoo dhinacyadii mid maqan yahay ama wakiilkoodu maqan yahay, haddii ay ku qancaan in dhinaca ama wakiilkiisa:
    a. haddii la ogaysiiyey waqtiga, goorta iyo goobta dhageysiga dacwada, iyo
    b. hadii aanay sharaxaad lagu qanci karo ka bixinin maqnaanshahooda ama dhinaca maqani ku wargeliyo Gudiga dib u eegista in aanay rabin iney joogaan dacwad dhegaysiga.

2. Guddiga dib u eegistu dhegaysiga dacwadda way kasaari karaan ciddii si xun u dhaqanta

### 14. la noqoshada racfaanka

1. Racfaan qaatuhu wuu la noqon karaa racfaanka
   a. hadii uu sheego, xilliga dhegaysiga dacwada.
   b. ama xili kasta hadii uu qoraal ahaan ugu soo gudbiyo Gudiga dib u eegista.
2. Racfaan waxaa loo aqoonsanayaa mid lala noqday hadii Sarkaalka Xisaabaha uu ogeysiiyo Guddiga dib u eegista goaanka (ama, marka racfaanku uu khuseeyo wax ka badan hal go'aan, dhamaan go'aanada) oo racfaanku la xiriiro in lala noqday.
3. Hadii racfaanka lala noqdo ama loo aqoonsado sidii mid lala noqday, Guddiga dib u eegistu waa inuu u gudbiyo dhinacyada ogeysiis in racfaankii loo diiwaan geliyey mid lala noqday.

### 15. Ka tanaasulida racfaanka

1. Racfaan qaate kasta waa inuu ogeysiiyo Guddiga dib u eegista hadii ey ka tanaasuleen sii wadida racfaanka
2. Markii racfaanka laga tanaasuley sida ku cad faqrada koowaad, Guddiga dib u eegista waa inuu ogeysiis u diraa dhinacyada isagoo ogeysiinaya in racfaankii laga tanaasuley, waa in aanu wax danbe oo hawl ah ka qaban racfaankaas.

### 16. Isku darka labo racfaan iyo wax kabadan

1. Markii laba racfaaan iyo wax kabadan ay isla dhiman yihiin isku waqti, Guddiga dib u eegista wuxuu tilmaami karaa in la isla dhegeysto hadii ay muuqato in:
   a. Su'aalo isku mid ah oo sharci ama xaqiiq ay ka muuqato mid kaasta;
   b. Ay la xiriiraan go'aano ama bilyanis la qaaday oo hal heyad Iib; iyo
   c. Sababo kale awgeed ay fiican tahay racfaanada in la isla dhegeysto.

### 17. Dib u dhigista racfaanka

Lama aqbali karo arjiga dhinac oo ku saabsan dib u dhigis dhegeysiga racfaan ilaa dib u dhiigista waxaa bixin kara oo keliya Guddiga dib u eegista.

### 18. Xog isdhaafsiga go'aanada Guddiga dib u eegista

1. Markii Guddiga dib u eegistu uu go'aamiyo racfaan, waa inuu u gudbiyo dhinac kasta go'aan qoraal ah oo ay ku jiraan go'aanadooda iyo sababayntooda.
2. Guddiga dib u eegista waa inuu u diro go'aanadiisa waqti aan ka danbeyn 10 casho guddahood marka la go'aamiyo.

## *19.* Ogolaanshaha arjiga soo gudbinta racfaanka

Ma jiro codsi ogolaansho in racfaan la qaato oo looga baahan yahay ama ay tahay inuu ogolaado Sarkaalka Xisaabaha ama Guddiga dib u eegista.

## 20. Tilmaamaha

1. Guddiga dib u eegista wuxuu siin karaa tilmaamo dhinacyada oo la xiriira fulinta racfaan kasta ama codsi.
2. Awooda bixinta tilmaamaha waxaa la isticmaali karaa hadii ay ku cadahay mid kamid ah nidaamkaan;
3. Tilmaamaha waa in loo siiyo hadal ama iyadoo qoraal ah dhinac kasta;
4. Tilmaamaha Guddiga dib u eegistu waxay, si khaas ah:
    a. Ula xiriiri karaan hawl kasta oo khusayso diyaarinta dhegeysiga;
    b. Cadayn karaan waqtiga loo ogol yahay hawl kasto in lagu qabto
    c. Bixiyaan hawl gaar ah oo ay tahay in la qabto sidii hawl hordhac ah.
5. In la qabto dhegeysiga dib u eegista ee wax ka qabashada dacwada;
6. Dhinacu waa inuu bixiyo faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan dacwadiisa, iyo warbixin kasto oo lagama maarmaan ah goaan ka gaarista racfaanka;
7. Hadii wax markhaantiyaal ahi jiraan in la dhegeysto; iyo
8. Habka loo bixinayo cadayn kasta ( Tusaale ahaan, in tilmaan laga bixiyo in warbixinta markhaantigu noqoneyso cadaynta ugu weyn).
9. Doonista in dhinac kastaa keeno iyo in la diiwaan geliyo;
10. Warbixinada cadaymaha oo loogu yeeri doono dhegeysiga;
11. Xirmada dhamaan dukumentiyada oo laysku soo xiray oo looga baahan doono xilliga dhegeysiga
12. Silsilada dooda oo koobeysa dacwada dheer ee lasoo gudbiyey oo laga aqrinayo dhegeysiga iyo sheegidda  dhamaan awoodaha lagu kalsoonaan karo, Muujinta haday jiraan arimo gaar ah oo lagu kalsoonaan karo;
13. Qiyaasta waqtiga dhegeysiga;
14. Liiska markhaantiyaasha oo dhinac walbaa jecel yahay in loo yeero si ay caddeyn u bixiyaan; iyo

## 21. Mudayta dhacdooyinka;

a. Xadidaada:
    i. Tirada iyo dhererka dukumentiyada uu dhinac kastaaba isticmaali karo xiliga dhegeysiga
    ii. Dhererka warbixinta hadalka ah;
    iii. Xilliga la ogol yahay su'aalo weydiinta iyo dib u su'aalidda markhaatiyada; iyo
    iv. Arrimaha ay tahay in la abaaro xilliga dhegaysiga;iyo
    v. Baahida in dhanacyadu qaadaan talaabo kasta si awood loogu yeesho dhegeysi labo racfaan iyo wax kabadan

vi. Bixinta dhegeysiyada la qabanayo iyo keenista cadaymaha loo baahan yahay ama tusin fiidiyoow uu keeno ama qalab kale oo elektaroonic ah, iyo in la qaado talaabooyinka lagu xaqiijinayo inaan la magacaabin dhinaca ama markhaatiga; iyo
vii. Guddiga dib u eegista waa in aanu ku toosin dhinac aan metelaad lahayn inuu sameeyao (wakiil qabsadaan) ilaa lagu qanco in isaga/iyada uu awoodo inuu u raaco tilmaamaha

## *22. Ogeysiinta Dhegeysiga*

1. Marka Guddiga dib u eegista uu u qabto waqti dhegeysiga, waa inuu dhinacyada ogeysiiyaa taariikhda, Xiliga iyo meesha dhegeysigu ka dhacayo
2. Guddiga dib u eegista wuu bedeli karaa taariikhda dhegeysiga laakiin waa inuu siiyo dhinacyada taariikhda cusub oo loo bedeley, xilliga iyo meesha dhegeysiga

## 23. Wakiilnimada

1. Racfaan qaatuhu isaga ayaa is meteli kara ama meteli karo kulankada hawshu qusayso ama qof kasta Hadii aaney jirin wax sharci ah oo diidey inuu meteli karo;

2. Sarkaalka Xisaabaha oo racfaanka laga qaatay waxaa meteli kara cid kasta oo uu u awood siiyo inuu metelo hay'ada ama qareen ayaa meteli karo.

3. Ilaa Guddiga dib u eegista ogeysiis lasoo siiyo in wakiilkaas laga joojiyey inuu metelo dhinac, dukumenti kasto oo uu soo gudbiyo wakiilkaasi waxaa loo aqoonsanayaa mid si sax uga yimid dhinaca uu metelayo

## 24. U yeerista markhaatiyada

1. Guddiga dib u eegista wuxuu si uu u sameeyo u yeerid (u yeeris markhaati), uga baahan karaa qof kasto oo Soomaliya joogo:
   a. Inuu kasoo xaadiro markhaati ahaan dhegeysiga racfaanka; iyo
   b. Xilliga dhegeysiga, inuu ka jawaabo su'aalo ama uu keeno dukumenti kasta oo uu hayo oo la xiriiro hawlaha racfaanka.
2. Qofka loogama baahna inuu ka qayb galo dhegeysiga isagoo adeecaya u yeeris markhaantiilaa: haddii
   a. U yeerista isaga loo diray; iyo
   b. Kharashka ku baxayo in uu yimaado lasiiyey ama dib loogu celin doono;
3. Hadii markhaati loogu yeero codsi ka yimi dhinac, dhinacaasi waa inuu bixiyo kharashaadka lagu sheegay qodobka 2 aad (B).
4. Hadii qof looga baahnaa inuu yimaado markhaati ahaan uu iman waayo, Guddiga dib u eegista wuxuu ka codsan karaa Maxkamada inuu u jaro fasax

lagu soo xiro oo loo dirayo taliyaha booliska laguna amrayo inuu soo xiro qofkaas si loo hor keeno Guddiga dib u eegista.

**25. Cadayn**

1. Guddiga dib u eegista wuxuu ogolaan karaa hadal, qoraalo iyo cadaymo kale oo la xiriira xaqiiqda racfaanka, xataa hadii cadayntaasi aaney ahayn mid ay ogoshahay maxkamada sharciga, cadaymaha hadalka ah waa in la dhaariyo.
2. Guddiga dib u eegista kuma qasbi karo dhinacyada ama markhaantiyada iney bixiyaan cadayn ama keenaan dukumenti aan lagu khasbi Karin inuu keeno dacwada madaniga ah ee Soomaaliya;
3. Guddiga dib u eegista wuxuu dalban karaa cadaymaha hadalka ah in la dhaariyo ama xaqiijin.
4. Markii Guddiga dib u eegista uu tilmaamo in waqti cayiman lagu diiwaangeliyo ama lagu keeno caddeyn qoraal ah, lama siinaayo tixgelin caddeyn kasta oo qoraal ah oo aan lau diiwaangelin ama lagu keenin sida tilmaamahaas sheegayeen ilaa lagu qanco iney jiraan sababo macquul ah oo lagu ogolaan karo;
5. Hadii dhinac keeno dukumenti koobi ah oo u isticmaalayo caddeyn, Guddiga dib u eegistu wuxuu u baahan karaa in la keeno dukumentigii rasmiga ahaa (original).
6. Guddiga dib u eegista ma siinayo tixgelin cadayn kasta oo aan lawada siin dhamaan dhinacyda oo dhan.

**26. Dukumentiga been abuurka ah; Dacwadaha khaaska**

1. Guddiga dib u eegistu wuxuu u baari kaaraa eedaymaha si khaas ah, wuxuuna dacwada u qaadi karaa si khaas ah ilaa iyo inta loo baahan in la ilaaliyo kashifaada arimaha lagu xusay faraqada (b) markii lagu eedeeyo.
   a. In dukumentigaa u isticmaalayo racfaanka hal dhanac uu been abuur yahay; iyo
   b. In kashifaada dhinacaas oo arinta la xiriirta qabashada been abuurka ay caksi ku tahay danta bulshada.

**27. Luqada dukumentiyada**

1. Iyadoo ku xiran farqadda (2)aad:

   c. Ogeysiis kasta oo rafcaan ama codsi ogeysiis oo ay qabanayaan Guddiga dib u eegista waa in lagu soo qoraa luqadda Soomaaliga.
   d. Dukumenti kasta oo kale oo uu qabanayo ama kaydinayo Guddiga dib u eegistu waa inuu noqdaa Soomaali iyo ingiriisi, ama lagu soo lifaaqo turjumaada Afka Ingiriisiga ah oo uu saxiixay turjubaanka in turjumidaasi ay xaqiiqo tahay.

2. Guddiga dib u eegistu kuma khasbana inuu muhiimad siiyo Codsiyada aan waafaqsanayn sida ku xusan (a iyo b) ee faqraddan.

**28. Culeyka Caddeyn**

1. Hadii racfaan qaate cadeeyo in go'aankaas aan loogu qaadi karin si isaga kasoo horjeedo marka loo eego qodobada sharciga oo loo isticmaalay go'aankaas sidaa darteed aan isaga/iyada lagu dabiqi Karin, Dhinacaas ayaa laga rabaa inuu cadeeyo inaan qodobadaas lagu dabiqi karin isaga/iyada.
2. Waa in racfaan qaatuhu cadeeyo in xaqiiqda uu tilmaamay ay run tahay Hadii:
    a. Racfaan qaatuhu soo gudbiyey ama tilmaamay wax xaqiiqi ah: iyo
    b. Sabab sharci ah, xeernidaamiye sharci ama sharciyada kaleba, Hadii isaga/iyada uu tilmaantaas usoo jeediyey Waaxda Qandaraaska Iibka , isaga ayaa laga rabaa inuu Waaxda Qandaraaska Iibka ku qanciyo in arrimahaas (tilmaamahaasi) ay run yihiin.

**29. U Ogolaanshaha Bulshada Dhegeysiyada**

1. Iyadoo la raacayo qodobada iyo xeernidaamiyahaan, Dhegeysi kasto ee guddigu qabanayo waa iney goob jog yihiin dhinacyadu.

2. Guddiga dib u eegista waa ka reebi karaa dhinac ama dhinacyada dhegeysi kasta ama qayb kamid ah dhegeysiga hadii loo baahdo:

    a. Iyadoo la tixgelinayo habsami u socodka iyo nabadgelyada; ama
    b. Si loo ilaaliyo arrimaha khaaska ah ee dhinac ama danta dadka laga tirada badan yahay

**30. Kaydinta iyo gudbinta dukumentiyada**

1. Dukumenti kasto oo loo baahan yahay ama ay ogolaanyaan nidaamkani ama uu amro Guddiga dib u eegista in loo keeno ama uu kaydiyo Guddiga dib u eegista ama loo gudbiyo qof kasto waa in:
    a. La keeno ama lagu diro iyadoo lagu aadinayo cinwaanka;
    b. Lagu diro fakis ama lambar fakis ah; ama
    c. Lagu diro iimayl oo loo diro cinwaan iimayl ah.
2. Dukumentiga loo dirayo Shaqsi waxaa toos loogu gudbin karaa qof ahaantiisa isagoo gacanta laga saarayo shaqsigaas
3. Hadii Guddiga dib u eegista loo sheego in qof uu metalayo racfaan qaataha Guddigana la siiyo cinwaanka metelahaas, hadii dukumenti loo dirayo racfaan qaataha waa in nuqul kamid ah loo diro metelaha racfaan qaataha.
4. Hadii dukumenti loo gudbiyo qof hore loogu sheegay Guddiga dib u eegista inuu metelo dhinacaas, waxaa loo arkayaa in dukumentigaa loo diray dhinacaas.

5. Farqada (6) aad ee qodobkan, dukumenti kasto oo loo diro qof sida uu qabo sharcigani, Hadii aan la xaqiijin inaan la gudbin, waxaa loo arkayaa in la gudbiyey:
    a. Markii dukumentiga lagu diray boosto ama gacanta laga dhiibey meel kamid ah Soomaaliya, maalinta labaad ee xiliga la diray.
    b. Markii dukumentiga lagu diray iimayl ama fakis, Isla maalintaas la diray.
6. Ogeysiis kasto oo racfaan, oo qofka loogu gudbiyey qof ahaan, waxaa loola dhaqmayaa in loo gudbiyey markii qofkaasi helo ogeysiiska.

**31. Cinwaanka adeegga**

1. Dhinac kasta iyo qof kasta oo metalayo dhinac, waa inuu uu ugu gudbiyaa Guddiga dib u eegista qoraal ahaan cinwaanka laga heli karo oo dukumentiyada loogu soo dirayo iyo isbedel kasto oo ku dhaco cinwaankaas.
2. Ilaa dhinac ama wakiil uu ogeysiiyo Guddiga dib u eegista isbedel ku dhacay cinwaankiisa, dukumenti kasta oo loogu gudbiyo cinwaankii ugu danbeeyey oo Guddiga la siiyey, guddigu dib u eegistu wuxuu u arkayaa in dukumentigaa sida ugu haboon loogu gudbiyey.

**32. Tirsiga waqtiga**

1. Marka muddo waqti ah in la qabto hawl kasta oo lagu cayimay nidaamkaan ama amarka Guddiga dib u eegista, waqtigaas waxaa loo tirinayaa sida soo socoto:

    a. In laga saaro Maalinta uu waqtigu bilaabanayo; iyo
    b. Hadii waqtigu yahay 10 casho iyo wax ka yar, in laga saaro maalmaha fasaxa (hadii aan waqtiga loo cayimin inuu waqti maalin walbo ah yahay)

2. Hadii waqtiga lagu cayimay nidaamkaan ama amarka Guddiga dib u eegista in hawl kasta lagu dhamee oo la qabanayo ku dhamaato maalin fasax ah, hawshaas xili sax ah lagu qabtay hadii la dhameeyo maalinta ku xigta ee shaqo.

**33. Saxiixa dukumentiyada**

1. Shuruud kasta oo ka mid ah hababka in dukumentiga uu saxiixo dhinac ama wakiilkiisa waa iney noqotaa mid lagu qanco, Hadii ay dhacdo in dukumentiga la kaydinayo ama loo gudbinayo si electaroonik ah sida ku cad nidaamkaan, qofka laga rabo inuu saxiixo dukumetiga waa inuu ku qoraa magaciisa ama ku sameeyaa hab kombuyuutaraaysid ama siyaabo kale oo farsamo.

**34. Khaladaadka Nidaamka**

Marka, ka hor intaan Guddiga dib u eegistu goaamin ka gaarin racfaan ama codsi, ay dhacdo khalad dhinaca nidaamka ah, khaladkaasi ma burrinaayo lakiin

Guddiga dib u eegista ayaa bixinayo amar kasto, ama qaadayo talaabooyin kale, uu u arko in lagu saxi karo khaladka.

### 35. Sixitaanka amarada iyo goaanka

1. Guddiga dib u eegistu wuxuu xili kasto isbedel ku samayn karaa amar, ogeysiis go'aan, ama goaanka si uu saxo khalad dhinaca garaacista ah ama arimo kale oo si khalad u dhacay ama ka tegis. Markii amar, ogeysiis go'aan ama goaanka lagu bedelo dariiqadan, Guddiga dib u eegistu waa in uu u diro qoraalka cusub oo isbedelka lagu sameeyey dhinaca ama dhinacyada kuwaasoo u qaadanayo dukumentiga rasmiga ah.
2. Waqtiga dhinac uu dalbado ogolaanshaha inuu racfaan ka qaato ama dib u eegista goaanka la bedeley waxay ka bilaabaneysaa waqtiga dhinaca loo gudbiyey wax ka bedelka aqoonsiga (ogolaanshaha)

### 36. Racfaan u qaadashada maxkamadda sharciga ee go'aanadii Guddiga dib u eegista

1. Dhinac uu dacwadiisa qaaday Guddiga dib u eegistu oo ka biyo diidsan go'aanka Guddiga dib u eegista wuxuu 14 cisho gudohood maalinta go'aanka la soo saaray ama waqti ka badan oo maxkamada sharcigu ogoshahay codsan karaa in maxkamadda sare dib u eegis ku samayso go'aanka Guddiga.
2. Dhinaca go'aansado inuu racfaan ka qaato go'aankii Guddiga dib u eegista waa inuu nuqul u gudbiyaa dhinaca kale ee dacwada guddigu go'aamiyey kala dhexeysey.

### 37. Xeernidaamiyaalka qaybtan

Wasiirku isagoo eegayo talooyinka Maamulka iyo Guddiga dib u eegista, wuxuu soo saari karaa xeerar si sida ugu haboon loogu hirgeliyo qodobada ku jira lifaaqan.

## LIFAAQA 3AAD:
## XADIDAADAHA

1. Bixinta heshiiska abaalmarinta waxaa la shaacinayaa marka qiimaha lagu qiyaasay uu ka sareeyo:
    a. Haduu yahay heshiisdku mi qandaraas iib ee badeecad US$25,000
    b. Haduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee adeeg US$10,000
    c. Haduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee shaqo US$50,000
2. Dariiqooyinka dukaameysiga waxaa la isticmaalayaa marka qiimaha lagu qiyaasay qandaraaska iibka uu ka hooseeyo:
    a. Haduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee Badeecad, US$40,000
    b. Haduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee adeeg, US$40,000

    c. Haduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee shaqo, US$50,000
3. Tartan maxali ah waxaa la isticmaali karaa hadii qiimaha lagu qiyaasay qandaraaska iibka uu ka hooseeyo:
    a. Haduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee Badeecad, US$100,000
    b. Haduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee adeeg, US$40,000
    c. Haduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee shaqo, US$200,000
4. Tartan caalami ah waxaa la qaban karaa marka qiimaha lagu qiyaasay qandaraaska Iibka uu ka badan yahay:
    a. Hadduu yahay heshiiska qandaraaska iibka mid Badeecad US $1,000,000
    b. Hadduu yahay heshiiska qandaraaska iib ee Adeeg US $400,000
    c. Hadduu yahay heshiisku mid qandaraas iib ee shaqo US $2,000,000

Ansixinta bixinta heshiiska (qiima doolar ah)

**Nooca heshiiska**
Qiimaha heshiiska loo xadidey
Cida ansixinayso bixinta heshiiska lasoo jeediyey
Badeecadaha/aan aheyn adeeg talo bixin
Ka yar US$10,000
Sarkaalka Xisaabaha Qandaraaska Iibka

Ka badan US$10,000
Guddiga Qandaraaska Iibka
Hawlaha
Ka yar US$40,000
**Sarkaalka Xisaabaha Qandaraaska Iibka**

Ka badan US$40,000
Guddiga Qandaraaska Iibka
Adeega talo bixinta
Ka yar $10,000
Sarkaalka Xisaabaha Qandaraaska Iibka

Ka badan $10,000
Guddiga Qandaraaska Iibka

**Sharci kasto oo ka hor imanyo xeerka waa la baab'iyey**

**Tusmo:**

QAYBTA KOOWAAD: ARAAR....1
Qodobka 1: Cinwaan Gaaban ....1
Qodobka 2: Ujeedada Sharciga ....1
Qodobka 3: Qeexid....1
Qodobka 4: Dabbaqaadda Sharcigan ....4
Qodobka 5: Waxa aan Khusayn ....4
Qodobka 6: Ka-reebid....5
Qodobka 7: Dan iska-horjeeda ....5
Qodobka 8: Ka Qayb Qaadashada Haweenka ee Iibka iyo Qandaraaska....6
Qodobka 9: Mas'uuliyadda Qandaraaska Iibka ee Daryeelka Degaanka iyo bulshada....6
Qodobka 10: U adeegsiga elektroonikada Qandaraaska Iibka ....6
Qodobka 11: Mashaariic Wadaag ....6
Qodobka 12: Xirfadnimada Hawlaha Qandaraaska Iibka ....6
Qodobka 13: Iska horimaadka Sharciyada kale iyo Xeer Nidaamshayaasha ....6
Qodobka 14: Luuqadda....7
Qodobka 15: Xeernidaamiyaasha Qandaraaska Iibka, Tusmooyin iyo Qoraallo ....7
Qodobka 16: Khiyaano iyo Musuqmaasuq ....7

QAYBTA LABAAD: XEERARKAKA GUUD EE HABSOCODKA IIBKA ....8
Qodobka 17: Xirfadda Tartamayaasha ....8
Qodobka 18: U qalmid la'aan ka timaada macluumaad aan sax ahayn....9
Qodobka 19: Xulasho-hordhac ah ....9
Qodobka 20: Caddeynta iyo Wax Ka Beddelidda Dokumintiyada Ka Qaybgalka iyo Xulista Hordhaca ah ee Tartanka Qandaraaska ....10
Qodobka 21: Tilmaamaha Badeecadaha, Hawlaha, Iyo Adeegyada....11
Qodobka 22: Muddada ugu dambeysa ee lagu soo gudbinayo Ka qeybgalka dalabyada iyo codsiyada kale ee Qardaraaska ....11
Qodobka 23: Ka noqoshada habraacyada ama diidmada dalabyada Qandaraaska....12
Qodobka 24: Ogeysiiska guud ee abaalmarinta heshiiska....13
Qodobka 25: Iswareysiga tartamayaasha guuldareystay. ....13
Qodobka 26: Habka Lagu Xiriirayo ....13
Qodobka 27: Qorshaha Qandaraaska Iibka....13
Qodobka 28: Soo hormarinta Qandaraaska Iibka....14
Qodobka 29: Sixitaanka Qiimaha ....15
Qodobka 30: Ansixinta iyo Wax ka bedelka Heshiisyada....15
Qodobka 31: Kaydka iyo Warbixinnada ee Qandaraaska Iibka....15
Qodobka 32: Anshaxa Saraakisha Guud, Tartamayaasha Adeeg-bixiyeyaasha, iyo La-taliyayaasha ....17
Qodobka 33: Ka Reebista Qandaraaslayda, la taliyayaasha, iyo adeeg-bixiyayaasha....17
Qodobka 34: Farqiga mudnaanta gudaha iyo habka mudnaanta....18

QAYBTA SADDEXAAD: HAY'ADAHA LOO DHISAY MAARAYNTA IIBKA QANDARAASKA GUUD ....19

A. MAAMULKA QANDARAASKA IIBKA GUUD ....19
Qodobka 35: Dhismaha Maamulka Qandaraaska Iibka Guud ....19
Qodobka 36: Ujeedooyinka Maamulka ....19
Qodobka 37: Hawlaha Maamulka ....19
Qodobka 38: Xubinimada iyo Magacaabidda Guddiga....21
Qodobka 39: Muddada Xilka ....21
Qodobka 40: Kulanarka Guddiga iyo doorashada Guddoomiyaha Ku Xigeenka....22
Qodobka 41: Buuxin Jagooyin Banaan....23
Qodobka 42: Maamulka Guddiga ....23
Qodobka 43: Agaasimaha Guud....24
Qodobka 44: Xoghaynta iyo Waaxyaha Maamulka ....24
Qodobka 45: Maamulka Maalgelinta....24
Qodobka 46: Xisaabaha iyo Hantidhowrka ....25
Qodobka 47: Sannad Maaliyadeed ....25
Qodobka 48: Warbixinno sannadeed....25

B. UDDIGA MADAXA BANNAAN EE DIB U EEGISTA QANDARAASKA IIBKA 26
Qodobka 49: Aasaasidda Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib u Eegista Qandaraaska Iibka 26
Qodobka 50: Qaab dhismeedka Guddiga Dib u Eegista....26
Qodobka 51: Muddada Xilhaynta....27
Qodobka 52: Gunnada Xubnaha Guddiga Dib u Egista Qandaraaska....27
Qodobka 53: Hanaanka dib u eegista cabashooyinka iyo rafcaanka ....27

C. HAY'ADAHA IIBINTA QANDARAASKA....27
Qodobka 54: Hay'adaha Iibinta Qandaraaska ....27
Qodobka 55: Xilalka Sarkaalka Xisaabaha ....28
Qodobka 56: Go'aamada Hay'ada Iibin iyo xilalkeeda....28
Qodobka 57: Baaqa Hay'ad Iibin....28

D. Guddiyada Qandaraaska Iibka Guud....29
Qodobka 58: Abuuridda Guddiyada Qandaraaska Iibka Guud ....29
Qodobka 59: Hawlaha Guddiga Qandaraaska Iibka ....29
Qodobka 60: Kulamada Guddiga Qandaraaska Iibka Guud ....30

E. Waaxaha Qandaraaska Iibka ....30
Qodobka 61: Waaxaha Iibka Qandaraaska....30

F. GUDDIGA QIIMEYNTA DALABKA IYO SOO JEEDINTA....31
Qodobka 62: Guddiga Qiimaynta ....31

G. SHARCIYADA GUUD EE KU SAABSAN ANSHAXA EE HAY'ADAHA QANDARAASKA IIBKA GUUD ....31
Qodobka 63: Madaxbanaanida hawlaha iyo awoodaha....31

Qodobka 64: Awoodaha loo igmado Sarkaalka Xisaabaha ....................................................31
Qodobka 65: Khilaafka u dhexeeya dhinacyada..........................................................................32
Qodobka 66: Xafidaadda Qarsoonaanta Dokumintiyada..............................................................32
Qodobka 67: Heerarka sinnaanta ...............................................................................................33
Qodobka 68: Waqtiga Qandaraaska la galayo.............................................................................33

QAYBTA AFARAAD: HABABKA QANDARAASKA IIBKA IYO HABRAACYADA ..............................................................................................................................................33

A. Habka Xulashada Qandaraaska Iibka Guud ...........................................................................33
Qodobka 69: Kala Doorashada hababka Qandaraaska Iibka .....................................................33
Qodobka 70: Ka qaybgal tartan furan.........................................................................................34
Qodobka 71: Tartanka qandaraaska Guud ..................................................................................34
Qodobka 72: Tartan ka qeybgal caalami ah ................................................................................34
Qodobka 73: Muddada la oggol yahay in lagu soo gudbiyo dalabyada.......................................35
Qodobka 74:Mudadda lagu galayo heshiiska ............................................................................35

B. Habraacyada Qandaraaska Iibka ee Tartan Furan ..................................................................35
Qodobka 75: Dardargelinta ka qaybgal ka habraaca dalabka. ...................................................35
Qodobka 76: Dukumentiyada ka qaybgalka ...............................................................................36
Qodobka 77: Soo gudbinta Dalabyada ........................................................................................37
Qodobka 78: Dammaanada dalabka iyo ku dhawaaqidda badbaadinta dalabka ..................38
Qodobka 79: Furitaanka ka qaybgalka dalabka qandaraaska......................................................39
Qodobka 80: Baaritaanka, qiimeynta, iyo isbarbardhiga tartannada dalabka qandaraasyada ................................................................................................................................39
Qodobka 81: Daah fur-la'aanta faahfaahinta qiimeynta tartanka ka qaybgalka dalabka qandaraaska ..............................................................................................................................41
Qodobka 82: Reebannaanta gorgortannada lala galo bixiyayaasha qandaraaska ama tartameyaasha............................................................................................................................41
Qodobka 83: Abaalmarinta qandaraaska ....................................................................................41
Qoddobka 84: Aqbalaada qandaraaska dhaqangalka iyo saxiixa qandaraaska .......................43
Qodobka 85: Tartanka ka qaybgalka dalabka Labada-marxalood ..........................................44

C: DARIIQADAHA KALE EE QANDARAASKA IIBKA GUUD.....................................45
Qodobka 86: Tartan ka qaybgal dalab xaddidan ama go'an .....................................................45
Qodobka 87: Isticmaalka kooxaha dhismaha dawladda...............................................................45
Qodobka 88: Codsi Qiimo-sheeg ..................................................................................................46
Qodobka 89: Qandaraas bixinta tooska ah ..................................................................................47
Qodobka 90: Qandaraaska Qandaraaska Iibka ee leh Qaab dhismeed loo maro ..............47

QAYBTA SHANAAD: ADEEGYADA LA TALINTA EE QANDARAASKA QANDARAASKA IIBKA ......................................................................................................49

A. Qodobada Guud .......................................................................................................................49
Qodobka 91: Baaxadda adeegyada latalinta ..............................................................................49

Qodobka 92: Midowga Ururada lataliyayaasha......49
Qodobka 93: Tababar ama gudbin aqooneed......49
B. Xulashada Ku Salaysan Tayada Iyo Qiimaha......50
Qodobka 94: Xulashada ku salaysan tayada iyo qiimha......50
Qodobka 95: Xulashada hore ee la taliyayaasha......50
Qodobka 96: Codsi soo jeedin Dalab......51
Qodobka 97: Qiimaynta tayada......52
Qodobka 98: Qiimaynta kaharashka......53
Qodobka 99: Qiimaynta isku darka tayada iyo kaharashka......54
C. Hababka Kale Ee Xulashada......55
Qodobka 100: Xulashada ku salaysan tayada......55
Qodobka 101: Xulashada qiimaha ugu yar......55
Qodobka 102: Xulashada ku salaysan misaaniyad goán......55
Qodobka 103: Xulashada kulamada ku salaysan aqoonta......56
Qodobka 104: Xulashada shaqsi la taliye......56
Qodobka 105: Xulasho leh hal-il kaliye......57
Qodobka 106: Wakiilada Qandaraaska Iibka......57
Qodobka 107: Wakiilada Kormeerka......57
QAYBTA LIXAAD: HABRAACYADA LOOGU TALOGALAY QANDARAASKA IIBKA QANDARAASKA EE BIXINTA HESHIISYADA......58
A. Qeexidda Iyo Ujeeddooyinka Bixinta Heshiisyada......58
Qodobka 108: Qeexid......58
Qodobka 109: Ujeedooyinka Bixinta Qandaraasyada......59
A. BAAXADA, CODSIGA IYO HAYADAHA GANACSIGA GAARKA AH EE AAN U QALMIN......60
Qodobka 110: Baaxada iyo Codsiga......60
Qodobka 111:Hay'adaha Bixinta Qandaraaska......61
Qodobka 112: Doorka Waaxda Qandaraaska Iibka ee Socodsiinta Heshiisyada Bixinta Qandaraaska......61
Qodobka 113: Hawlgelinta la Taliyayaasha......61
Qodobka 114: Diyaarinta Qorshaha Bixinta Qandaraaska Iibka......62
Qodobka 115: Qaabdhismeedka Bixinta Qandaraaska......62
Qodobka 116: Xubnaha Guddi Wasaarado isku dhafka ah ee Bixinta Qandaraaska......62
Qodobka 117: Hawlaha Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraaska:......63
Qodobka 118: Kulamada Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ah ee Bixinta Qandaraaska.64
Qodobka 119: Daah-Furida danta......64
Qodobka 120: Qabsoomida kulanka......64
Qodobka 121: Dhismaha Waaxda Farsamo ee Bixinta Qandaraaska......65
Qodobka 122: Hawlaha Waaxda Farsamo ee Bixinta Qandaraaska......66

Qodobka 123: Maalgelinta Waaxda Farsamo ee Bixinta Qandaraaska....................................67
Qodobka 124: Dadka Ganacsiga Gaarka U Leh/Hay'adaha laga joojiyay..............................67

C: Qorsheynta Habraaca Bixinta Qandaraaska Iibka ..........................................................67
Qodobka 125: Iskujirka Qorshaha Horumarinta Dhaqaalaha ...........................................67
Qodobka 126: Ma jirto Bixin Qandaraas oo Shahaado la'aan...........................................68
Qodobka 127: Shuruudaha lagu soo saaraayo Shahaadada Bixinta Qandaraaska................68
Qodobka 128: Usoo bandhigida bulshada hababka meeleynta hantida...............................68
Qodobka 129: Warbixinada loo gudbinayo kulanarka dhinacyada daneynayo......................68
Qodobka 130: Diiwaannada Habraaca Ka Qaybgalka Bixinta Qandaraaska.........................69
Qodobka 131: Baarista Diiwaannada ...............................................................................69
Qodobka 132: Diiwaannada gaarka ah ee La Qoraayo ........................................................69
Qodobka 133: Dokumeentiga ka qybgalka Tartanka ..........................................................69
Qodobka 134: Tartanka Dokumeentiga Ka Qeybgalka ee Qaranka......................................69
Qodobka 135: Tartanka dokumeentiga ka qaybgalka ee Caalamiga......................................70
Qodobka 136: Shirkadaha dalka ee ka qayb galaya tartanka ka qaybgalka dokumeentiga ee caalamiga...............................................................................................................70
Qodobka 137: Shuruudaha Codsiga ee lagu Xulanayo Bixinta Qandaraasyada .....................70
Qodobka 138: Tartanka dokumeentiga ka qayb-galka la xaddiday .......................................70
Qodobka 139: Isha Keliya ..................................................................................................71
Qodobka. 140: Ogolaanshaha hore ee IMCC ........................................................................71

D. Diyaarinta Dokumentiga Ganacsi.....................................................................................71
Qodobka 141: Habqabadka Aas-aaska ah/ ee Daraasadka Suura galka ah ..........................71
Qodobka 142: Bixinta Qandaraaska ee Dokumentiyada Ka Qayb-galka Tartanka.............71
Qodobka 143: Baaxadda Dokumentiyada ka qayb-galka ee bixinta qandaraaska.................72
Qodobka 144: Wargelinta xogta guud ee Fursadda maal gashiga, sheegidda daneynta ama Arjiga dalabyada....................................................................................................72
Qodobka 145: Habka Wax loo baahinayo ...........................................................................72

E. Kulanka Dalabka hordhaca ah, Dalab soo gudbinta iyo Furitaanka.....................................73
Qodobka 146: Kulanka dalabka hordhaca ah.......................................................................73
Qodobka 147: Waxyaabaha gaarka u ah Kulanka dalabka Hordhaca ah ...............................73
Qodobka 148: Soo gudbinta iyo Furitaanka dalabyada.........................................................73

F. Qiimayn............................................................................................................................73
Qodobka 149: Habraaca Qiimeynta......................................................................................73
Qodobka 150: Xaqiijinta Shuruudaha Qiimaynta ...................................................................73
Qodobka 151: Waxyaabaha ugu yar ee shuruuddaha qiimeynta.............................................74
Qodobka 152: Shuruudaha reebban marka qiimaynta la samaynayo.......................................74

G. Qiimaynta ka Dib. ............................................................................................................75
Qodobka 153: Qiimaynta Warbixinta .....................................................................................75
Qodobka 154: Taxadir Sameynta...........................................................................................75

Qodobka 155: Qaabka Heshiiska ....76
Qodobka 156: Wada Xaajood ....76
Qodobka 157: Arrimaha tixgelinta mudan xilliga wada xaajoodka. ....77
Qododka 158: Xog dhowrista Heshiiska ....78
Qodobka 159: Maareynta Heshiiska ....78
Qodobka 160: Xeerarka khuseeya bixinta qandaraaska macdanta iyo batroolka ....78
QAYBA TODOBAAD: MEELEYNTA ALAABTA IYO QALABKA ....79
Qodobka 161: Awoodda Meeleynta ....79
Qodobka 162: Habraacayada Meeleynta ....79
QAYBTA SIDEEDAAD:CABASHOOYINKA IYO RACFAANNADA DIB U EEGISTA DACWOOYINKA ....81
Qodobka 163: Xaqqa Dib u Eegista ....81
Qodobka 164: Dibu eegista uu Sameeyo Sarkaalka Xisaabaha ee hay'adda Qandaraaska Iibka ....81
Qodobka 165: Dibu Eegista Gudiga Madaxabanaan ee Qandaraaska Iibka ....82
Qodobka 166: Hababkaka Madaxa Bannaan ee Dibu eegista Qandaraaska Iibka ....83
Qodobka 167: Dib-u-Eegis Maxkamadeed ....83
QAYBTA SAGAALAAD: QODDOBADA GUUD (GENERAL PROVISIONS) ....83
Qodobka 168: ka Difaaca mas'uuliyad shakhsi ....83
Qodobka 169: Arjiga xogta ee Maamulka ....83
Qodobka 170: Hantidhawrid Waqtiyeysan ....84
Qodobka 171: Baaritaanka uu sameeyo Maamulka ....84
Qodobka 172: Habraaca dhammaystirka baarista ....85
Qodobka 173: Xadgudubyada la xiriira Sharcigan ....85
Qodobka 174: Helitaanka Dadweynaha ....85
Qodobka 175: Nasakhid iyo wax ka beddel ....86
Qodobka 176: Qoddobo ku meel gaar ah ....86
Qodobka 177: Dhaqan gelinta Sharcigan ....86
Qodobka 178: Nuqulka Ingiriiska ayaa Asal ah ....86
LIFAAQA 1aad: XEERKA SARAAKIISHA DOWLADDA, TARTAMAYAASHA, ADEEG BIXIYAALKA, HESHIIS GALAYAASHA, TALOBIXIYAYAASHA QANDARAAS QAATAYAASHA ....87
LIFAAQA 2aad: Nidaamka GUDDIGA Qandaraaska Iibka MADAXA BANAAN EE DIB U EEGISTA ....89
LIFAAQA 3AAD: XADIDAADAHA .... 101